Af Soomaali - somali

# HAGE GANACSI

## Kaganacsiga dalka Finland

Laadukasta neuvontaa
Uusyrityskeskukset
Suomi

# Horudhac

Dadka dalka u soo guurey inay aasaastaan ganacsi ay ayagu leeyihiin waa hab wanaagsan oo ay dalka Finland uga shaqaaloobi karaan. Waqtigaan hadda la joogo dalka Finland waxaa ka hawlgala qiyaastii 6500 oo ah gacacsi ay aasaaseen dad wadanka dibadiisa ka soo guuray. In ka badan laba meelood meel oo ka mid ah ganacsiyadaan waxay ka hawlgalaan caasimada iyo agagaarkeeda.

Hagahaan waxaa loogu talogalay dadka doonaya inay ganacsi ka bilaabaan dalkan Finland. Waxaa laga yaabaa inaad haysatid fikrad ganacsi, laakiin waa in fikradaas weli horay loo sii wado oo la kobciyo. Hagahaan waxaa laga helayaa arimo muhiim ah, oo ay tahay inaad sii ogaatid oo aad sii lafo gurtid ka hor inaadan go'aansan inaad ganacsi bilowdid.

Waa inaad samaysid xisaab, waaxana inaad sii ogaatid suuqa iyo maalgelinta. Si wanaagsan ma u taqaanaa qawaaniinta Finnishka? Ka fakar sidoo kale, inaad dabeecad ahaan tahay qof ganacsade ahaan u shaqayn kara.

Finland waa dal u wanaagsan ganacsadaha, qofka gacanacsiga bilaabayana wuxuu cawinaad u heli karaa siyaabo badan oo kala duwan. Dadka doonaayaa inay aasaasan ganacsi dhibaatadoodi ugu wayn waxay ka imaanaysaa xagga helitaanka maalgelinta.

Teeda kale aad ayey u dhibaato badan tahay inaad ganacsade noqotid, haddii aadan luuqada Finnishka aqoon. Waxaa haboon inaad bilowdo barashada luuqada Finnishka haddiiba markii aad timaado wadanka Finland. Ka fakar sidoo kale, ma u baahan tahay inaad cusboonaysiisato xirfadaada aqooneed. Bilowga ma ku caawinaysaa adiga koorsada ganacsiga ee loogu talogalay dadka ganacsiga bilaabaya?

Waxaa laysku dayey in hagahaan lagu qoro luuqad si waadax ah loo wada fahmi karo. Erayada ganacsiga loo adeegsado waxaa lagu sharaxayaa dhamaadka buuga qaybtiisa dabme ee erayada ganacsiga.

Akhri hagahaan lana xiriir adeegyada la talinta ganacsiga ee bilaashka ah. Haddii aad degan tahay gobolka Uudenmaa waxaad la xiriiri kartaa Ganagsiga Helsinki (YritysHelsinki), sidoo kale Magaalada Vantaa ama Espoo waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta ganacsiga cusub (uusyrityskeskus), meelaha kale ee wadanka ka mid ah waxaa kuu adeegaya xarumaha ganacsiyada cusub iyo shirakadaha ka shaqeeya horumarinta agagaaraha magaalooyinka waaweyn. Adiga iyo shaqaalaha la taliya shirkadaha ganacsigu waxaad ka wada fakari kartaan, in fikradaada ganacsi ay noqon karto mid miro dhal xagga ganacsiga ah iyo in kale.



Hagaha Ganacsiga Finland wuxuu qayb ahaan ka dhashay maalgelinta sanduuqa dhaqaalaha arimaha bulshada ee Yurub (ESR-rahoitteinen) ay ugu talo gashay mashruuca adeegyada shirkadaha Dhaqamada kala duwan leh. Hagahaan waxaa lagu sameeyey iskaashiga shaqaalaha xagga gancsiga shirkadaha kala taliya iyo jaamacada Helsinki xarunteeda waxbarashada iyo horumarinta ee Palmenia khuburadeeda xagga luuqada faseexa ah. Sidoo kale waxaa ka qayb qaatay magaalooyinka Espoo, Vantaa iyo Kauniainen.

Hagahaan waxaa lagu turjumay luuqado kala gedisan. Shaqada turjumaada iyo faafinta daabacaada waxaa maalgeliyey mashruuca-Masuuni ee sanduuqada dhaqaalaha arimaha bulshada ee Yurub (ESR-rahoitteinen), kaasoo ay wadaagayeen ururka xarumaha shirkadaha cusub ee Finland, Cursor Oy, Ganacsiga Helsinki (YritysHelsinki), ururka xarunta shirkadaha Cusub ee Tampere iyo agagaarkeeda.

Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogagga internet ee hoos ku qoran:

**www.uusyrityskeskus.fi**
**www.yrityshelsinki.fi**
**www.vuyk.fi**

**www.espoonseudun-uusyrityskeskus.fi**

**www.yrityssuomi.fi**

# Tusmada buuga


Waa maxay ganacsigu? 4
Adigu xattaa ganacsade ma noqon kartaa? 5
Noocyada kala duwan ee ganacsiga 6
Marxaladaha aasaasida ganacsiga 8
Fikrad ku saabsan ganacsi 9
u badal fikrad ganacsi 9
Qorshaynta hawlaha ganacsiga 10
Baarista SWOT 15
Maaraynta khataraha ganacsiga 15
Suuqgeyn iyo xayeesiin 16
Qiimo samayn 18
Maalgelinta ganacsiga bilowga ah 20
Lacagta bilowga ah 21
Qaybaha ganacsi oo ruqsad u baahan 22
Noocyada ganacsiga 24
Arimaha diiwaangelinta 28
Xisaabaadka iyo xisaab xirka ganacsiga 30
Canshuurta dakhliga iyo canshuurta qiimaha alaabta la socota 32
Caymis 36
Caymiska hawlgabka ganacsadaha (YEL) –caymiska hawlgabka iskiis-u-shaqeystaha (self) 37
Lacagta badbaadada shaqo la'aanta ganacsadaha 38
Shaqaalaynta shaqaalaha 39
Dhaqanka ganacsiga ee dalka Finland 40
Mas'uulida shirkadda ka saaran xagga bey'ada 41
Liiska xasuus-qorka ee ganacsadaha ganacsi bilowga ah 42
10 Tilaabo oo xagga guusha loo qaaday 43
Erayo ganacsi 44
Xarumaha shirakadaha cusub waxay u adeegayaan 52



Hagehaan waxaa loogu talogalay, adigaagan doonaya inaad ganacsi ka bilowdo dalkan Finland. Shaqada turjumaada iyo faafinta daabacaada hagehaan waxaa maalgeliyey mashruuca-Masuuni ee sanduuqada dhaqaalaha arimaha bulshada ee Yurub (ESR-rahoit-teinen)

**Daabace:** Ururka Xarumaha ganacsiga cusub ee Finland (Suomen Uusyrityskeskukset ry)
**Qoraalada buugaan waxaa iska kaashaday:** Xarunta shabakada ganacsiga cusub
**Naqshada buuga iyo laabitaanka waxaa sameeyey:** Unikuva / Mats Vuorenjuuri


**www.uusyrityskeskus.fi**


© Suomen Uusyrityskeskukset ry 2011
Dhammaan xuquuqaha fidinta iyo daabacaada buugaan waa dhawranyihiin.



Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto
Vipuvoimaa EU:lta 2007–2013

# Waa maxay ganacsigu?



Ujeedada hawlaha ganacsigu, waa in ganacsigu guuleysto oo uu sameeyo faa'ido. Iskudayga ganacsigu waa aqoonsiga khataraha la xiriira ganacsiga iyo u diyaar garowga ka hortagooda, taas macnaheedu waa xirfad u lahaanshada in hawlaha ganacsigu noqdaan kuwo miro dhal ah oo faa'ido ka soo baxdo.

Sidoo kale iskudayga ganacsigu waa ku kalsoonaanta fikradaada ganacsi. Iskudayga ganacsigu wuxuu noqon karaa hab nololeed ama dariiq uu qofku nolol-maalmeedkiisa kula soo baxo uuna isku shaqaalaysiiyo isagu. Iskudayga ganacsigu sidoo kale waa ka faa'iideysiga xirfadahaaga aqooneed, tan bulsho iyo tan luuqadeed iyo inaad ganacsigeena Finland ka dhigto mid caalami ah.

## Waa kuma ganacsaduhu?

Qeexitaanka rasmiga ah ee ganacsaduhu wuxuu ku xiran yahay hadaba sida ay u qeexaan shaqaalaha xafiisyada dawladu. Dhinacyada xuquuqda ganacsiga, hawlgabka iyo qasnada shaqa la'aanta ganacsadaha waxaa loo qeexaa siyaabo kala duwan. Tani hal tusaale: Ganacsade waa qofka kaligiis ama dad kale kula jira hawlo ganacsi, kuwaas oo ujeedadoodu ay tahay inay faa'ido soo saaraan. Hawlaha ganacsigana ay la xiriirto qaadashada khatar ka imaan karo ganacsiga.

Marka laga fiiriyo xaga qaadashada lacagta shaqa la'aanta, ganacsade waxaa loo arkaa qofka,

- ay saaran tahay waajibaadka galitaanka caymiska hawlgabka ganacsiga YEL sida uu qabo sharciga ganacsigu/ ama
- ka shaqeeya asagoo haya mansab hogaamineed (gudoomiye ama xubin ka mid ah maamulka) shirkada, uu isaga qudhiisu ku leeyahay saami ugu yaraan ah 15% ama uu la wadaago xubin ka mida qoyskiisa saami ugu yaraan gaaraya 30 % ama
- ka shaqeeya shirkad uu leeyahay asaga, xubin qoyskiisa ka mid ah ama si wada jir ah ay u wada leeyihiin asaga iyo xubnaha qoyskiisa ka miduhu ugu yaraan 50% shirkada ka mida ah.

Markii la xisaabinayo saamiga lahaanshada, waxaa sidoo kale xisaabta lagu darsadaa si dadban u lahaanshada ganacsiga ayadoo loo marayo ganacsi ama shirkad kale. Tusaale ahaan shirkad aad saami ku leedahay haddii ay sii leedahay shirkad kale oo aad sidaas shirkada kale wax uga lahaato.

# Adigu xattaa ganacsade ma noqon kartaa?

Dabeecadaha shakhsiyadeed, aqoonta iyo helitaanka imkaaniyaadka ganacsigu waxay aasaas u noqdaan hawlaha ganacsiga miro dhalkooda. Qaybaha kala duwan ee ganacsiga waxaa looga baahan yahay aqoonyo iyo dabeecado kala gedisan. Ka fakar waxyaabaha aad ku fiican tahay. Waa maxay waxa ay tahay inaad weli horumarisid ama kobcisid oo aad hadda ku liidatid?

## Dabeecadaha wanaagsan ee ganacsaduhu uu leeyahay waxaa ka mid ah inuu yahay qof

- firfircoon
- hal abuur leh
- geesi ah, asagu is adeejiya
- higsada natiijo wanaagsan
- go'aan leh
- xirfad wax iibineed leh
- diyaar u ah inuu khatar galo
- dulqaad u leh xaaladaha mugdigu ku jiro

## Arimaha dhiirigeliya samaysiga ganacsiga

- inaad adigu madax isku noqotid oo aan qofna ku xukumin
- adiga ayaa cayimanaya hawlahaaga shaqo
- saamayn ku yeelashada jadwalka shaqada
- suurtogalnimada inaad dhaqaale ahaan horumartid
- inaad adigu meel marisid
- waxaad shaqaalayn kartaa dad kale

## Caqabadaha horyaala qofka doonaya inuu ganacsade noqdo

- helitaanka maalgelinta
- aqoon la'aan iyo waayo aragnimo la'aan xagga ganacsiga ah
- aqoon la'aaan ah xagga sharciga, canshuuraha iyo mid ah xagga gelitaanka heshiisyada
- aqoon ku filan oo uusan qofku u lahayn luuqada Finnishka
- aqoon la'aan ah xagga dhaqanka ganacsiga ee Finnishka
- isticmaalka waqtiga (shaqo/waxbarasho, qoyska/xaaska, waqtiyada firaaqada iyo wixii la mid ah).

Qofka qorshaynaya inuu shirkad ganacsi aasaaso, waa inuu yaaqaano qaybta ganacsiga ee uu doonayo inuu aasaaso. Sidoo kale waa inuu qofku wax ka yaqaano waxyaabaha aasaasiga u ah maamulka dhaqaalaha, qiimo dejinta, miisaaniyada iyo suuqgeynta. Waxaa suurtogal ah in dhamaan waxyaabahaas aan soo sheegnay ee ah aqoonta iyo xirfada la kordhiyo ayadoo la kaashanayo waxbarasho iyo xeeldheereyaasha xagga arimaha dhaqaalaha ah.

Waxaa haboon in la xasuusnaado, in u wareegida xagga ganacsiga macnaheedu aysan ahayn inuu qofku ahaado ganacsade inta noloshiisa uga dhimman. Hawlaha ganacsigu waxay noqon karaan waqti gaaban ama qayb ka mid ah qofka noloshiisa shaqo oo dhan.



# Noocyada kala duwan ee ganacsiga

## Aasaasida shirkad ganacsi oo cusub

### Gebi ahaan fikrad ganacsi oo cusub

Aasaasida shirkada ganacsi ee cusub waxaa lagu salayn karaa gebi ahaanba fikrad ganacsi oo cusub, shey, adeeg ama iibinta wax cusub oo la alifay markaas. Tani waa tan ugu adag marka la bilaabayo ganacsiga cusub waxayna xambaarsan tahay khataraha ganacsi kuwa ugu badan.

## Fikrad ganacsi oo horay u jirtay

Sida ugu caadisan ee ganacsi loo bilaabo waa ayadoo la adeegsado fikrad ganacsi oo horay u jirtay, laakiin lagu meel mariyo hab cusub oo tartan ganacsi ahaan ka wanaagsan ama lagu adeegsado suuq cusub.

## Iibsashada shirkad ganacsi oo shaqaynaysa

Dalka Finland waxaa ku yaal shirkado ganacsi oo faro badan, kuwaas oo u baaahan wax sii wada hawlahooda ganacsi. Helitaanka shirkado noocaan oo kale ah waxay bilow fiican iyo cawinaadba u noqon karaan hawlaha bilaabida ganacsiga cusub. Si kastaba ah ahaatee iibsashada ganacsiga cusub wuxuu sidoo kale mar walba leeyahay khatartiisa, laakiin wuxuu ganacsadaha cusub siinayaa hab fudud oo uu ku bilaabo ganacsiga iyo fursad uu haddiiba ku bilaabi karo hawlaha ganacsiga, sababtoo ah waxaa diyaar ah oo horay u sii jirey macaamiishii iyo iibkii.

### Waxaa jira wadiiqooyinkaan kala ah

1) inaad iibsato dhamman shirkad ganacsi oo shaqaynaysa
2) inaad iibsato qayb ka mid ah shirkad ganacsiga (hal laan oo ka mid ah ganacsiga)
3) inaad iibsato albaab ganacsi
4) inaad iibsato qayb ka mid ah albaab ganacsi.



Shirkadaha la iibka ah waxaa laga heli karaa tusaale ahaan adeega raadinta (hakupalvelu) internetka ee Shirkadaha Finnishka ee ciwaankiisu yahay http://yritysporssi.yrittajat.fi.

Haddii aad doonaysid inaad iibsato shirkad ama ganacsi diyaar ah, cawinaad weydiiso dad khibrad u leh, si ay u qiimeeyaan xaalada dhaqaale ee shirkada iibka ah iyo khatarta ku jiri karta iibsashadeeda. Xirfadlayaalka xagga dhaqaalaha (xafiisyada xisaabaadka, hantidhawreyaalka, la taliyeyaasha xagga iibka shirkadaha) waxay talo ka bixiyaan,in ay ganacsiga shirkadu uu yahay mid faa'ido ka soo baxayso in xisaabaadka shirkada laga sameeyey uu yahay mid lagu kalsoonaan karo. Kahor intaa aadan sixiixin heshiiska iibsiga shirkada talo waydiiso khuburada xagga sharciga ah.

Si kastaba ha ahaatee iibsiga goobta ganacsiga oo kaliya ayaa ka nabadgalaayo badan iisiga shirkada oo dhan, sababtoo ah masuuliyadii hore ee shirkada iyo deymihii hore uma soo wareegayaan milkiilaha cusub.

## Ganacsiga Franchising ah ama magaca uun la iibsado

Ganacsiga Franchising ah wuxuu kuu suurto galinaayaa inaad ganacsi bilowdo idigoon isticmaaleyn fikrad ganacsi oo aad adigu leedahay. Franchising waa heshiis wada shaqayn oo waqti dheer ah oo dhexmaraya laba shirkadoo oo kala madax banaan. Bixiyaha franchisingu wuxuu iibsadayaasha ku wareejinayaa (kuwaas oo laga yaabo inay dhawr yihiin) xuquuqda isticmaalka fikrada ganacsiga oo wadata hagaha habka waxqabadku u shaqaynayo, kaasoo horumariyey uuna qorsheeyey bixiyaha franchisinka isla markaasna uu isagu ilaalinayo meelmarintiisa. Muhiimada koowaad ee hawlaha ganacsiga ee franchisinku waa, in bixiyaha franchisingku uu fikrada faafiyo oo uu aasaaso shirkado ganacsi oo badan oo ku shaqaynaya fikrad ganacsi oo isku mid ah tusaale ahaan laga sameeyo dhawr magaalo oo kala duwan. Finland waxaa ka shaqeeya shirkado franchising ah tusaale ahaan kioskiyada-, qaybaha xaaqinka iyo maqaayadaha. Wixii macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa cinwaanka Inter-

netka ee ururka Franchising Finland **www.franchising.fi.**

## Ganacsi shaqada lagu dhinac wado

Bilaabida ganacsida shaqada lagu dhinac wado waa mid tusaale ahaan mudan in dadka lagula taliyo inay ku dhinac wadaan shaqada rasmiga ah iyo waxbarashada, haddii uusan qofku hubin, inuu ganacsigu miro dhal noqonaayo marka ugu hareysa. Ganacsiga shaqada lagu dhinac wado waxaa marka hore lagu tijaabin karaa, in la heli karo macaamiil ku filan ganacsiga, waxaana la qiimeyn karaa sida uu horumarka ugu tilaabsanaayo ganacsigu iyo inay macquul tahay in ganacsiga oo kaliya shaqo laga dhigto. Khatardaada dhaqaaluhu way yaraanaysaa maadaama uusan dakhligaaga oo dhan ku tiirsanayn horumarka iyo guusha ay ku tilaabsanayso shirkada ganacsigu.

Si kastaba ha ahaatee waxaa xusuus mudan,in xafiiska shaqada iyo xoogsashadu uusan siineyn lacagta bilowga! dadka isku dhinacwada shaqada iyo ganacsiga.

## Saamiley

Saamile ahaanshadu waxaa laga yaabaa inay ahaato hawl ganacsi, ayadoo ku xiran hadba, sida waajibaadka iyo awooda fulinta loogu qaybiyey xubnaha saamileyda ah.Tusaale ahaan ganacsiga qosku leeyahay xaaska iyo caruurtu waxay ka ahaan karaan saamiley. Shirkadaha yar yar waxaa dadka muhiimka u ah shirkada la siiyaa saamiyo, si ay shirkada ugu nagaadaan oo ay siiyaan aqoontooda iyo waqtigooda isla markaasna ay u horumariyaan shirkada.

## Ganacsiga wadareed

Ganacsi wadareedku waa ganacsi ay dhawr qofood oo doonaya inay ganacsato noqdaan hal shirkad ku wada samaystaan. Dhammaan dadkaas waxay masuul ka noqonaayaan horumarka ganacsi ee shirkada. Tusaale ahaan haddii ay labo shirkadood midoobaan ama ay isku darsamaan, saamileydii hore ee labada shirkad waxay sidoo kale saamiley ka noqon karaan shirkada cusub.

## Ganacsi bulsheed

Ganacsi bulsheedku wuxuu qaab ganacsi ahaan noqon karaa, magac ku shaqaysasho (toiminimi); shirkad furan (avoin yhtiö); shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahay (kommandiittiyhtiö); shirkad sheerar la leeyahay (osakeyhtiö) iyo shirkad iskaashato (osuuskunta). Intaas waxaa dheer in ganacsi bulshadeedka looga baahan yahay inuu buuxiyo shuruudaha soo socda:

1) dadka qayb ka noqonaya ganacsigaan waa in ugu yaraan 30% ay ahaadaan dad aan si buuxda shaqo u qaban karin ama mudo dheer shaqo la'aan ahaa, ganacsadaha waxaa lagu darayaa kuwaan.
2) In dhammaantood la siiyo mushaar waafaqsan heshiiska shuruudaha shaqada
3) in waqtiga shaqadu uu yahay in kabadan 75 % iyo in dadka aan si buuxda u shaqayn karin ay shaqeeyaan ugu yaraan 50 % ka mid ah waqtiga ugu badan ee la shaqeeyo qaybta shaqada ganacsiga ee laga shaqaynayo markaas.
4) Inay cawinaada dawladu ay siiso ay ka yar tahay laba meelood meel lacagta sannadkii shirkada soo gasha.

Ganacsiga bulshada waxaa la siin karaa cawinaad dowladeed si looga kabo sharashaadka mushaarka.

Xafiiska shaqada iyo xoogsashada ayaa haya diiwaanka shirkado bulshadeedka. Foomka codsiga (TM 3.09) ee loogu talogalay diiwaan ku calaamadaynta shirkadaha bulshada waxaa laga heli karaa bogga Internetka ee xafiiska shaqada- iyo xoogsashada **www.tem.fi.**



# Marxaladaha aasaasida ganacsiga

**Waa maxay fikrada ganacsigu, yaa loogu talogalay, Sidee loo meel marinayaa?**

**Qorashaha waxqabadka shirkada+xisaabaadka maalgelinta+xisaabaadka in ganacsigu yahay mid laga faa'iidi karo iyo in kale**

**Baaritaanka in hawlaha ganacsigu ay ruqsad u baahanyihiin iyo in kale**

**Maareynta maalgelinta**

**Doorashada nooca ay shirkadu noqonayso**

**Shakhsi magaciisa ku ganacsada** (Toiminimi)
- Shakhsi goob ganacsi leh
- Shakhsi xirfadiisa ku shaqaysta oo aan goob ganacsi iyo shaqaale kale toona lahayn

**Shirkado shakhsiyaad leeyihiin**
- Shirkad Furan
- Shirkad masuuliyadu saaran tahay milkii-leyaasha qaarkood oo keliya (ky)

**Waraaqaha aasaasida:**
- Heshiiska aasaasida

**Shirkad Saamiley ah**
- Gaar loo leeyahay (Oy)
- Caam ah oo saamiyadeeda suuqa xorta ah lagu kala iibsado (Oyj)

**Waraaqaha aasaasida:**
- Heshiiska aasaasida
- Nidaamka kaladam-beynta shirkada

**Iskaashato**

**Waraaqaha aasaasida:**
- Buuga aasaasida
- Koobiga shuruucda
- Shirka maamulka qoraalka shirka ka soo baxay; gudoomiyaha maamulka iyo dooras-hada agaasimaha

**Ogeysiiska aasaasida ee loodiro diiwaanka ganacsatada iyo nidaamka macluumaadka guud**
**Sidoo kale buuxinta foomka-Y ee aasaasida lagu ogeysiiyo xafiiska diiwaangelinta ganacsiga iyo maamulka canshuuraha**

**Caymisyada**

**Maareynta xisaabaadka**

Asaasida ganacsi waxay ka kooban tahay dhammaan marxaladaha kor lagu soo xusay, laakiin sida badan dhawrkii marxaladoodba hal mar ayaa wax laga qabtaa.

# Fikrad ku saabsan ganacsi u badal fikrad ganacsi

Fikrada ganacsigu waa aragtida ku wajahan waxa uu soo saarayo ganacsiga la bilaabayo. Aragtida ganacsigu ganacsigu way cadaataa kadibna qun yar ayaa looga dhigaa fikrad ganacsi oo si wanaagsan u shaqaynaysa. Fikrarada ganacsigu waxay sheegataa waxa ay shirkadu qabanayso iyo cida ay ugu talo gashay inay wax ka iibiso, sida ay shirkadu u meel marinayso arimahaan iyo nooca suuqa ay shirkadu ka hawlgalayso. Fikrada ganacsigu waxay ka jawaabtaa su'aalahaan kala ah **Maxaa la iibinayaa? Yaa laga iibinayaa? Sidee loo iibinayaa?**

Si qoto dheer uga fakar, shayga aad ku iibinaysid suuqa si wanaagsan ma uga gadmi karaa? Suuq nooce ah ayaa lagu iibinayaa? Maxay fikradaada cusub ee ganacsigu macaamiisha ka iibinaysaa? Xasuuso inaad fikradaada ganacsiga aad si gaar ah uga fiiriso dhanka aragtida macaamiisha. Shayga la iibinyayo (alaabta ama adeega ama isku darka labadooda) waa inuu ahaado mid macaamiishu ay diyaar u yihiin inay lacag ka bixiyaan. Waa arin muhiim ah inaad marka hore eegto baahida macaamiishu ay u qabaan shayga aad doonayso inaad ka iibiso, waxaa sidoo kale cadaanaya astaamaha shaygu leeyahay oo ay macaamiishu qiimeynayaan ee laga heli karo shayga aad ka iibsaneysid. Tusaale ahaan sheygaagu ma ka awood badan yahay, ka jaban yahay, ka tayo wanaagsan yahay, ka xiiso badan yahay ama ka sahlan yahay kuwa ay iibinayaan shirkadaha kale ee suuqa adiga kugula tartamaya?

Fahamka u wanaagsan waxaad helaysaa, markii aad si rasmi ah ugu tijaabiso arintaan oo aad sameyso rayi weydiin kooban ee xagga suuqa ah. Jawaab celinta saxda ah ee shayga aad iibinayso sida loo arko ka soo baxda waxay ka imaanaysaa macaamiisha laga yaabo inay shayga iibsadaan mustaqbalka. Si kastaba ha ahaatee ra'yi weydiintu mar walba ma sheegeyso sax ahaanshada sida macaamiishu ay wax u iibsan doonaan ama hab dhaqanka macaamiisha. Sidoo kale ra'yi weydiinta waxaa ka iibsan kartaa khuburo dibada ah ama ka baxsan shirkadaada, laakiin sida badan waa qaali.

## Fikrada ganacsigu waa inay ahaataa mid la meelmarin karo

Meelmarinta fikrada ganacsigu waxay u baahan tahay aqoonta iyo raasumaalka ganacsadaha ma ganacsatada, kuwaas oo looga baahan yahay raasumaal la isticmaalo iyo maalgelinta wajiga hore ee ganacsiga. Waxbarashada iyo aqoon u lahaanshada qaybta ganacsi oo laga bilaabayo waxay ahaan kartaa mid lagu helay waxbarasho, waayo-aragnimo shaqo ama wax hiwaayad ahaan lagu bartay. Noqo mid xaqiiqada udhaw marka laga hadlaayo baahida macaamiishu u qabto alaabta iyo adeega aad doonaysid inaad iibiso. Qorshayn si taxader leh loo sameeyey ayaad kor ugu qaadi kartaa suurtogalnimada ku guuleysiga ganacsigaaga. Ka fakar

- Faa'iida macaamiishu helayso: maxaa macaamiishu helayaan, xagee macaamiishu shayga u isticmaalayaan, maxay macaamiishu shayga u iibsanayaan
- Muuqaal maxay macaamiishu shayga uga iibsanayaan shirkadaan, maxay yihiin sawir-maskaxeedyada shirkada ama badeecadaha lala xiriiriyo
- badeecooyin: maxaa la soo saarayaa ama la iibinayaa, sidee shirkadaha lala tartamayo looga soocmayaa, muxuu yahay qiimuhu, baahadayn noocee ah, sidee loo gaarsiinayaa macaamiisha, ma loo baahan yahay la talin tusaale ahaan xagga internetka lagala talinayo macaamiisha.
- macaamiisha/kooxaha macaamiisha: waa kuwee macaamiishu, xagee joogaan inteese dhan yihiin, sidee lagula xiriiri karaa, imisa ayey diyaar u yihiin inay badeecadeena ka bixiyaan, see ayay u bixinayaan
- habka loo shaqaynayo: anaga miyaa badeecada samaynayna mise shirkad kale ayaan qandaraas ku siinaa inay noo sameyso, sidee loo xayeesiinayaa, sidee loo iibinayaa
- awooda wax soo saarka: goobya ay shirkadu ku shaqaynayso, mashiinada iyo qalabka kale, raasumaalka la geliyey, aqoonta iyo waayo-aragnimada ganacsadaha iyo shaqaalaha.

## Qaybta ganacsiga iyo xaalada tartanka ganacsi

Qaybta ganacsi waxaa loola jeedaa qaybta ay shirkadu ka shaqaynayso tusaale ahaan hawlaha quudinta (maqaayadaha iyo kafeteeriyooyinka), adeegyada maal gelinta (bangiyada), dhismaha ama nadaafada. Qaybaha ganacsiga qaarkood waxaa ka hawlgala shirkado farabadan taas macnaheedu waa in qaybahaas uu ka jiro tartan aad u farabadan. Markaas qaybahaas faa'iidada suurto galka ahi waa hooseysaa, sababtoo ah shirkadu waxay ku qasban tahay inay qiimo jaban wax ku iibiso. Markasta oo uu yaraado qiimiga cuseybka ee shaygu iyo mar kasta oo qaybta shirkadaadu ay tahay qayb ganacsi oo mudo dheer jirtey, waxaa kaa hor imaanaya tartan ka badan qaybaha kale ee cusub, ama tartameyaal iibinaaya badeecooyin la mid ah kuwa aad iibineyso adigu.

Hadaba raadi inaad hesho fikrad ganacsi oo cusub! Mar walba sida badeecadaha ay ugu jiraan waxyaabo cusub oo farobadan ayaa tartankooduna u yar yahay. Dhanka kale markaas waxaa adkaanaya odoroska faa'iidada hawlaha ganacsiga ama barbardhigida fikrada ganacsiga fikradaha shirkadaha kale ee ka shaqeeya qaybtaada ganacsiga, sababtoo ah waxaa yar shirkadaha kale ee ka shaqeeyan qaybtaada ganacsi. Baaxada suuqa iyo qaab dhismeedka baahida badeecada waa in markaas la qiyaaso, markaasna faa'iidada laga xisaabo qiyaastaas.

# Qorshaynta hawlaha ganacsiga

### Waa maxay qorshaha waxqabadka ganacsigu (LTS)?

Qorshaha waxqabadka ganacsiga waxaa loola jeedaa, qorshe qoraal ah oo laga sameeyo hawlaha ganacsiga.

Qorshaha ganacsigu wuxuu sawir ka bixinayaa sida dhab ahaan loo meel marinayo fikrada ganacsida: Goobta ay shirkadu ka shaqaynayso, habka loo shaqaynayo iyo waxyaabaha la higsanayo. Qorshaha waxqabadku waa balaaran yahay, faah-faahsan yahay waana mid lagu cayimay waxa la higsanayo waqtiga dheer iyo miisaaniyad cayiman oo la doonayo in la helo iyo weliba maalgelinta iyo xisaabaadka dakhliga qasnada.

Qorsha marka la samaynayo waxaa si wanaagsan loo falanqeeyaa waxyaabaha uu leeyahay shayga la iibinayo, kooxaha macaamiisha, xaalada tartanka suuqa, waxbarashada iyo aqoonta ganacsadaha ama ganacsatada iyo sida ay shirkadu dooneyso inay u suuqgeyso badeecada. Qorshaha waxqabadka ganacsiga waxaan sidoo kale ku qiyaasi karnaa faa'iidada iyo cadada lacagta looga baahan yahay bilaabida hawlaha ganacsiga anagoo isticmaalayna habka xisaabaadka (baahida maalgelineed).

Qorshaha wanaagsan waxaa sidoo kale lagu soo bandhigaa waxyaabaha ganacsiga khatarta u keeni kara, kuwaas oo saameyn ku yeeelan kara mirodhalka ganacsiga.


Qorshaha waxqabadka ganacsigu marka laga reebo inuu ganacsadaha u yahay qalab qorshayn, waxaa kale ee shirkada u yahay tuul wadaxaajood, marka lala xaajoonayo maalgeliyeyaasha suurtogalka ah, dadka sirkada wax ku leh, shirkada goobta ganacsi laga kireysanayo ama meelaha alaabooyinka laga soo iibsado. Asagoo adeegsanaya qorshaha waxqabadka ganacsiga ganacsaduhu cadayn karaa in ganacsigu guuleysanayo, tusaale ahaan asgoo ay weli ka maqanyihiin macluumaadka xisaabxirku. Qorshaha waxqabadka ganacsiga oo si wanaagsan loo sameeyey wuxuu wax ka sheegayaa faaiida ay yeelan karto shirkadu iyo aragtida mustaqbalka, sidoo kale waxay sahleysaa helitaanka maalgelinta.

**Samee qorshaha waxqabadka ganacsiga adigoo adeegsanaya tuulka fudud ee shabakada internetka: www.liiketoimintasuunnitelma.com**

Qorshaha waxqabadka ganacsiga waxa loo baahanyhay oo kale marka marka xafiiska shaqada iyo xoogsashada laga dalbanayo lacagta bilaabida ganacsiga (starttiraha) ama xaruntaELYga laga dalbanayo lacagta kaalmada shirkadaha.

### Qaybaha qorshaha waxqabadka ganacsiga

Waxaa haboon in qorshaha waxqabadka ganacsiga dib u habayn loogu sameeyo si joogto ah isla markaasna taariikh loo yeelo.



## Tusaale qaab dhismeedka qorshaha waxqabadka ganacsiga

**1) Sawir ka bixinta fikrada ganacsiga:**

Fikrada ganacsigu waxay wax ka sheegeysaa,waxa ay shirkadu qabanayso iyo cidda ay ka iibineyso alaabada ay soo saarto, iyo sida ay shirkadu u meelmarinayso arimahaan. Waa maxay qiimaha cusub ee fikradaada ganacsigu ay leedahay (maxaa cusub oo ku jira fikrada) iyo maxay tahay sababta ay macaamiishu u xiisayn lahaayeen alaabadaada. Sidoo kale qaybtaan sawir uga bixi taxliilka SWOT, bogga 15.

Si sahlan u samee qorshaha waxqabadka ganacsiga, adigoo isticmaalaya shabakadeena intenetka ee cinwaankeedu yahay
**www.liiketoimintasuunnitelma.com**




**2) Sawirida aqoonta:**

Aqoonta ganacsadaha iyo shaqaalahu waa inay kaabtaa hawlaha ganacsiga ee shirkada. Liis ka samee aqoonta iyo waaya-aragnimada shaqaalaha iyo meelaha ay ku fiican yihiin iyo meelaha ay ku liitaan.

**3) Sawir ka bixinta alaabada la iibinayo:**

Si adag sawir uga bixi alaabta adigoo ka fiirinaya aragtida ay ka qabi karaan macaamiishu. Sharaxaad ka bixi dhinacyada kala duwan ee shayga la iibinayo uu leeyahay marka la barbardhigo alaabooyinka ay gadayaan dadka kula tartamaya: qiimaha, danta ugu jiri karta macaamiisha, faa'idooyinka uu u leeyahay macaamiisha iyo waxyaabaha uu ku liito shaygu.

**4) Macaamiisha iyo baahida macaamiisha:**

Wax ka sheeg kuwa ay yihiin macaamiishaadu, inta ay dhan yihiin tiro ahaan, meesha ay joogaan, sida ay u samaynayaan go'aanka wax iibsiga, waxaa maxay waxyaabaha ay macaamiishu ku qiimaynayaan sheyga aad iibineysid. Waa maxay dhibaatada macaamiishu ama baahida, taas oo aadigu xal u heli kartid?

**5) Qaybta ganacsi iyo xaalada tartanka:**

Wax ka sheeg qaybtaada ganacsi iyo xaalada tartanka ee qaybta dhexdeeda ka jirta. Wax cusub ma ku soo kordhineysaa qaybta ganacsi (wax cusub)? Mase waxaad iibineysaa waxa uu iibinayo kan kula tartamaya? Iskuday inaad ka soocantid kuwa kula tartamaya. Burkiyeeriyaashii hore badalkooda Tusaale ahaan ma aasaasi kartaa burkiyeeri ama timo hagaajiye isticmaala walxaha timaha lagu sameeyo oo dabiici ah oo aan ahayn walxo kiimiko ah? Baar waxyaabaha ay ku fiican yihiin iyo waxyaabaha ay ku liitaan kuwa ugu muhiimsan shirkada tartanka kugula jira markaas kabacdina barbar dhig kuwaas fikradaada ganacsi.

**6) Baaxada suuqa iyo horumarkiisa:**

Saawir ka bixi cadada macamiisha suuqa, xaalada tartanka iyo aragtida horumarka. Sheeg suuqa aad markaas diirada ku hayso: Magaalo cayiman, suuqa wadanka gudihiisa ah, kan Yurub ama suuqa caalamka? Ma laga yaabaa in hawlahaaga ganacsi ay mar dambe ku fidaan meelo kale? Sidee ayey taasi u dhici kartaa? Sharaxaad ka bixi, waxyaabaha suuqa kaa hor istaagi kara: sharcidejin, xadidaad lagu soo rogo alaabta, custamka canshuuraha iyo waxyaabaha kale ee khatarta keeni karaa.

**7) Suuqgeyn iyo xayeesiin:**

Qoraal ka samee, tallaabooyinka suuqgeynta oo caynkee ah ayaad macaamiishaada kula xiriireysaa, ku wargelineysaa, ugana dhaadhicinaysaa faa'idooyinka alaabtaadu u leedahay macaamiisha. Sidoo kale fiiro gaar ah u yeelo sida ay macaamiishaadu kuu helayaan tusaale ahaan dariiqa internetka. Sidee ayaad xayeesiintaada ugu wajahaysaa qayb cayiman oo ka mid ah kooxaha macaamiisha ah? Ka fakar, sida uu muuqaalka kore iyo magaca shirkadaadu ay macaamiisha waxa uga sheegayaan shirkadaada, iyo xagee ayey ka bilaabanaysaa samaysanka astaanta shirkadaada lagu garto? Sidee ayey uga soocmayaan kuwa kula tartamaya?

**8) Khataraha:**

Hawlaha ganacsiga waxaa la xiriira khataro faro badan oo kala gedisan. Falanqee abuurayaasha khataraha ganacsiga ee waqtiga dhaw iyo waq-

tiga fogba. Sidee ayaad shirkada ugu nageyneysaa shaqaalaha muhiimka u ah hawlaha shirkada, maxaase dhacaya haddii uu go'aansado inuu shaqada isaga tago? Ma lagaa koobiyeyn karaa waxyaabaha gaarka fikradaada ganacsi? Sideebayse fikradaada ganacsi ugu nugushahay is bedbedelka xaaladaha dhaqaalaha? Khataraha oo dhan lama tirtiri karo, laakiin waa la yareyn karaa haddii la sameeyo qorshe xoog leh.

### 9) Xuquuqaha aan maadiga ahayn:

Si wanaagsan sharciga waxyaabaha aan maadiga ahayn qorshe ugu samee badbaadinta fikradaha muhiimka ah. Sidaas waxaad ku yareynaysaa khataraha koobiyeynta fikrada. Ma laga yaabaa inaad u baahan tahay shatiga alifaada teknikada ah (waxay shaqaynaysaa 20 sano), ilaalinta ka faa'iideysida nooca (waa shati degdeg ah oo afar sano shaqaynaya) ilaalinta astaanta sheyga (aqoonsiga sheyga ama adeega, kuwaas oo loo diiwaangeliyo meelo cayiman, tusaale ahaan (astaanta lagu yaqaan alaabada shirkada Apple samayso), ama shatiga lagu ilaaliyo muuqaalka kore ee alaabada? Ilaalinta xuquuqda sameeyaha oo keliya ayaan u baahneyn in gooni loo dalbado. Heshiisyada sir qarinta ayaa ah dariiq macaamiisha ama dadka wada shaqayntu ay kala dhaxayso shirkada looga hor istaago inay dad kale u sheegaan fikrada ganacsigaaga ee aan xuquuqdeeda la dhawrin ama la ilaalin.

### 10) Xisaabaadka: Maalgelin, Faa'ido lahansho iyo Iibka

#### a) XISAABAADKA MAALGELINTA:

Xisaabaadka maalgelinta waxaa loola jeedaa baahida lacageed iyo meelaha lacagu ka imaanayaan wajiga hore ee bilowga. Baahida lacageed waxaa ku jira maalgelinta ay tahay in la sameeyo, si uu ganacsiga shirkad u bilowdo. Maalgelinta hore waxaa ka mid ah alaabooyinka hore ee shaqada lagu bilaabayo, mashiinada wax lagu soo saarayo, kharashka diiwaangelinta iyo dibaajiga kirada iyo raasumaalka isticmaalka, tusaale ahaan waqti 3 bilood ah waxaa lagu calaamadeeyaa meesha baahida lacageed. Kaydka raasumaalka isticmaalka waxaa loo qiyaasaa bixinta kharashaadka joogtada ah (mushaaradka, kirada, caymiska, kharashka xisaabaadka iyo wixii la mida), kuwaasoo ay tahay in la bixiyo, inkastoo aysan hadana shirkadu weli haysan lacag ku filan oo lagu daboolo baahida kharashaadka baxaya taas oo ka soo gashay xaga iibka badeecadaha. Sababtaan awgeed wajiga hore ee bilowga ganacsiga raasumaalka isticmaalka waxaa lagu daraa baahida maalgelinta. Sidoo kale marka la xisaabayo maalgelinta waxaa la dejiyaa meelaha lacagaha u dhigma ku maalgelintu ay ka imaanayaan; Meelaha lacaguhu ka imaanayaan waa inay daboolaan baahida maalgelinta. Meelaha lacaguhu ka imaanayaan waxay noqon karaan adigu lacagta aad ku maalgeliso shirkada iyo hanti aan lacag ahayn laakiin u dhiganta sida mashiin shaqo ama gaari, lacagta la soo deynto, kaalmada shirkadaha la siiyo iyo maalgelinta raasumaalkaaga shirkada dibada ka ah. Xasuuso in lacagta bilowga ee xafiiska shaqada iyo xogsashdu bixiyo ay san qayb ka ahayn lacagaha maalgelinta meelaha ay ka yimaadaan, balse lacagta bilowga waxaa loogu talogalay in ganacsaduhu uu ku dabarto noloshiisa gaarka ah!

**Tusaale xisaabaadka maalgelinta: (shirkad dhinaca nadaafada ah)**

| BAAHIDA LACAGEED | Eur |
|---|---|
| Kharasha dayactirka | 1 200 |
| Qalabka wax soo saarka | 2 000 |
| Xirxiritaanka qalabka | 500 |
| Kombutarada iyo barnaamijyada | 1 500 |
| Baabuur | |
| Teleefan/fakis/internet | 200 |
| Alaabooyinka xafiiska | 300 |
| Faniijarka | 1 000 |
| Mashiinada hada jira, qalabka shaqada iyo alaabooyinka la isticmaalo | 500 |
| Suuqgayn-maalgelin | 800 |
| Dabaajiga ijaarka | 1 500 |
| Badeecada marka hore shaqada lagu bilaabayo | 1 000 |
| Kharashka aasaasida ku baxay | 100 |
| Raasumaalka isticmaalka | 3 200 |
| Lacagta qasnada looga tago | 700 |
| **ISUGEYN LACAGTA LOO BAAHAN YAHAY** | **14 500** |

| LACAGTA RAASUMAALKA AH | Eur |
|---|---|
| **Lacagta raasumaalka ah** | |
| Raasumaalka saamiga | 2 500 |
| Lacagaha aad ku maalgelinaysid | 5 500 |
| Mashiinada hada jira, qalabka shaqada iyo alaabooyinka la isticmaalo | 500 |
| Deynta saamiluhu siiyo shirkada | |
| **Raasumaalka deynta** | |
| Deynta bangiga | 6 000 |
| Deynta Finnvera | |
| Deyn kale | |
| **MEELAHA LACAGUHU KA YIMAADAAN ISUGEYN** | **14 500** |

**b) XISAABINTA FAA'IIDADA:**

Xisaabinta faa'iidada waxaa lagu qiyaasaa, barta ay ku kulmaan qiimaha la doortay iyo maxsuulka ka soo baxa kala jarida alaabta la iibiyey iyo kharashka, meeshaas oo ay ka soo baxayso eber (bar critic ah) marka loo fiiriyo cadada alaabada la iibiyey. Anagoo kaashanayna taas waxaan baareynaa, in goolka iibka ee aan higsaneyno inuu xaqiiqada u dhawyahay. Iibka la higsanayo (cadada lacagta la iibiyo), waxaan weli u kala jarjari karnaa bil-, usbuuc-, ama gool ah saacadiiba waxa la iibin karo. Si taas ka badelan waxaan baareynaa inay haboon tahay inaan badelno lacagta ka soo baxda iibka marka laga jaro kharashka iyo qiimaha alaabta lagu iibiyo, haddii cadada iibku ay u muuqato mid aan xaqiiqoobeyn. Sidaas waxaan ku samayn karnaa baaritaan nugul oo sahal ah, taas macnaheedu waa intee in le'eg oo isbedel ah ayuu qiimo badelku ku yeelanayaa qiyaasta dakhliga ka soo baxaya iibka.

| TUSAALE XISAABINTA FAA'IIDADA: | Bil | Sannad |
|---|---|---|
| = Natiijada la higsanayo (sida mushaarka uu higsanayo ganacsaduhu) | 12 bilood | 18 000 e |
| + dib u celinta deymaha | 100 e | 1 200 e |
| | | |
| **NATIIJADA CANSHUURTA KADIB** | | **19 200 e** |
| canshuuraha18% | 329 e | 3 951 e |
| = baahida maalgelinta | 1 929 e | 23 148 e |
| +dulsaarka canshuuraha | 27 e | 324 e |
| **A. Lacagta in la isticmaalo loo baahan yahay (baahida lacageed)** | **1 956 e** | **23 472 e** |
| Kharashaadka joogtada ah | | |
| Caymiska hawlgabka ganacsadaha (YEL-vakuutus) 15,9 % (lacagta sannadkii shaqada ka soo gasha 12 000e) | 159 e | 1 908 e |
| Mushaaraadka | | |
| Kharashaadka mushaarka laga bixiyo | | |
| Kharashka ijaarka | 545 e | 6 537 e |
| Dayactirka iyo daryeelka | 30 e | 360 e |
| Kharashka alaabada leasing laga bixiyo | | |
| Kharashaadka isgaarsiinta (telefoon, internet iyo wlm) | 80 e | 960 e |
| Kharashka xafiiska | 20 e | 240 e |
| Kharashka safarada- iyo gawaarida, lacagta habeen dhaxa | 50 e | 600 e |
| Kharashka suuqgeynta | 200 e | 2 400 e |
| Kharashka sameynta xisaabaadka, hantidhawrka, ogeysiinta canshuuraha iwl. | 100 e | 1 200 e |
| Qasnada shaqo la'aanta,ururka ganacsatada iwl. | 30 e | 360 e |
| Kharashaadka kale | 100 e | 1 200 e |
| **B. ISU GEYNTA KHARASHAADKA JOOGTADA AH** | **1 314 e** | **15 768 e** |
| **LACAGTA UGU YAR EE LOO BAAHAN YAHAY IN LAGU IIBIYO (A+B)** | **3 270 e** | **39 240 e** |
| Alaabaha la soo iibsaday+walxaha iyo qalabka (bilaa canshuurta iibka ALV) | 915 e | 10 980 e |
| INTA LOO BAAHAN YAHAY IN LA IIBIYO | 4 185 e | 50 220 e |
| Canshuurta qiimaha la socota (ALV) 23 % | 963 e | 11 550 e |
| **IIBKA GUUD / INTA LOO BAAHAN YAHAY IN LA DALACO** | **5 148 e** | **61 770 e** |

**c) XISAABINTA IIBKA:**

Marka la xisaabinayo iibka waxaan u kala qaybin karnaa sidii ay horay noogu muujisay xisaabinta mirodhalka beecu, higsashada dalacaada biil yar oo loo qaybinayo macaamiil kala duwan. Tan waxay naga caawinaysaa qiimeynta muhiimada macaamiisha; Waxaala tix-gelineynaa qiimo-dhimista suurtogalka ah iyo kharashaadka is-bedelaya ee alaabta la iibinayo.

| | Bil | Sannad 12 bilood |
|---|---|---|
| IIBKA SANNADKA OO DHAN CANSHUURTA QIIMAHA LA SOCOTA (ALV) 0 | 5 044 e | 60 528 e |
| INTA LOO BAAHAN YAHAY IN LA IIBYO | 4 185 e | 50 220 e |
| FARQIYA KALAJARKA | 859 e | 10 308 e |

La soco inay wanaagsantahay in ganacsadu uu fasax qaato sidaas dar-teedna iibka sannadku wuu yaraanayaa oo wuxuu noqonayaa (qiyaastii 11 bilood).

### XISAABINTA IIBKA (Mudo bil ah)

| BADEECADA LA IIBINAYO | Nadaafad (maalin) | Nadaafad (galab iyo maalmaha aan caadiga ahayn) | Dhaqida dariisha-daha | Xabag marinta dhulka | Nadaa-fad weyn | Shaqoo-yinkan kale | ISUGEYN canshuurta qiimaha la socota ALV 0% |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Qiimaha iibka | 24 e | 30 e | 35 e | 40 e | 120 e | 28 e | |
| Kharashka | | | 5 e | 10 e | 10 e | 0 e | |
| Kharashka soo baxay | 24 e | 30 e | 30 e | 30 e | 110 e | 28 e | |
| Cadada iibka | 80 | 32 | 12 | 8 | 10 | 8 | |
| Iibka guud | 1 920 e | 960 e | 420 e | 320 e | 1 200 e | 224 e | **5 044 e** |
| Waxa la soo iibsadey oo dhan | 0 e | 0 e | 60 e | 80 e | 100 e | 0 e | **240 e** |

# Baarista SWOT

Baarista SWOT ku waa sahlan yahay waana hab si guud ahaaneed loogu isticmaalo baaritaanka hawlaha ganacsiga. Baarista SWOT wuxuu wax ka sheegayaan fikrada ganacsiga, waxa ganacsadaha iyo shirkadu ku wanaagsan yihiin (Strengths), kuliitaan (Weaknesses), fursahada ay haystaan (Opportunities) iyo khataraha (Threats). Baarista waa mid ku haboon in loo isticmaalo noocyada kala duwan ee shirkadaha. Dhanka laga fiirinayo waxay taabankartaa dhammaan hawlaha shirkada ama si gaar ah qayb ka mid ah hawlaha shirkada.

Jadwalka sadarkiisa kore waa xaalada hada iyo arimaha gudaha ee shirkada. Sadarka hoose waa mustaqbalka iyo arimaha shirkada dibadeeda ka imaan kara oo saameynta ku yeelan kara shirkada. Sadarka qaybtiisa bidix waxaa ku yaal arimo didiilo ku leh sadarka dhankiisa midigna waxaa ku yaal arimo aan wanaagsaneyn.

## Tusaale xaga baarista SWOT

**Dhinacyada shirkadu ay ku fiican tahay**
- aqoon xoog leh
- waayo-arganimo
- aqoonto qaybta ganacsiga
- alaab cusub oo aan horay loo alifin
- xiriirada caalamiga ah


**Dhinacyada shirkadu ay ku liitato**
- aqoonta luuqada oo daciif ah
- lacagtaada oo aan kugu filnayn
- khibrad la'aan xagga ganacsiga ah
- xaalada qoyska
- dhaqan cusub

**Fursadaha**
- inaad dalka dibadiisa ganacsigu ku fidiso
- fursado kobcitaanka oo jira
- alaab iyo adeeg casri ah
- aagag suuqgeyn oo cusub

**Khataraha**
- karitaanka iyo awooda ganacsadaha
- tartanka ganacsi oo sii joogeysta
- isbedel ku yimaada heshiisyada deymaha
- isbedelka xaaladaha siyaasadeed

Baarista wuxuu naga caawinayaa inaan fiirino sidaan u horumarin lahayn arimaha aan ku fiicannahay iyo sidii aan u tirtiri lahayn arimaha aan ku liidano. Sidee ayaan fursadaha jira uga faa'iideysan karnaa iyo sidee ayaan isaga u difaaci karnaa khataraha nagu soo fool leh.

# Maaraynta khataraha ganacsiga




Ganacsigu wuxuu leeyahay khataro faro badan oo ay suurtogal tahay inuu shirkada ku yimaadaan. Khataraha ganacsiga waxaa laga yaabaa inay mararka qaar shirkada u noqdaan fursad. Waa in loo diyaar garoobo khatarta ama khatar galowga la qaato, si uu ganacsigu horumar ugu tilaabsado. Waa in la aqoonsado khataraha ku soo fool leh shirkada, waana in saameyn lagu yeesho khatarahaas, loona diyaar garoobo sidii looga gaashaaman lahaa. Si kale haddii aan niraa waa in la maareeyo khataraha.

Khataraha ganacsigu waxay tusaale ahaan noqon karaan khataro xagga shirkada ka yimaada, xagga dadka ama shaqaalaha, heshiisyada iyo masuuliyada, khataro xagga macluumaadka ah, xagga sheyga la iibinayo ah, kuwo xagga bay'ada ka yimaada shirkada, joogsiga ganacsiga ka yimaada, xagga dambiyada ah iyo khatar gubasho. Maareynta wanaagsan ee khataruhu nooceedu waa mid saadaalin ah, aqoosiga khatarta, qorshayn iyo isku dubarid leh. Wixii macluumaad dheeraad ah ee la xiriira maaraynta khatarta waxaad ka heleysaa bogga internetka ee **www.pk-rh.fi.**

# Suuqgeyn iyo xayeesiin

In suuqa lagu guuleysto waxay u baahan tahay in la helo aqoon wanaagsan ee uu ganacsigu ku shaqeeyo iyo in aqoon loo yeesho shirkadaha kale ee tartanka kugula jira iyo inaad wax gaar uga soocantid kuwa tartanka kugula jira. Suuqu waa meesha la doonayo in alaabada iyo adeega shirkadu iibineyso ay saameyn ugu reebaan maskaxeedka iyo waayo aragtida dadka isticmaalaya alaabada iyo adeega shirkada- ''waan ka wanaagsan nahay kuwa nala tartamaya''. Suuqgeyntu waa qaybta muhiim ah oo ka mid ah qorshaynta shaqada shirkada.

Marka ugu horeysa waxaa wanaagsan in la yaqaan farqiga u dhexeeya shuuqgeynta iyo xayeesiinta.

Suuqgeynta shirkadu waxay ku dooneysaa in saameyn kuyeelato hab dhaqanka dadka alaabada isticmaalaya. Ujeedada suuqgeyntu waa in la abuuro, la xafido oo aan la dayicin, lana kobciyo xiriirka macaamiisha iyo shirkada ka dhexeeya. Waa muhiim in la xafido macaamiisha shirka daacada u ah, sida caadiga ah goobida macaamiisha cusubi aad ayey uga qaalisantahay xafidaada iyo ku dhaganaanshada macaamiisha qadiimka ah. Macaamiisha furaha ah oo shirkada daacada u ah waa kuwa sidoo kale si shirkada u keena qaybta ugu weyn ee iibka.

Xayeesiin waxaa lagu doonayaa in si toos ah saameyn loogu yeesho go'aan ka gaarida beeca ee macaamiisha iyo shayga la iibinayo dadka la baro.Macaamilka qanacsan markalena shirkada waay u soo noqonayaa. Laakiin haddii xayeesiintu aanay sawir ka bixineyn macluumaadka dabeecadaha dhabta ah ee shayga, waxaa laga yaabaa inuusan macaamilku dib u soo noqon mar dambe.

Marka la qorshaynayo suuqgeynta waxaa tuul wanaagsan oo la adeegsan karo ah kan lagu magacaabo nooca isku darka suuqgeynta. Waxay ka kooban thay 4 P oo luuqada ingriiska ah: Product, Price, Place iyo Promotion. Luuqada Soomaaliga macnahoodu waa shey, qiimaha, goobta ganacsigu ku yaalo iyo sare u qaadida iibka. Kuwaas waxaad ka dooran kartaa hadba isku darka suuqgeynta ee ku haboon kooxaha macaamiishaada ka gedisan kuna koobnaatid inaad kuwaas u isticmaashid suuqgeynta alaabaha shirkadaada.


**Shey = Product:** Alaab ama adeeg iyo astaamaha u gaarka ah, magaca sheyga, damaanad qaadka ciladaha, darajada qiimiga cuseybka, iyo waxyaabaha uu shaygu uga duwan yahay alaabooyinka kale ee ay iibinayaan shirkadaha kale ee tartanka nagula jira.

**Qiimaha = Price:** Qiimaha lacag ahaan ay macaamiishu ka bixinayaan sheyga ama mag dhaw kale. Qiimaha sheyga waxaa saameyn ku yeelanaya xaalada tartanka suuqa, saamiga aad suuqa ku leedahay, aragtida macaamiisha, darajada sheyga, wax soo saarka iyo kharashka ku baxaya maadooyinka laga sameynayo sheyga iyo qiimo dhimista.

**Goobta ganacsiga = Place:** Meesha laga iibsan karo sheyga. Sida badan waxaa la adeegsadaa erayga ah kanaalada qaybiska alaabada, kuwaas oo looga jeedo goobta ganacsiga oo rasmiga ah iyo iibka internetka sida dukaamada xagga shabakada internetka ah.

**Kor u qaadida iibka = Promotion:** Dhamaan qalabka isgaarsiinta, ee kuwa wax iibinaya ama shirkadu ay ku baahin karto shayga ay iibineyso. Kuwaas waxaa ka mid ah xayeesiinta, warbaahinta laga sameeyo meesha wax lugu iibiyo sida warqadaha la qaybiyo ama internetka, ololaha iibka, PR (xiriirka bulshada), iyo raadiyaha suuqa ama wararka ay macaamiishu isku gudbinayaan dhexdooda (hadalka afka).

**Shey (Product)**
- sifooyinka shayga u gaarka ah
- magaca sheyga
- cuseybka alifaadiisa
- adeegyada garantiiga
- Waxyaabaha isku jira ee suuqgeynta loo adeegsado




*Xigasho: Kotler Philip (1980) Principles of Marketing. Prentice Hall.*

## Qaybinta kooxaha macaamiisha iyo doorashada kooxda ganacsigu ku wajahan yahay

Waxaa wanaagsan in la baaro koox macaamiil oo caynkee ah ayaa alaabada laga iibinayaa. Inkastoo aan hamuun u qabno sidii aan macaamiil farobadan u heli lahayn, hadana waxaa haboon in lagu ekaado kooxaha macaamiisha ee muhiimka ah, kuwaas oo shirkada soo geliya lacagta ugu badan ee ka timaada xagga iibka ayadoo macaamiishaas helitaankooda aan dhibaato weyn loo marin. Suuqgeynta ku wajahan kooxaha cayiman waxay yareynaysaa farabadida macaamiisha, dhanka kale waxay xoojinaysaa oo badinaysaa awooda suuqgeynta. Xadidaada macaamiisha waxaa sabab u noqon karta tusaale ahaan da'da, degaanka ama awooda wax iibsiga ama lacag intee le'eg ayey macaamiishu haytaan si ay wax iibsadaan. Tusaale ahaan xayeesiinta alaabada caruurtu ku ciyaaraan waa in lagu xadido aagaga ay degen yihiin qoysaska caruurta leh ama ku xayeesiinta joornaalada caruuraha yar yar, kuwaas oo ay akhristaan waalidiinta cusub.

### Waxaa haboon in suuqa qayb qayb loo qaybiyo, haddii

- suuqa laga heli karo macaamiil badan oo ay suurtoga tahay in wax naga iibsadaan
- qayb macaamiisha ka mid ah ay wadaagaan waxyaabo u gooni ah iyo baahi u gooni ah
- kooxaha macaamiishu ay kala duwanyihiin
- suuqgeyntu ay ku guuleysatay kala qaybinta macaamiisha ee horay loo doortay dhaqaale ahaan iyo si xoog leh.

## Doorashada qalabka xayeesiinta

Waxaa kula gudboon inaad shirkadaada u raadisid warbaahin aad fariimaha ama xayeesiinta uga gudbin kartid macaamiisha sida ugu jaban uguna awood badan. Si taxadar leh u baar arimaha udub dhexdhexaadka u ah sifooyinka qalabka xayeesiinta iyo qiimahooda. Waxaa laga yaabaa in farqiga u dhexeeya qiimeyaaha qalabka xayeesiinta ee kala duwan uu aad u weyn yahay taasoo ku xiran hadba warbaahinta.

### Warbaahinada kala duwan waa

- Wargeysyada, wargeysyada maxaliga ah iyo kuwa bilaashka lagu qaybiyo iyo waliba wargeysyada soo baxa waqtiyada cayiman ama sannadkiiba dhawr goor
- internetka
- telefishinka
- qalabka xayeesiinta ee dibadda iyo tan goobta ganacsiga
- raadiyaha
- filimada (xayeesiinta dahsoon).

Suuqgeynta diritada ah waa hal wado oo guud oo lagu kasbado macaamiisha. Tusaale ahaan ganacsatada pizzada iibiya wuxuu si toos ah warqadaha xayeesiinta ugu diri karaa sanduuqa boostada ee guryaha ku yaala agagaarka goobta pizzada. Dhammaan waxaa la gaarsiinayaa dadka si gacan ah ama waraaq ahaan dariiqa internetka, kaararka casumaada iyo wixii la miduhu waa qalabka xayeesiinta tooska ah. Si kastaba ha ahaatee waa in la xasuustaa in xayeesiinta tooska ah ay u baahan tahay ruqso ama u baahan tahay ruqsada iyo ogolaanshada macaamiisha ama waalidiinta caruurta aan qaangaarka ahayn, haddii xayeesiinta tusaale ahaan loo adeegsanaayo e-mailka.

Waxaa ah kanaal xayeesiineed oo aad muhiim u ah xiriirka dadka ama raadiyaha duurka (word-of-mouth). Macaamiishu sida badan waxay dhexdooda isku sheegaan waayo-aragnimada wanaagsan iyo tan xun intaba, taas oo macluumaadka sheyga ku fidinaysa tusaale ahaan Facebooga. Markaad wax xayeesiineyso waxaa haboon inaad fiiro gaar ah u yeelato, sida aad ula dhaqmaysid macaamiisha waqtiga loo adeegayo. Tusaale ahaan ma awoodaa inaad shayga qiimo dheeraad ah u sameysid markii aad wax iibineysid, taas oo sare u qaadaysa sawir maskaxeedka wanaagsan ee sheyga (sida muuqaalka kore baakadka alaabtu ku jirto, qiimo dhimis, guri geyn, shay saa'iid ah oo macaamiisha la siiyo beeca kadib). Ama sidee ayaad u maaraynaysaa cabashooyinka macaamiisha.

Qorshaynta xayeesiintu waxay kaa caawinaysaa inaad xayeesiinta ka dhigtid mid dhamaystiran oo la fahmi karo ama cad. Adoo kaashanaya qorshaynta waxaad la socon kartaa sida ay u meelmareen waxyaabaha aad higsaneysay waxaadna sidaas ku horumarin kartaa xayeesiimaha kale ee mustaqbalka. Waxaa haboon inaad hadba waqtiyo joogto ah kadib aad tijaabiso sida ay u watiga ugu haboonyihiin suuqgeynta isku dhafan iyo kooxaha macaamiisha. Waxaad tusaale ahaan ka fakari kartaa suaalaha soo socda: Hawla aad qabatay ma ku gaartay waxyaahii aad dooneysey? Ama ma inaad isbedel ku samaysaa ama aad badasho suuqgeynta- ama nooca xayeesiinta? Macaamiisha ugu muhiimsan hab dhaqanka wax iibsigooda ma waxaa ku yimid wax isbedel ah (baahida isbadashay)? Hadda waa kuwee macaamiishaadu, kuweese aad doonaysaa inay kuu sii ahaadaan macaamiil? Maxayse sameynayaan kuwa kula tartamaya?

Xiliga hadda la joogo alaabada iyo shirkadahaba waxaa laga raadiyaa shabakada internetka.

Adeega raadinta ee internetka muuqaalka shabakada waxaa ku jirikara meel diyaar ah oo ogeysiisyada loogu talogalay, bogaaga internetka ama iibka internetka. Haddii aad isticmaalaysid bog internet ee shirkadaada u khaas ah, waxaa muhiim ah inaad xasuusto inaad mar walba waqtiga la socodsiiso oo aad gacanta ku haysid. Dukaanka internetku, sida bogaga kale ee internetka waa hab wanaagsan oo lagu aruuriyo macluumaadka laguna sameeyo diiwaanka macaamiisha. Waa in macaamiisha mar walba loo sheego, meesha loo isticmaalayo macluumaadka iyo sida uu u joojin karo isticmaalkooda ka baxsan ujeedadii uu doonayey.

## Astaanta alaabta

Astaanta alaabtu waa calaamad aqoonsi, oo alaabada shirkada ka soocda alaabooyinka iyo addegyada kale ee ay shirkaduhu sameeyaan ama ay soo saaraan.

Waxaa shirkada la gudboon inay ilaaliso calaamada alaabadooda ayna ka diiwaangeliso xafiiska maamulka Shatiga iyo diiwaangelinta. Diiwaangelintu waxay xaq kuu siinaysaa inaad kaligaa

astaanta isticmaashid. Astaanta alaabtu waxay tusaale ahaan noqon kartaa eray ama sawir ama isku jirka labadoodaba. Sidoo kale waxay noqon kartaa hal kudhag, xarfo layku geeyey amaba astaan cod ah ama astaan kale, taasoo loo soo bandhigi karo garaafik ahaan. Astaanta aqoonsiga alaabta ee Finland laga diiwaangeliyey waxay xuquuqda dhawrida kaa siinaysaa dalka Finland gudihiisa oo keliya. Haddii uu ganacsaduhu rabo inuu alaabtiisa dalka dibadiisa xitaa ka dhawro, dhawrida dibada waa in si gaar ah loo codsado.

### Aqoonsiga shabakada ama domainka

Aqoonsiga shabkadu waa ciwaanka-www, kaas oo lagu qoro bogga internetka goobta cinwaanada ee laga baaro internetka. Aqoonsiga looma baahna inuu noqdo mid la mid ah magaca shirkada, balse wuxuu noqon karaa tusaale ahaan qayb ka mid ah magac ama waxyaabo la soo gaabiyey. Waxaa ugu wanaagsan calaamado gaaban oo si sahal ah loo xasuusan karo.

Aqoosiga khabakada kuma qotomi karto magac kale oo horay loo xafiday xuquuqdiisa ama calaamado ama magaca qof caadi ah, kamana koobnaan karo waxyaabo wax u gafaya ama dambi samayn wax ku boorinaya. Aqoonsiga internetka waxaad ka dalban kartaa qolooyinka bixiya adeega internetka ama adoo kaashanaya hoteelka shabakada waxa loogu yeero, markaas oo aad helaysid hal mar dhammaan waxyaabaha aad u baahantahay. Aqoonsiga dalka Finnishka.FI waxaa bixiya xafiiska isgaarsiinta **(www.ficora.fi).**

# Qiimo samayn

Ka fakar kahor intaadan qiimaha samayn, adeegaagu ma ka wanaagsan yahay amaba ma ka tayo wanaagsan yahay adeegyada ay bixinayaan kuwa kula tartamaya. Alaabta aad iibineyso ma ka qaalisan yahay mise waa ka jaban yahay alaabada la midka ah ee ay iibinayaan kuwa kula tartamaya adiga? Xagee ayey macaamiishu diyaar u yihiin inay ku bixiyaan qiimaha dheeraadka ah? Ma waxay qiimaha dheeraadka ah bixintiisa u hurayaan sumcada shayga, tayada shayga, adeega wanaagsan ee la siinayo, damaanad qaadka shayga laga siiyo mise sahlanaanta meesha uu tukaanku ku yaalo?

Si taxader leh uga fakar heerka qiimaha una samee si waafaqsan sumcada alaabta ay shirkadu iibineyso. Alaabta tayada ama shayga qaaliga ah waxay u baahantahay degaan ay ku noolyihiin macaamiil heerka noloshoodu sareyso iyo meel bilicsan oo lagu iibiyo. Markii aad bilowdo inaad shayga u soo bandhigto, bilowdo wadaxaajoodka iibka aadna qiimo cayiman wax ku iibiso, waa adagtahay inaad qiimahaas aad kordhiso mustaqbalka. Sidoo kale xasuuso in macaamiil badani ay sugayaan in qiimaha laga geli karo ”gorgortan”.

Qiimaha adeegga khuburadu wuxuu ku salaysnaan karaa waqtiga loo isticmaalay adeega. Qiimaha saacadu waxba macaamiisha ugama sheegeyso qiimaha oo dhan, sababto ah macaamiishu ma ogaan karto, inta saacadood oo shaqada ku baxday. Kaalmayso isticmaalna tusaalooyin qiimodejin aha oo har loo sameeyey, kuwaas oo aad ku sheegeysid shaqadu waxay ka koobantahay ja waqtiga shaqada fulinteeda ku baxay.

Qiimo dejinta waxaad sidoo kale u isticmaali kartaa habka ku caawinaya, sida qiimodhimista barashada adeegga, qiimaha heshiiska, qiimaha uu gaaro qofka dalabka deg degta ah sameeya, qiimodhimista xiyada cayiman (tusaale xiliyada aan shaqada badan jirin). Hababkaas adigoo adeegsanaya ayaad ku fariisin kartaa qiimaha aasaasiga ah hadba heerka aad dooneysid. Tusaalooyin habka qiimosameyn waxaa u noqon kara qiimeyaasha qadada ee

**Mar walba qiimaha ku qor meel ay macaamiishu ka arki karaan. Qiimeynta wanaagsan waxay mar walba macaamiisha u sheegeysaa qiimaha sheyga iyo wuxuu qiimuhu ka kooban yahay. Macaamiishu waxay xiiseynayaan oo keliya qiimaha ugu dambeeya ee sheyga oo canshuurta qiimaha la socota ay ku jirto. Balse shirkada macaamiisha noo ahi waxay xiiseyneysaa qiimaha aan canshuurta qiimuhu la socon. Sababtoo ah canshuurta qiimaha ee la socota alaabada shirkadu soo iibsanayaan waxaa laga jari karaa canshuurta la socda qiimaha iibka.**

maqaayadaha ama miimo dhimista la siiyo qofka dhaqasaha tigidka uga xagsada xafiisyda safarada. Sidoo kale waxaa jira macaamiil, doonaya wada xaajood la'aan inay bixiyaan qiimo u dhigma heerka caadiga.

Qiimo dejintu waa tartan sameeye muhiim ah, laakiin maahan tartan

sameeye kaligiis. Sida badan waxaa laga fakaraa tartanka xagga qiimaha ah ama in aan alaabada ku iibino qiimo ka jaban kuwa nala tartamaya. Si wanaagsan uga fakar waxa uu yahay qiimaha dhabta ah ee sheygaaga. Waa in shirkadaada ay qayb uga soo harto lacagta lagu iibiyey shayga. Haddii aad qiimo sare ku iibineysid alaabta, faa'ido waxaa ku filan alaabo yar oo aad iibiso. Laakiin haddii aad qiimo jaban ku iibineysid waa inaad alaabta ka iibiso cadad faro badan.

**Tusaale:** Waxaad iibineysaa alaab, kharashkeedu yahay EUR 28. Kan kula tartamaya wuxuu macaamiisha ka iibinayaa alaabtaada mid la mida qiimo gaaraya EUR 55 (ku jirta canshuurta qiimaha la socota). Waxaad dareemeysaa farqiga u dhexeeya kashka haddii aad alaabta ku iibisid qiimo ka jaban 20% kan kula tartamaya.

## Lacagta ka soo baxda iibka marka laga jaro kharashka

Si sax ah alaabada u qiimee. Imisa lacag ah ayaa ka soo baxaysa shey ama adeeg kasta oo la iibiyo marka laga jaro kharashka? Lacagta soo baxday ma ku filantahay marka loo eego cadadka alaabta ama adeega la iibiyey. Waliba xasuuso kharashka joogtada ah iyo isticmaalka waqtiga ee guud. Ayadoo la kaashanayo xisaabinta faa'iidada waxaad si fiican fikrad uga heleysaa xadadka ugu hooseeya qiimo dejinta.

| | Qiimaha kan kula tartamaya | Qiimo ka jaban 20 % |
|---|---|---|
| Qiimaha iibka | **55,00 e** | **44,00 e** |
| - canshuurta alv 23% | - 10,28 e | - 8,23 e |
| Qiimaha oo bilaa canshuur ah | 44,72 e | 35,77 e |
| Qiimaha laga soo bixiyey (alv 0) | 28,00 e | 28,00 e |
| Kashka soo haray | **16,72 e** | **7,77 e** |

| TUSAALE XISAABINTA QIIMAHA IIBKA: | EUR |
|---|---|
| Kharashaadka shayga oo dhan ku baxay | 150,00 |
| + kharashka kabacdi lacagta la higsanayo (35 %) | 52,50 |
| = Qiimaha iibka oo canshuur la'aan ah | 202,50 |
| + canshuurta Alv 23 % | 46,58 |
| = Qiimaha iibka oo canshuur la socoto | 249,08 |

## Tusaale waqti sidee ah ayaa shirkadu iibkeeda lacag ka heli kartaa:




Markii ay macaamiishu dalbadaan shayga ay doonayaan, waxay qaadan kartaa 1-5 maalmood in alaabtu ay gaarto macaamiisha ayadoo hadba ku xiran shirkada laga dalbaday. Sida badan biillka waxaa alaabta laga daba diraa 1-5 maalmood kadib. Waqtiga bixinta biilku wuxuu ahaan karaa inta u dhexeysa 7-21 maalmood. Haddii uu qofka macaamiisha uu biilka bixiyo maalinta ugu dambeysa bixinta biilka, lacagtu waxay shirkada qasnadeeda soo gaareysaa laba maalmood maalintii bixinta kadib. Haddii aan si kale u dhigno marka ugu wanaagsan lacagta biilku waxay qasnada shirkada soo gaareysaa laba usbuuc ka dib maalintii alaabta la dalbaday kadib.



# Maalgelinta ganacsiga bilowga ah

Bilowga hawlaha ganacsiga waxaa loo baahanyahay mar walba lacag lagu bilaabo ganacsiga. Cadada lacagta loogu baahanyahay maalgelinta bilowgu, waxay ku xirantahay fikrada ganacsiga isla markaasna qaybaha ganacsigu aad ayey ugu kala duwan yihiin. Haddii uu ganacsigu ku salaysan yihiin iibinta aqoonta ganacsadaha adeegahaan iyo isticmaalida watigaaga (tusaale ahaan turjubaanimo ama luuqad badelid), waxaa loo baahan yahay maalgelin bilow oo wax badan ka yar. Tusaale ahaan haddii la aasaasayo shirkad alaab samaysa ama makhaayad. Maalgelinta bilowgu waxay suurtogelineysaa bilaabida hawlaha ganacsiga. Haddii hawlaha ganacsigu ay miro dhal noqdaan, makaas baahida maalgelineed ee mustaqbalka waxaa lagu dabooli karaa lacagaha dakhliga ah ee shirkada soo galaya ama faa'iidada ka dhalanaysa hawlaha ganacsiga.

Ayadoo la kaashanayo xisaabaadka maalgelinta waxaa la lafaguraa baadida lacageed ee jirta iyo ilaha lacagaha laga helikaro xiliga bilowga. Qaybtaan soo socota waxaan kaga hadlaynaa meelaha lacagaha maalgelintu ay ka yimaadaan.

## Lacagta raasumaalka ah

Ganacsadu wuxuu hawlaha ganacsiga gelin karaa lacagtiisa ama hanti kale oo uu asagu leeyahay oo lacag u dhiganta (apportti), oo uu asagu leeyahay isla markaas uu haysto. Kaydka uu ganacsaduhu leeyahay, qalab shaqada ama mashiinada waxaa lagu magacaabaa maalgelintaada. Saida badan deyn bixiyeyaashu ama bangiyadu waxay ku xiraan deynta shuruud ah in ganacsaduhu haysto qiyaastii 20% lacagta maalgelinta kahor inta aysan ka fiirsan go'aan ka gaarin deyn bixinta.

Lacagta raasumaalka ah waxaa shirkada ku maalgelin kara ganacsadaha saaxiibadiis, xubnaha qoyska, macrifada. Sidaasna waxay shirkada uga heli karaan qayb lahaansho ah.

## Deymaha

Sida caadiga ah lacagtaada maalgelinta ka sokow shirkadu waxay u baahnaaneysaa inay deyn qaatado. Sida badan lacagaha deynta ah waxaa bixiya bangiyada ganacsiga iyo shirkada gaarka ah ee wax maalgelisa ee Finnvera. Deynta waxaa laga bixiyaa dulsaar, kaasoo tusaale ahaan ahaan kara heshiiska dulsaarka ee Euroborka. Intaas waxaa dheer maalgeliyuhu waa inuu deynta ka helo faa'ido, taas oo u kahelayo dulsaarka iyo lacagta saaranayo soodiritaanka biilka deynta. Shuruudaha dib u bixinta deyntu way kala duwan yihiin, taas oo ku xiran hadba maalgeliyaha. Sida badan bangiyadu waxay deymaha kuxiraan dibaaji ah hanti maguurto ah, sida guryaha ama rahmida hanti kale. Mar walba deymaha ka dalbo bangiyo kala duwan, si aad uga qaadato kan deyntiisu ay kuu jabantahay.

**Sida badan lacagaha deynta ah waxaa bixiya bangiyada ganacsiga iyo shirkada gaarka ah ee wax maalgelisa Finnvera.**

Sidoo kale lacagaha maalgeliyeyaasha kale, oo tusaale ahaan ay bixiyaan dadka macrifada ama xubnaha qoyska waxay ahaan karaan ayaguna deynta, kuwaas oo loo bahan yahay in dib loo iibiyo ayagoo dulsaar wata. Dhamaan deymayha, dulsaarkooda iyo dib u bixintooda waxaa mar walba haboon in heshiis qoraal ah laga sameeyo.

Waxaa haboon inuu ganacsaduhu xasuusto, in deymaha waqtiyada gaaban leh waqtiga bixintooda la dheereyn karo (deymaha shirkada alaabada laga soo iibsado), qalabka kiro ahaanta loo isticmaalo (leasing) iyo akoomada bangiga ee deynta ahaan lacagta looga sii isticmaali karo iyo kaaraka lacagaha deynta ah lagu qaadan karo. Maalgelinta leasingiga ah waa kiro waqti dheer ah, tasoo shayga la soo kireysay uu inta badan rahmad ka yahay. Si kastaba ha ahaatee deymahaan maalgelineed ee kor lagu soo xusay waxaa inuu ganacsaduhu ogaado in dulsaarkooda sannadku uu si aad ah uga sareeyo dulsaarka caadiga ee sannadkii uu bangigu qaato, taas macneheedu waa in deyntu ay qaali noqonayso.

## Maalgelinta raasumaalka

Maalgeliyaha raasunaalka (malaaig ganacsi ama shirkad wax maal gelisa) waxaa la maalgeliyaa shirkad ayadoo looga badalanayo qayb saamiga shirkada ka mid ah (inta badan wax kayar 50% saamiyada shirkada). Maalgeliyaha shirkadu wuxuu qaadanayaa khatar galo aad uweyn markii uu samaynayo, sidaas darteed wuxuu maalgelintiisa ka sugayaa inuu ka helo faa'ido badan. Shuruudaha maalgelinta waxaa lagu qeexaa heshiiska saamiyeelashada.

## Cawinaada shirkada

Xarunta horumarinta dhaqaalaha, gaadiidka iyo bay'addu waxay shirkada siin kartaa cawinaad dhaqaale oo ku xiran hadba qaybta ganacsi ee ay shirkadu ka shaqaynayso iyo meesha ay ka shaqaynayso, waxaana cawinaada lagu siiyaa hawlaha ganacsi ee ay shirkadu wado iyo qorshayntoodaba. Cawinaada ama kaalmada shirkadu waa wax ku xiran hadba aragtida qofka goaanka gaareysa, taas macnaheedu waa in lagu siin karo ama laguu diidi karo, siintada waxaa shardi u ah, in hawlaha ganacsigu ay yihiin wax faa'ido leh. Cawinaada ama kaalmada looma baahma in dib laga bixiyo. Goaanka cawinaada waa in la dalbadaa kahor intaaan la bilaabiin maalgelinta. Cawinaada wayaabaha la soo iibsaday sida badan dib ayaa laga bixiyaa. **(www.ely-keskus.fi)**

Hawlaha ganacsiga ee la xiriira waxyaabaha cusub ee la alifo waxaa cawinaad looga dalban karaa oo kale Hay'adda Alifaada ee Finland **(www.keksintosaatio.fi)** iyo Hay'adda Caawinta Tiknolojiga ee Finland **(www.tekes.fi).**

Haddii ganacsigu uu ku jiheysan yahay wadama soo koraya, waxaa suurto gal ah in lahelo lacagta kaalmada ah, ayadoo la kaashanayo barnaamijka Finmpartnership-iskaashiga ganacsiga **(www.finnpartnership.fi).**

Markii aad qorshayneysid hawlaha ganacsida, waxaa haboon inaad xasuusato, inaysan hawshu ku tiirsanayn lacagta cawinaada, Hawlaha ganacsigu inay noqon karaan kuwo miro dhal ah cawinaad la'aan.

# Lacagta bilowga ah

Lacagta bilowgu (starttiraha) waa kaalmo loo ogolaan karo qofka raba inuu sameysto ganacsi bilow ah, si uu qofku u helo dhaqaale uu ku noolaado wakhtiga lagu jiro bilowga hore ee ganacsiga, markaas oo ay waqti qaadanayso hawsha kicinta iyo fafiisinta ganacsigu.

Qofka ka fakaraya inuu samaysto ganacasi waxaa haboon inuu waqti inta uusan bilaabin hawlaha ganacsiga uu la xiriiro Xafiiska shaqada iyo iyo xoogsasha ee ku yaala meesha uu degenyahay **(www.mol.fi)** uuna wax kasii ogaado, sida ay suurtogal u noqon karto helitaanka lacagta bilowgu.

Hawlaha ganacsiga lama bilaabi karo ilaa inta Xafiiska Shaqada iyo xoogsashadu uu goaan ka soo gaarayo lacagta bilowga.

Lacagta bilow waa dakhli la canshuurayo ama laga bixinayo canshuur. Lacagta bilowga waxaa hal mar loo wada ogolaan karaa dhawr qofood oo hal ganacsi oo bilow ah wadaaga, kana wada shaqeeya.



## Shuruudaha ogolaanshada lacagta kaalmada ee bilowga

Lacagata bilowga waxaa la ogolaan karaa, haddii ganacsadu uu haysto fursad uu ganacsigiisu ku noqon karo mid miro dhal ah uuna khibrad ganacsi leeyahay ama uu leeyahay waxbarsho ganacsi. Kaalamadu waa inay ahaato mid uu ganacsaduhu ugu baahanyahay maareynta nolol maalmeedkiisa. Ganacsaduhu waa inuu ka shaqeeyo ganacsiga oo keliya.

Codsiga lacagta kaalmada waxaa lagu lifaaqayaa qorshaha waxqabadka ganacsiga iyo xisaabaadka qiyaasta faaiidada ganacsiga. Sameyntooda waxaad cawinaad kaa siinaya khuburada la talinta xagga ganacsiga. Waxaa kale oo loo baahanyhay shahaadada cadaynaysa inaan wax canshuur ah lagugu lahayn. Shahaadada waxaad ka dalban kartaa tusaale ahaan bogga internetka ee Maamulka canshiuuraha (**www.vero.fi/verovelkatodistus**) ama waxaad ka doona kartaa xafiiska canshuuraha.

Lacagta bilowga ganacsiga waxaa qofka loo ogolaan karaa ugu badnaan 18 bilood. Intabadan lacagta bilowga ganacsiga waxaa la ogolaadaa marka hore lis bilood. Markaas kadib waxaa la ogolaan karaa ayadoo mar walba la fiirinayo lana qiimeynayo baahida qofka ganacsiga bilaabay.

Sannadka 2011 kaalmada bilowgu (ama ayadoo weli canshuur laga bixinayo) waxay noqonaysaa inta u dhaxaysa 550-880 euro bishii. Lacagata bilowga waxaa la bixiyaa hal mar bishii, dib ayaana laga bixiyaa, sidaas darteed waa in xafiiska shaqada iyo xoogsashada loo diro codsiga shubida la sameeyo.

### Ogolaanshada waxaa shardi u ah, in

1) ganacsada dalbanaya uu leeyahay khibrad ganacsi ama waxbarashada looga baahan yahay hawlaga ganacsiga, kuwaas oo la qaban qaabin karo inta lagu gudajiro waqtiga bixinta kaalmada.
2) Dalbadu waa inuu imkaaniyaad ku filan u haysto hawlaha ganacsiga, ee uu qorshaynayo; aritan waxaa la tixgelinayaa tayada hawlaha ganacsiga iyo waxyaabaha ay u baahan yhiin.
3) Shirkadu innay buuxisay shuruudaha laga rabo samaynta ganacsi miro dhala ah
4) Codsaduhu uusan dowlada ka helin wax kaalmo ah oo xagga kharashaadka mushaarkaa ah.
5) Codsaduha waa inuusan qaadanadeyn waqti iskumida lacagta bilowga iyo lacagaha hoos yimaada sharciga badbaada shaqala'aanta ama lacagta kaalmada suuqa shaqaqada.
6) Inaan la bilaabin hawlaha ganacsiga kahor inta aan goaan laga gaarin ogolaanshada lacagta bilowga.
7) La cadeeyo inaysan hawlaha ganacsiga bilaabidooda aysan suurtogal ahaana lahayn kaalmada bilowga ganacsiga la'aanteed.
8) Kaamadu inaysan khaldaynin xaalada tartanka ganacsi ee ka dhexeeya shirkadaha iibiya badeecadaha isku midka ah.

# Qaybaha ganacsi oo ruqsad u baahan

Dalka Finland waxaa ka jira xoriya nolol la soobixida ama xoogsashada. Tan macanaheedu waa, in Finland gudeheed aad kasameysan kartid ganacsi waafaqsan sharciga iyo hab dhaqanka wanaagsan, ayadoo aan xafiisyada xukuumada looga baahnayn wax ruqso ah. Si kastaba ha ahaatee qaybaha ganacsiga qaarkood waxay u baahan yihiin ruqsad, si loo xaqiiyo nabadgelyada bulshada, bey'adda iyo isticmaaleyaasha badeecada, markaas hawsha ganacsigu waxay u baahan tahay ruqsada hey'adaha xukuumada ee ku shaqada leh. Qaybaha kale ee ganacsiga hawlahooda waxqabadka waa ogeysiis laga siiyo xafiisyada xukuumada ee ku shaqada leh, inkastoo aan hadana loo baahnayn wax ruqso ah.

Ruqsada waxaa bixiya madaxda degmooyinka iyo magaalooyinka, xafiisyada maamulada gobolada, wasaaradaha, madaxda badbaadinta bey'adda ee degmada iyo shaqaalaha kale ee xafiisyada dawlada oo bixiya ruqsooyinka.

Inta aadan bilaabin hawlaha ganacsiga waxaa mar walba muhiim ah, inaad ogaato in hawsha aad bilaabayso looga baahan tahay ruqsad gaar ah ama ogeysiis, iyo waxyaabaha kale ee looga baahan yahay ka ganacsiga qaybtaa ganacsi ee aad markaas ku hawl jirtid. Ruqsada awgeed sida badan dalbadahu waa inuu inta badan leeyahay xirfad shaqo, sumcad wanaagsan iyo inuu ku haboonyahay sharci ahaan howsha uu qabanayo. Sidoo kale xaalada dhaqaale ee codsaduhu waxay saameyn ku yeelanaysaa helitaan ruqsada. Ruqsooyinka ay u baahanyihinn shirkadaha adeegu waxaa laga ogaan karaan bogga internetka ee **www.yrityssuomi.fi/palveluyritykset.**

Sida badan ruqsooyinka waxay leeyihiin waqti cayiman, waana la ceshan karaa ama la kansali karaa, haddii qofka la siiyey uu jabiyo ama uusan ilaalin shuruudihii lagu siiyey ruqsada. Sida badan dalbashada ruqsadu waa lacag. Xaaladaha qaarkood waxaa loo baaahan yahay in ruqsado kala duwan laga helo xafiisyada dowlada ee kala gedisan.

Tusaale ahaan hawlaha makhaayadaha waxaa looga baahanyahay kaarka fayadhawrka (hygieniapassi), kaarka iibinata khamriga, ruqsada iibinta khamriga iyo ogeysiiska kormeeraha caafimaadka, hay'adda gurmadka degd ega ah, ruqsada dhismaha iyo booliska.

Hay'adda ilaalinta ruqsooyinka qaybaha caafimaadka iyo arimaha bulsha ee Valvira (**www.valvira.fi**) waxay bixisaa ruqsooyinka xuquuqda ka ganacsiga xirfadaha daryeelka caafimaadka ee dalka Finaland gudihiisa ka shaqaynaya balse dibada wax ku soo bartay, waxayna siisaa dadka xirfadleyaasha ah ee qaybtaas caafimaadka ka shaqaysanaya., Kuwaasi waa , dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, dhakhaatiirta ilkaha, proviisorit, umulisooyinka, kuwa hadal baridam (puheterapeutit) iyo dhakhaatiirta cilmi nafsiga (psykologit).



Ruqsooyinka la xiriira alaab keenisda waxaa bixiya hay'adda canshuuraha xuduudaha (tullilaitos) **www.tulli.fi.**

Hay'adda cuntooyinka ee Evira (**www.evira.fi**) waxay ilaalisaa nabadgelyada iyo tayada cuntooyinka. Meelaha cuntooyinka lagu iibiyo, sida makhaayadaha, tukaamada iyo dabakaayooyinku waa inay ruqsad ka haystaan madaxda hay'dda cuntada, kahor intaysan bilaabin hawlahooda shaqo. Sharciga daryeelka caafimaadku sida uu qabo habka ogolaanshadu waxay taabanaysaa ganacsiyada timojarka, qaybaha qurxinta- ama daryeelka cagaha iyo ganacsiyada ee ka shaqeeya xardhida jirka (tatuointi). Ogolaanshada waxaa bixinaya madaxda ku shaqada leh ee xafiiska ilaalinta daryeelka caafimaadka ee degmada.

Ciyaarida muusikada (raadiyaha, tv, cd, muusiga tooska markaas loo tumayo) ee goobaha guud laga ciyaaro, sida goobaha dhismaha shirkada ku yaala oo ay macaamiishu ku sugaan adeega shirkada waa in laga bixiyo oo la siiyo ururada xuquuqda sameeyaha. Xafiiska xuquuqda sameeyaha laxamada (**www.teosto.fi**) waxay magdhawga u aruurisaa laxamiisteyaasha, eray sameeyeyaasha iyo Ururka xuquuqda heesaayaasha iyo soo saareyaasha codka ee Gramex (**www.gramex.fi**) wuxuu magdhawga u uruuriyaa, fanaaniinta muusikda tuma, heesaayaasha, kuwa haga tumida muusikada iyo soo saareyaasha codka.

Degmada iyo magaaladu waxay yeelan karaan qawaaniin kala duwan, tusaale ahaan xayeesiinta banaanka iyo banaan ku iibinta.

**XASUUSIN.** Mar walba ii ogow in loo baahan yahay ruqsad kahor inta aadan bilaabin hawsha!

## Qaybaha ganacsiga oo u baahan ruqsada iyo ogeysiintu tusaale ahaan waxay kala yihiin:

| Qaybta ganacsida | Ruqsada- ama shaqaalaha dowalada ee diwaangelinta | |
|---|---|---|
| Hawlaha faxsi marinta gaadiidka | Hay'adda nabadgelyada gaadiidka Trafi | www.trafi.fi |
| Khamri ku cabida baararka iyo dukaamada lagu iibiyo cabitaanada alkolku ku jiro (biirka dhexe, siideriga, khamriga wineka ee leh alkolka aadka u yar) | Shaqaalaha maamulka gobolada ama maamulada aagaga kala duwan ee gobolada | www.avi.fi |
| Samaynta cabitaanada alkolada ah iyo keenitaankooda | Valvira | www.valvira.fi |
| Iibinta hubka iyo qalabka la xiriira hubka | Maamulka booliska | www.intermin.fi |
| farmashiyada, warshadaha daawada, tukaamada iibiya daawooyinka jumlada ah | Xurunta nabadgelyada daawooyinka-horumarinta Fimea | www.fimea.fi |
| Dilaalida guryaha iyo dhismeyaasha | Waaxaha maamulada aagagga | www.avi.fi |
| Ka ganacsiga hawlaha baritaanka wadida gawaarida | Hay'adda nabadgelyada gaadiidka Trafi | www.trafi.fi |
| Xuquuqda isticmaalka shaabada magaca ee badeecadaha laga sameeyo dhagxaanta macdanta ah ee dhulka laga qodo | Tukes | www.tukes.fi |
| Macdan qodis | Wasaarada shaqada iyo xoogsashada | www.tem.fi |
| Deymaha, maalgelinta iyo hawlaha maalgashiga | Waaxda ilaalinta dhaqaalaha | www.finanssivalvonta.fi |
| Hawlaha qaaditaanka dadka xanuusan/ambalas | Waaxaha maamulada aagagga | www.avi.fi |
| Qandaraasyada korontada iyo wiishashka | Tukes | www.tukes.fi |
| Hawlaha ka ganacsiga qaaditaanka alaabooyinka, taksiga, tareemada | Xarumaha Horumarinta dhaqaalaha, Gaadiidka iyo Bey'adda | www.ely-keskus.fi |
| Hawlaha telefoonada | Waaxada isgaarsiinta | www.ficora.fi |
| Iibinta sigaarka | Madaxda degmooyinka | www.kunnat.net |
| Hawlaha kireynta shaqaalaha | Waaxaha maamulada aagagga, waaxda ka wakiilka ah badbaadada shaqaalaha | www.avi.fi/tyosuojelu<br>www.tyosuojelu.fi |
| Ka shaqaynta balaaran ee kiimikada khatarta ah iyo kaydintooda | Madaxda degmooyinka uga wakiilka ah ilaalinta deegaanka | www.kunnat.net |
| Ka shaqaynta warshad ahaaneed ee kiimikada aan aadka iyo kaydintooda | Madaxda gurmadka deg dega aha | www.pelastustoimi.fi |
| Hawlaha dalaalida caymiska, shirkadaha caymiska | Waaxda ilaalinta dhaqaalaha | www.finanssivalvonta.fi |
| Shirkadaha safarada diyaarka ah iibiya | Waaxada ilaalisa danaha isticmaaleyaasha alaabooyinka iyo adeegayada | www.kuluttajavirasto.fi |
| Shirkadaha adeega waardiya qabta | Maamulka booliska | www.intermin.fi |
| Adeegyada daryeelka caafimaadka ee gaarka loo leeyahay | Waaxaha maamulada aagagga | www.avi.fi |
| Iskuulada iyo xanaanooyinka caruurta ee gaarka loo leeyahay | Degmooyinka, Waaxaha maamulada aagagga | www.kunnat.net<br>www.avi.fi |

# Noocyada ganacsiga

Dalka Finland gudihiisa waxaa suurtogal ka ah in laga samaysto hawlo ganacsi oo ah noocyadaan soo socda: magac ku shaqaysi (toiminimi), shirkad furan (avoin-yhtiö), shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahay (kommandiittiyhtiö), shirkad saamiley ah (osakeyhtiö), iskaashato (osuuskunta), laan ay leedahay shirkad dalka dibadiisa laga leeyahay.

Intaas waxaa dheer noocyo shirkado oo dhif ah oo ku yaal shirakado yurub, iskaashatada yurub iyo iskaashiga dan-aha dhaqaalaha yurub (ETEY).

Markii aad goaansane nooca gana-csiga ee adiga kugu haboon, waxaa ku caawinaya khuburada la talinta xagga ganacsiga.

### Doorashada nooca ganacsiga waxaa saameyn ku yeelanaya

- Tirada aasaasayaasha
- baahida raasumaalka iyo helitaan-keeda
- masuuliyada iyo goaan gaarida
- sida hawlaha loo bedbedi karo
- sii socodka hawsha ganacsiga
- hab dhaqanka maalgeliyeyaasha
- qaybsiga faa'iidada iyo daboolida qasaraha
- habka canshuuradka

## Magac ku shaqaysiga ama nolol la soo bixida uu qofku maga-ciisa si gaaar ah ugu shaqaysto

Ganacsiga magac ku shaqaysiga waxaa dalka Finalad uga shaqaysan kara qof caadi ah oo degaan rasmi ah ku leh wadamada aagga dhaqaalaha reer Yurub (ETA). Qofka degen meel ka bax-san aagga wadamada aagga dhaqaa-laha reer Yurub (ETA), si uu aasaaso ganacsi wuxuu u baahanyahay ruqsada maamulka Patentiga iyo diiwaangelinta ganacsiyada (**www.prh.fi**).

Ku ganacsiga magaca shakhsiga ahi macnaheedu waa, in qofku inuu gana-csado kaligiis ama asaga iyo xaaskiisa. Si kasta oo ay lamaaneyaashu u samays-taan ganacsi wada jir ah oo magac ku shaqaysi ah, shirkada waxaa mar walba lagu diiwaangelinayaa hal qof oo lamaa-neyaasha ka mida magaciisa oo keliya.

Ganacsada ayaa goaamada samaynaya, asagaana masuul uga noqonaya heshiisyada shirkada (tusaale ahaan deymaha) hantidiisa oo dhan. Ganacsadaha ayaa shakhsi ahaan masuul uga noqonaya khasaarooyinka shirkada, laakiin sidoo kale kaligiis qaa-danaya faaiidada ka soo baxda shaqada hawlaha ganacsiga.

Shirkada magac ku shaqaysigu malaha gudi maamula, sidoo kale malaha agaasime, hantidhawr inay yeelatana qasab maaha.

Ganacsaduhu wuu maalgelin karaa shirkada, laakiin taasina qasab kuma aha ganacsadaha, ganacsaduhu mus-haar kama qaadan karo shirkada maga-ciisa ku furan., sidoo kale mushaar ma siinkaro xaaskiisa iyo ilmihiisa da'doodu ka yartahay 14 sano, balse lacagta waxuu ganacsaduhu kala bixi karaa koontada shirkada, taas oo lagu maga-caabo lacagqaadashada shakhsiyadeed. Hawlaha ganacsiga waxaa laga bixina-yaa canshuur ayadoo loo eegayo hadba dakhliga sannadkii soo gala shirkada.

Si kasta ee uu ganacsaduhu u leey-ahay shirkad magac ku shaqaysi ah, hadana waa inuu kala duwo dhaqaalihiisa shakhsiyadeed kan shirkada asagoo istic-maalaya habka xisaabaadka ganacsiga.

Ganacsatada magacooda ku shaqaysata waxaa loo kala qaybiyaa xirfad ku ganacsateyaal iyo ganacsato caadi ah oo leh goobo ganacsi, labda noocba qofku iskiis ayuu u ganacsa-daa. Farqiga labada nooc u dhexeeyaa waa, in qofka xirfadiisa ku ganacsada uu kaligiis xirfadiisa ku shaqeysto oo uusan lahayn wax shaqaale ah. Gana-csadaha leh goobta ganacsi oo maga-ciisa ku shaqaysta waxaa laga yaabaa inuu yeesho shaqaale kabaxsan isaga qoyskiisa sidoo kale habka xisaabaad-kiisu way ka balaaran yihiin kuwa qofka xirfadiisa ku shaqaysta.

Xirfad ku shaqaystuhu waa ganacsa-daha ku sahqaysan kara xirfadiisa asa-goo aan lahayn goob shaqo oo joogto ah iyo shaqaale kale oo asaga ka bax-san. Marka la barbardhigo ganacsadaha kale ee magaciisa ku ganacsada farqiga ugu weyn waa xaqa uu leeyahay inuu sameeyo habka xisaabaadka fudud. Xir-fad ku shaqaystuhu wuxuu ahaan karaa tusaale ahaan mid ku shaqaysta dawaarle ahaan, fuundinimo ama turjubaannimo.

Magaciisa ku ganacsadaha gana-csiga leh waa ganacsadaha leh goob ganacsi oo rasmi ah ama shaqaaleyn kara dad kale. Magaciisa ku ganacsadaha leh goobta ganacsi waa inuu sameeyo habka xisaabaadka ee laba jibaarka ah.

### Asaasida shirkada magaca lagu shaqaysto

Asaasida shirkada magaca lagu shaqysa-nayo waa sahlantahay. Looma baahana in la sameeyo dukumintiyo kala duwan oo aasaaska la xiriira. Si kastaba ha ahaa-tee aasaasida ganacsiga waa in la ogey-siiyaa xafiiska diiwaangelinta ganacsiga iyo maamulka canshuuraha. Ogeysiiska waxaa lagu sameeyaa foomka Y-3 ee laga heli karo cinwaanka internetka **www.ytj.fi.** Diiwaangelintu waa lacag waana (75 euro, sannadka. 2011). Hawsha gana-csiga waxaa la bilaabi karaa haddiiba marka ogeysiiska la sameeyo kadib, had-dii uu san ganacsigu ahayn mid u baahan shati ama ruqsada gaarka ah ama aan la dalbaneyn lacagta bilowga (starttiraha).

### Yuu magac ku ganacsigu ku haboonyahay?

Magac ku shaqaysigu waa nooca ugu sahlan noocyada ganacsiga isla mar-kaasna aasaaskiisu ugu sahlan yahay. Ganacsiga magac ku shaqaysiga ah sida badan wuxuu ku haboon yahay qofka rabta inay bilowdo shirkad yar oo ganacsi.

## Shirkadaha shakhsiyaadku leeyihiin: shirkada furan iyo shirkada maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahay

Shirkadan shakhsiyaadku leeyihiin waxay samaysmataa, haddii laba qof ama dad badan ay ku heshiiyaan inay shirkad samaystaan oo ay sameeyaan heshiiska shirkadda. Dadka shirkaddu ka dhaxaysaa way u siman yihiin arri-maha shirkadda oo dhan, si wadajir ah bayna shakhsi ahaan masuul uga yihiin go'aamda arrimaha shirkadda ku saab-san, waajibaadka shirkadda saaran iyo deymanka shirkadda lagu leeyahay.

Si loo sameeyo shirkada shakhsiy-aadku leeyihiin, waxaa loo baahanyahay ugu yaraan laba qof oo shirkad wadaag

ah. Sida badan labada qof waa dad caadi ah, laakiin shirkada waxaa wadaagi kara laba shirkado iyo ururo (oikeushenkilöt). Shirkada shakhsiyaadku leeyihiin waa laba nooc: shirkad furan (avoin yhtiö) iyo shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahay (kommandiittiyhtiö).

Shirkada furan uguyaraan hal qof oo ka mid ah shakhsiyaadka shirkada iska leh waa inuu si rasmi ah u degenyahay Finland, shirkada maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahayna waa in ugu yaraan mid ka mid ah shakhsiyaadka masuuliyadu saaran tahay uu si rasmi ah u degen yahay Finland ama haddii shakhsiyaadka shirkada iska leh ay yihiin shakhsiyaad ssarciyeed (shirkad ama urur) way inay ka diiwaangashanyihiin mid ka mid ah wadamada aagga dhaqaalaha ee Yurub (ETA). Haddii aysan sidaas ahayn, waa in dhammaan shakhsiyaadka shirkada wada leh ee ka yimid meelaha ka baxsan wadamada aagga dhaqaalaha reer Yurub ay ruqso ka dalbadaan maamulka Patantiga iyo diiwaangelinta shirkadaha ganacsiga.

Shakhsiyaadka shirkada wax ka leh waxay shirkada ku maalgelinayaan hadba doorkooda, taas oo ah lacag, hanti ama shaqo. Shirkada furan maalgelin ahaan waxaa ugu filan shaqada uu geliyo shakhsiga shirkada wax ka leh. Shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahay (kommandiittiyhtiö) shakhsiga aan codka lahayn ee shirkada wax ka leh maalgelin ahaan waxaa looga rabaa lacag ama hanti kale oo lacag u dhiganta. Si kastaba ha ahaatee sharcigu ma qeexayo intee in le'eg ayuu noqonaysaa in uu ku darsanaayoo shirkada.

Shirkada furan dhammaan shaksiyaadka shirkaddu ka dhaxaysaa way u siman yihiin arrimaha shirkadda oo dhan waajibaadka shirkaduna wuu wada saaranyahay, si wadajir ah ayayna hantidooda oo dhan shakhsi ahaan masuul uga yihiin deymanka shirkadda lagu leeyahay, isla markaasna si wada jir ah ayey u wada gaarayaan go'aamda arrimaha shirkadda ku saabsan, haddii aan si kale lagu heshiin.

Shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahay (ky) waxay leedahay laba nooc oo ah shakhsiyaadka shirkada iska leh, kuwo masuuliyadu saarantahay iyo kuwo aan cod lahayn. Shirkkada noocan ahi waa inay yeelataa ugu yaraan hal qof oo masuuliyadu saaran tahay hal qof oo shirkada wax ku leh laakiin aan cod ku lahayn go'aamada shirkada. Shakhsiyaad masuuliyadu saarantahay waxay hantidooda oo dhan masuul uga yihiin dhammaan heshiisyada iyo deymaha shirkada, kuwa masuuliyadu saaranyahay yaana goaamada shirkada gaaraya.

Waa shirkad dad shakhsiyaad ah leeyihiin, laakiin waxay shirkadda furan kaga duwan tahay, shirkadda noocan ahi waxay leedahay hal ama dhowr qof oo masuuliyadda shirkaddu saaran tahay, waxay kaloo leedahay ugu yaraan hal qof oo shirkadda wax ku leh, laakiin aan cod ka dhiiban arrimaha shirkadda.

Shakhsiyaadka cod la'aanta ah ee shirkadda wax ku leh, laakiin aan cod ka dhiiban arrimaha shirkadda waxay shirkada ku maalgelinayaan lacag ama hanti kale. Shakhsiyaadka cod la'aanta xaq uma laha inay ka qayb qaataan goaamada shirkada, wax masuuliyad ahina kama saarna arimaha shirkada, haddii aan heshiiska aasida shirkada aan si kale lagu goaansan.

### Hawlaha aasaasida

Shakhsiyaadka shirkada wada samaysana waxay sameynayaan heshiiska shirkada, kaasoo ay cadaynayaan magaca shrkada, magaalada xarunta u ah, qaybta ganacsi ee ay tahay shirkadu, magacyada shkhsiyaadka wada jirka u furanaaya shirkada, cinwaanada iyo waxa ay shirkada ku darsanaayaan. Waxaa kaloo lagu heshiiyaa, yaa xaq u leh ninuu shirka magaceeda wax ku sixiixo, sidee loo dooranyaa agaasimaha shirkada haddii loo baahdo iyo waa intee in le'eg dhererka sisaab sanadeedka shirkadu, sidee hantidhawrka loo dooranayaa, maxay tahay hantida shakhsiyaadka shirkada wada leh ay shirkada ku leeyihiin iyo faaiidada iyo weiliba sidee loo burburin karaa ama looga bixi karaa heshiiskii shirkada lagu aasaasay.

Heshiiska shirkada waa in waraaq loogu qoro si aad u taxadar badan, waxaana haboon in la kaashado khuburo ku xeel dheer arimaha noocaan oo kale ah.

Shirkada shakhsiyaadku leeyihiin waa in laga diiwaangeliyaa maamulka diiwaangelinta shirkadaha iyo maamulka Canshuuraha. Ogeysiiska waxaa lagu sameeyaa foomka calaamadiisu tahay Y2. Foomamka waxaa laga heli karaa cinwaanka internetka ee **www.ytj.fi.** Ogeysiiska waa in lagu lifaaqo waraaqaha heshiiska shirkada oo orijinal ah. Diiwaangelintu waa lacag (180 euro, sannadka. 2011).

### Goorma ayey ku haboon tahay in la sameeysto shirkada shakhsiyaadku leeyihiin?

Shirkada shakhsiyaadku leeyihiin waa nooc ganacsi oo ku haboon ganacsiyada qoyska. Waa in la xasuusnaado in shirkada furan shakhsiyaadka iska leh iyo shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay saaran tahay shakhsiyaadka iska leh qaar ka mid ah, in labada noocba shakhsiyaadkaasi ay si siman masuul uga yihiin deymaha iyo heshiisyada shirkadu gasho. Haddii hal shakhsi oo uu heshiis galo, shakhsiyaadka kalena masuul ayey ka yihiin heshiiskaas uu galay halka shakhsi. Sidaas awgood waa inay jirtaa is aaminaad xoog leh oo ka dhaxaysa shakhsiyaadka masuuliyada haya. Si kastaba ha ahaatee masuuliyada qofka waxaa lagu xadidi karaa heshiiska aasaasida shirkada.

## Shikad saamiley ah (Oy)

Shirkada saamileyda ah waxaa aasaasi kara hal qof ama dhawr qof ama bulsho(urur). Marka la aassaasayo saamileyda samaynaysa shirkadu waxay calaamadaynyaan dhamman saamiyada shirkada. Shirkada saamileyda ah ee shakhsi ahaanta loo leeyahay saamiga raasumaalku waa inuu ahaadaa ugu yaraan 2 500 euro. Sharciga shirkadaha saamileydu ma qeexayo degaanka dadka shirkada saamileyda ka ah , sidoo kale ma cadeynayo meesha shirkada si rasmi xarun ugu ah, taas macnaheedu waa in



dadka aasaasaya shirkada saamileyda ah oo ku leh saamigu ay daganaan karaan meel ka baxsan wadamada aagga dhaqaalaha ee reer Yurub (ETA).

Saamileydu waxay qadarka saamigooda ay shirkada ku maalgeliyyen oo kelya masuul uga yihiin dhamaan heshiisyada shirkadu gasho, haddii aysan lacagaas ku bixin damaanad qaadida deymaha shirkadu qaadatay.

Arimaha shirkada waxaa goaan ka gaaraya saamileyda. Shakhsiga ugu saamiga badan wuxuu leeyahay awooda codka ugu badan goaan gaarista. Shirkada saami layda ah waa inay yeelato maamul hogaamiya, kaas oo ay doortaan dadka saamileyda ahi. Gudiha maamulku wuxuu maareeyaa hawlaha shirkada, isla markaasna gudiga maamulku wuxuu matalaa shirkada. Gudiga maamulku waxay shirkada u dooran karaan agaasime kala wada maamulka shirkada. Si kastaba ha haatee doorashada agaasihu waa wax ikhtiyaari ah oo qasab maaha. Agaasimaha waxaa la doorankaraa haddiiba marka la aasaasayo shirkada lana sameynayo heshiiska shirkada ama waxaa dib looga dooran karaa shir maamulka shirkadu uu dib ka qabto.

Haddii xubnaha gudiga ee shirkada saamileyda ah ay ka yar yihiin sadex xubnood, markaas waa in gudiga loo doortaa ugu yaraan hal xubin oo kayd ah. Ugu yaraan hal xubin oo ka mid ah gudiga shirkada iyo hal xubin oo kayd ah (markii gooni loo tiriyo) waa inay degaan joogto ah ku lahaadan wadan ka mid ah wadamada aagga dhaqaala ee reer Yurub. Haddii aysan sidaas ahayn, waa in maamulka Shatiga iyo diiwaangelinta shirkadaha looga dalbo ruqsad dhammaan xubnaha rasmiga ah ee gudiga iyo kuwa kaydka ah ee ka yimid meelo ka baxasan wadamada aagga dhaqaalaha reer Yurub.

### Hawlaha aasaasida shirkad saamiley ah

Si loo aasaaso shirkada saamileyda ah waa in la sameeyaa heshiiska aasaasida, kaasoo lagu lifaaqayo sida ay u abaabulan tahay shirkadu. Abaabulnaanshada shirkadu waxay ka kooban tahay sadex waxyaalood: Magacay ay shirkadu ku hawlgaleyso, degaankeeda rasmiga ah, qaybta ganacsi ee ay ka shaqaynayso.

Qaybta ay ka hawlgeleyso waxaa lagu calaamadayn karaa qaybaha guud ee ganacsiga (qasab maaha inaad ku calaamadeysid qayb ganacsi oo gaar ah).

Heshiiska aasaadida waxaa waxaa sida la iskula meeeldhigaa magacaabista xubnaha gudiga, agaasimaha, hantidhawrida, xilliga xisaab xirka iyo cadada saamigu uu yeelanayo, qiimaha saamiga iyo maalinta la bixinayo saamiyada. Sidoo kale aasaaseyaasha shirkadu waay qayb sadaan saamiyada ama mid walba saamigiisa loogu calaamadeeyaa ewarqadaha heshiiska aasaaska.

Shirkada saamileyda ah waa in laga diiwaangeliyo maamulka diiwaangelinta ganacsiga. Inta aysan dharci ahaann dhaqan gelin. Ogeysiiska waxaa lagu sameeyaa foomka Y-1 iyo foomkiisa ku lifaaqan. Diiwaangelintu waa lacag (350 euro, sannadka 2011). Ogeysiiska waaa in la sameeyo sadex bilood kadib markii la sixiixay heshiiska aasaasida, haddii kale aasaasidu way dhacaysaa. Foomka waxaa laga heli karaa cinwaanka internetka ee **www.ytj.fi**. Ogeysiiska aasaasida waxaa waxaa sidoo kale lagu lifaaqaa waraaqaha heshiiska asaasida oo aan koobi ahayn iyo koobiga abaabulnaanshaha shirkad (magaca, meesha degaan u ah, qaybta ganacsi), haddii aysan qayb ka ahayn waraaqaha heshiiska aasaaska.

Inta aan la diiwaan gareyn shirkada saamileyda ah, waa in raasumaalka saamiga lagu shubo koontada shirkada cusub. Haddii bixinta saamiga loo adeegsanayo hanti aan lacag ahayn (apportti) waa in heshiiska aasaasida ay shuruud ku jirto, taas oo oranaysa qofka saamiga loo calaamadaynayo wuxuu xaq u leeyahay ama waajib ku ah inuu qiimaha uu

calaamadaystay ku dhiibo hanti kale oo aan lacag ahayn. Sidoo kale heshiiska aasaasida waa in laga helaa cadaynta waxa ay tahay hantida u dhiganta lacagtu. Diiwaangelinta ganacsiga waa in lagu lifaaqo cadeynta hantid hawrka oo la xiriirta in hantida la dhiibayo ay u gu yaraan shirkada u leedahay qiimo u dhigma lacagta laga rabay shakhgiga. Cadaynta waxaa bixin kara hantidhowre ama urur hanti dhawr ah KHT- ama HTM ah oo ay aqbashay rugata dhexe ee ganacsigu.

Haddii kuwa shirkada aasaasaya ay ka badanyihiin hal qof, waxaa haboon in la sameeyo heshiiska saamilaha oo qoraal ah, heshiiskaas oo lagu cadeynayo heshiiska ka dhexeeyada saamileyda iyo xiriirkooda shirkada. Heshiiska saamiluhu wuxuu kaa caawinayaa inaad horay u sii maareysid, khataraha ka imaan kara xagga sharciyada, kuwaas oo ka dhalan kara xiriirka shirkada iyo saamileyda. Sidaas waxaa uga fogaan karnaa is afgaranwaaga aan macnaha lahayn oo wax u dhimaya hawlaha ganacsiga. Samaynta heshiiska saamileyda waxaa haboon inaad la kaashato qof sharci yaqaan ah. Heshiiska saamileydu uma baahna in lagu lifaaqo foomamka diiwaangelinta.

### Gormee ayey ku haboon tahay shirkada saamileyda ah?

Shirkada saamileyda ahi waxay ku haboontahay dhammaan dhammaan hawlaha ganacsiga oo dhan.

Shirkada saamileydu waa shirkada kaliya ee ay hal qof aasaasi karto marka laga reebo tan qofka magaciisa ku ganacsado uu furto. Markaas waxaa loo baahanyahay qof kale oo gudiga maamulka xubin kayd ah u noqota. Faa'iidada shirkada saamileyda ahi waa waajibaadka dadka saamileyda ah oo ku xadidan hadba hantida saamigooda, haddii aan shirkada deymaheeda kale damiin laga ahayn.

Nooc ganacsi oo ugu haboon shirkadaha waaweyn oo babliga ah waxaa shirkada saamileyda ah, taas oo lacagta ugu yar ee saamiyadeedu dhantahay 80 000 euro. Shirkadaha saamileyda ah ee babliga ahi waa kuwa iibsiga saamiyadoodu ay u furanyihiin dadweynaha, saamiyadoodana lagu kala iibsan karo suuqyada waraaqaha saamiyada lagu kala iibsado.

### Is-kaashato

Iskaashatadu waa dad bulsho ah oo madax banaan- Xubnaha ayaa wada maamula iskaashatada waxayna si dimoqdaadi ah u meelmariyaan hawlaha iskaashatada, dhaqaale ahaan, bulsho ahaan iyo arimaha dhaqanka oo ay higsanayaan.

Si loo aasaaso iskaashato waxaa loo baahanyahay ugu yaraan sadex qof ama sadex urur. Dadka iskaashata wax ka leh waxaa lagu magacaabaa xubno, sidoo kale hantidida iskaashatadana waxaa lagu magacaabaa raasumaalka iskaashatada.

Haddii xubin ka mida iskaashatada uu ka baxo iskaashada ama laga cayriyo, waxaa loo celinayaa lacagtii uu xubinta uga ahaa iskaashatada. Xubnaha iskaashatadu waxay masuul uga noqonayaan heshiisyada iyo deymaha ay iskaashatadu gasho qadar le'eg qaybta lacageed ee ay ku maalgeliyeen iskaashatada oo keliya, haddii aysan jirin deymo kale oo ay iskaashata ka damiinteen.

Arimaha iskaashatada waxaa goaan ka gaara xubnaha iskaashatada, sida badan xubin kasta waxay leedahay hal cod. Xubunuhu waxay doortaan maaulka iskaashatada. Gudiga maamulku waxay masuul ka yihiin hawlaha maamulka ee iskaashatada waxayna matalaan ama wakiil ka yihiin iskaashatada. Maamulku wuxuu isnta badan iskaashatada u doortaa agaasime. Si kastaba ka ahaatee doorashada agaasimuhu waxa qasab ah ma aha. Agaasimuhu wuxuu maareeyaa arimaha maamulka ee iskaashatada. Agaasimaha waxaan la dooran karaa haddiiba marka la aasaasayo iskaashatada oo la qorayo waraaqaha aasaaska.

### Hawlaha aasaasida is-kaashato

Si loo aasaaso iskaashatada waxaa la qoraa waraaqaha aasaasida, kuwaas oo lagu lifaaqo qawaaniinta iskaashatada. Qaraaniinta waa in lagu xuso ugu yaraan magaca iskaashatada, meesha ay degentahay, qaybta ganacsi ee ay ka shaqaynayso, xiligga xisaabaadka iyo cadada lacageed ee ay xubnuhu bixinayaan. Sidoo kale iskaashatada waa in laga diiwaangeliyo maamulka diiwaangelinta ganacsiyada. Ogeysiiska waxaa lagu sameeyaa foomaka Y1 iyo foomka lifaaqiisa ah. Ogeysiiska waaa in la sameeyo lix bilood kadib markii la sixiixay heshiiska aasaasida, haddii kale aasaasidu way dhacaysaa. Diiwaangelintu waa lacag (350 euro, sannadka 2011).

### Qofkee ayey iskaashatadu ku haboontahay?

Sida badan iskaashatadu waxay ku haboontahay tusaale ahaan ganacsadaha khabiirka ah, sida soo saaraha adeegyada ah xagga dhaqamada- iyo barwaaqo ku noolaanta ah ama badalaada iyo turjumida luuqadaha. Tusaale ahaan xubin kasta oo ka mida iskaashatadu wuxuu samaeysan karaa hawlihiisa ganacsi oo asaga u gaar ah, markaas iskaashadu waxaa kaliya oo ay qabanaysa hawlha biilasha, xisaabaadka iyo suuqgeynta.

### Farac ka tirsan shirkad dalka dibadiisa laga leeyehay

Faraca ay leedahay shirkad ama uru dalka dibadiisa laga leeyahay, kaas oo dalka Finland gudihiisa ku leh ganacsi joogto ah ama ka wada hawlo xirfadeed. Magaca faraca waa inu u kujiro magaca shirkada dibada ee faracu qaybta ka yahay oo ah qaabka rasmiga ah ee ay u diiwaangashan tahay, marka lagu daro in magacu sheegayo farac ahaanshada. Magaca dibada wax lagu darayo tusaale ahaan way u qornaan kartaa ”sivuliike Suomessa”, (faraca Finland) ”filial i Finland” ama ”filial”.

Samaynta faraca waa in ogeysiis laga sameeyo oo la geeyo xafiiska diiwaangelinta ganacsiga. Ogeysiiska waxaa la sameynayaa intaad hawsha ganacsiga la bilaabin. Haddii shirkada ganacsiga ama ururka faraca furanaya laga leeyahay meel ka baxsan wadamada aagga dhaqaalaha Yurub, waa in faraca sameyntiisa awgiis loo dalbado shatiga ama ruqsada Maamulka Patangiga iyo diiwaangelinta ganacsiyada.

# Arimaha diiwaangelinta

## Diiwaanka ganacsga

Diiwaanka ganacsigu (**www.prh.fi** > kaupparekisteri (diiwaanka ganacsiga)) waa rasmi waana diiwaan caan ah oo laga heli karo macluumaadka shirkadaha ganacsiga. Shirkadaha Finnishka qaybta ugu badan waxay ka koobantahay shirkada saamileyda ah iyo shirkadaha ganacsi ee shakhsiyaadka magacooda ku furan. Sida caadiga ah dhammaan shirkaduwu waa inay ogeysiis ka sameeyaan xafiiska diiwaangelinta. Diiwaangelinta shirkaduhu waa lacag.

Sidoo kale isla ogeysiiska diiwaangelinta ayaad ogeysiis ugu samayn kartaa diiwaanada canshuuraha, kuwaasoo kal ah diiwanka canshuuraha shirkaduhu ay kala qaataan ee biilasha lasocda, diiwaanka shaqabixiyaha iyo diiwaanka qofka waajibku ka saaranyahay soo uruurinta canshuuraha qiimaha alaabta la socota. Samaynta ogeysiiska diiwaanadan waa bilaash.

## Qiimaha diiwaangelinta shirkadaha sannadka 2011

Shirkada magaca qofka ku furan

**75 euro**

Shirkada furan iyo shirkada dadka ka dhaxaysa, laakiin qaarna masuulida qaadaya, qaarana cod la'aanta yihiin

**180 euro**

Shirkada saamileyda ah, iskaashato, farac shirkadeed, ETEY

**350 euro**

## Lambarka aqoonsiga ee ganacsiga (Y-tunnus)

Aqoonsiha shirkadaha iyo ururada (Y-tunnus) waa aqoonsi shirkad walba u gaar ah, kaas oo dawladu siiso shirkadaha/ganacsiyada iyo ururada. Lambarada aqoonsiga waxaa la heli karaa haddiiba, markii ogeysiiska samaynta shirkada lagu qoro diiwaanka macluumaadka shirkadaha iyo ururada **(www.ytj.fi).** Aqoonsiga shirkaduhu wuxuu ka kooban yahay todoba lambar ariijin iyo calaamad hubin ah., tusaale 1234567-8. Calaamada aqoonsiga waxyaabaha looga baanyahay waxaa ka mid ah biilasha, heshiisyada iyo sidoo kale in la isticmaalo marka dan laga leedahay xafiiska diiwaangelinta ganacsiga iyo xafiiska canshuuraha.

## Magaca ganacsiga

Waxaa haboon in shirkada magac wanaagsan oo bixiyo. Magacu waa inuu ahaada mid si gaar ah shirkada ugu gooni ah. Magac shirkadu waa inuusan ahaan mid erayo guud oo keliya ka kooban ama qeexaya adeega shirkadu qabanayso, sidoo kale waa inuusan ahaan qof ama goob magaceed. Magucu waa inuu si wanaagsan ugu duwanaadaa magacyada kale iyo alaabooyinka kale ee la diiwaangeliyey. Haddii magacaaga ama magaca goobtu ay qayb ka yihiin magaca shirkada waxay xaqiijinayaan gaar ahaanshada magaca shirkada. Diiwaangelinta magaca shirkadu wuxuu shirkada xaq u siinayaa inay kaligeed xaq u yeelato isticmaalka magacaas dalka oo dhan, taas macnaheedu waa in wax aan shirkadan ahayn aysan isticmaali karin magacaas.

Sidoo kale magaca shirkadu wuxuu wax ka sheegayaa nooca shirkadu ay tahay. Qofka ganacsiga iskiis ah leh wuxuu aqoonsi ahaan u isticmaali karaa "'tmi" ama "magac ku ganacsasho" laakiina tani qasab maaha. Shirkada maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahay, waxay isticmaashaa soo gaabinta ah ky, aqoonsiga shirka saamileyda ah waa oy, shirkada saamileyda caamka ah ee saamiyadeeda suuqyda lagu kala iibsado waxay isticmaashaa calaamada oyj. Aqoonsiga "shirkada furan" looma isticmaali karo ay. Shirkada faraca ka ah shirkada kale ee dibada laga leeyahay, marka laga reebo magaca shirkada qalaad ee ay qayb ka wadato waxay leedahay calamada ah faraca ganacsiga ee Finland "sivuliike Suomessa" ama "filial i Finland".

Ganacsiga magac ku shaqaysiga ah waxaa lagu diiwaangeliyaa luuqada Finnishka ama luuqada Swedishka. Ganacsiga magac ku shaqaysiga calaamadiisa aqoonsigu waxay noqon karaa calaamado luuqada kale amar laga reebo luuqada Finnishka ama Swedishka. Tusaale ahaan Ab Finntex Oy, ama Oy Finnex Ltd. Ganacsiga magac ku shaqaysigu wuxuu yeelan karaa magacyo kale oo ku lamaansan magaciisa rasmiga ah, ama magacyo loo turjumay finnish ama swedish. Shirkada saamileyda ah magaceeda rasmiga magacyada ugu lamaansan waa inay ku qoranyihiin habka kala dambaynta shirkada. Sidoo kale shirkada furan iyo shirkada maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahay (kommandiittiyhtiö) magacyada kale ay yeelan karaan waa inay ku qoranyihiin heshiiska shirkada, sidoo kale magaca lamaanaha ah ee ay yeelanayso iskaashadu waa inuu ku qornaado qawaaniinta iskaashatada.

## Magac ganacsi oo kaabe ah

Qofka magaciisa ku ganacsada wuxuu qayb ka mida ganacsigiisa u isticmaali karaa ku shaqaysiga magac gagac ganacsi kaabe ah. Adeegsiga magac gacansi kaabaha ahi wuxuu aad u fudud yahay markii, shirkadu ay ka shaqaynayso laba qaybood oo ganacsi ahaan aad u kala duwan. Tusaale ahaan "dukaanka ubaxa ee Jokinen" ("Jokisen kukkakauppa"), sidoo kale ganacsaduhu wuxuu lahaan karaa shirkad hawlaha xagga nadaafada ka shaqaysa oo lagu magacaabo "Näppärä". Diiwaangelinta magaca ganacsi ee kaabaha ahu waa lacag, isla markaasna magaca ganacsi kaabaha ah waxaa loo is ticmaali karaa oo keliya hawshaas ganacsi oo loogu talo galay. Ganacsi kaabeyaashu waxay noqon karaa dhawr. Si kastaba ha ahaatee dhammaan hawlaha shirkadu kuma dhisnaan karaan hawlaha ganacsi

kaabeyaasha. Ayadoo adeegsanaysa magaca ganacsi kaabayaasha hal shirkad ayaa ka shaqayn karta qaybo ganacsi oo kala duwan ayadoo ku shaqaysanaysa ”magacyo shirkado” oo kala duwan. Tan waxay fududeyn kartaa hawlaha shaqada iyo suuqgeynta. Si kastaba ha ahaatee dhammaan qaybaha shirkada oo dhan waxay yeelanayaan hal xisaab iyo hal lambar oo ah aqoonsiga ganacsiga (Y-tunnus).
Qaybta ganacsigu ku salaysan yahay

Qaybta ganacsi ee shirkadu ka shaqaynayso mar walba waaa la ogeysiiyaa, makii ganacsiga laga diiwaangelinayo xafiiska diiwaangelinta ganacsiga iyo kan maamulka canshuuraha. Sidoo kale xafiiska diiwaangelinta waxaa la ogeysiin karaa waxa loogu yeero qaybaha guud ee ganacsiga, taas oo macnaheedu yahay in shirkaadu ay ka shaqayn karto gancsi kasta oo sharci ah isla markaasna waafaqsan dhaqanka suuban. Si kastaba ha ahaatee waxaas wanaagsan in qaybta ganacsiga si cad loo ogeysiiyo xafiiska diiwaangelinta si tayada hawsha laqabano ay waadax u noqoto.

Sidoo kale xafiiska diiwaangelinta waxaa tusaale laga siin karaa ogeysiiskaas oo kale: ”qaybta ganacsiga oo guud” waxaa ka mida hagaajinta gawaarida, dajactirka iyo dukaan. Markaas macaamiishu xitaa si sahlan ayey u fahmaayaan, qaybya ganacsi ee shirkadu ka shaqayneyso.

Si kastaba ha ahaatee xafiiska maamulka canshuuraha waa in la ogeysiiyaa qaybta ganacsi ee ugu muhiimsan, ee ganacsiga intiisa badan ka hawlgalo. Shirkadu waxay lahaan kartaa hal qayb oo muhiim ah, waana in qaybtaasi ay si cad u tilmaanto qaybta ganacsi ee shirkadu ka shaqaynayso, iyo nooca hawsha: tusaale ahaan hagaajinta gawaarida, dayactirka iyo dukaanka. Lama diiwaangelin karo haddii hawsha ugu muhiimsan ee shirkadu qabanayso ay si xad dhaaf ah ganacsi guud u tahay.

## Diiwaanka horey u qaadida canshuuraha (ennakkoperintärekisteri)

Bilaabida hawlaha ganacsiga waxaa shardi u ah sida badan, in shirkadu ay iska diiwaangeliso diiwaanka horay u qaadida canshuuraha, ee uu maamulo xafiiska canshuuruhu. Ogeysiiska diiwaanka horay u qaadida canshuuraha waxaa lagu sameeyaa isla foomka xafiiska diiwaangelinta loogu sameeyo ogeysiiska sameynta ama aasaasida shirkada. Markii shirkadu gasho diiwaanka horay u qaadida canshuuraha, qolada ay shirkadu shaqada u qabanayso oo shaqada in loo qabto dalbatay kama jarayaan shirkada wax canshuur ah ee waxay u soo shubayaan biilka oo canshuurtiisii wata. Shirkada ku jirta diiwaannka diiwaanka horay u qaadida canshuuraha ayaa ka taxadareysa canshuuraheeda, ayadoo bixinaysa canshuurta qadimaada ah ama horumariska ah.

## Tigidka canshuuraha qadimaada ah

Shirkada bilowga ah waxay bixinaysaa canshuur qiyaas ah oo ku salaysan, qiyaasta ay shirkadu ka bixiso intee in le’eg oo dakhli ah oo la canshuuri karo ayaa shirkada soo geli kara sannad xisaabaadkeeda ugu horeeya. Shirkadu waxay qiyaasteeda sheegeysaa marka la samaynayo ogeysiiska aasaasida shirkada.

Xafiiska canshuuraha ayaa shirkada u goynaya canshuurta qadimaada ah, taas oo ku salaysan qiyaasta dakhliga ee shirkadu ay horay u samaysay, dabadeedna waxay u soo diraysaa tigidka canshuurta qadimaada ah iyo foomamka akoon ku wareejinta canshuuraha qadimaada ah.

## Diiwaanka shaqabixiyaha

Diiwaanka shaqabixiyaha waxaa haya maamulka canshuuraha (**www.vero.fi**).

Shirkadu waa inay iska qortaa diiwaanka shaqabixiyaha, haddii ay shirkada

1) si jogto ah ugu shaqeeynayeen ugu yaraan labo shaqaale ah laba iyo tobanka bilood ee sannadka gudihiisa ama
2) ama si ku meel gaar ah ay hal mar ugu shaqaynayeen ugu yaraan lix shaqaale ah.

Haddii mushaar bixintu ay tahay ku meel gaar ama mushaarka la siiyo hal shaqaale oo keliya, markaas shirkadu uma baahna inay isku qorto diiwaanka shaqabixiyaha..

## Diiwaanka waajibaadka bixinta canshuuraaha qiimaha la socda

Shirkadaha ay ku waajibtay bixinta canshuuraha qiimaha la socda waxay isku qorayaan diiwaanka maamulka canshuuraha ee waajibaadka bixinta canshuuraha qiiimaha la socda, waxayna ogeysiika sameynayaa markay xaafiiska diiwaangelinta gancsiga ka samaynayaan ogeysiiska aasaasida shirkada. Markaas waxaa kaloo la ogeysiinayaa maalinta ay bilaabanayso hawsha waajibaadka canshuuraha qiimaha la socda. Diiwaanka waajibaadka canshuuraha qiimaha la socda waa la dalban karaa, haddii xataa sharci ahaan aysan shirkada saarneyn waajibka bixinta canshuuraha qiimaha la socda. Tusaale ahaan haddii iibku uu ka yaryahay sannadkii 8 500 euro. Shirkada diiwaanka ku jirta waxay canshuuraha waxay iibisay la socda ka jari kartaa canshuurihii la socdey alaabihii ay soo iibsatay.

Dalka Finland gudihiisa shirkada dibada laga leeyahay waxaa ku waajiban inay bixiso canshuuraha qiimaha la socda, haddii ay rug ganacsi oo joogto ah ku leedahay dalka. Shirkadaha

qalaad waxaa diiwaanka waajibaadka canshuuraha qiimaha la socda loogu calaamadeyaa sida shirkadaha Finnishka. Shirkada qalaad waxay Finland gudaheeda ka dalban kartaa in lagu qoro diiwaanka waajibaadka canshuuraha qiimaha la socda. Xaalada dhif ah qaarkood ayaa shirkadaha qalaad mar walba waxaa saaran waajibaadka canshuuraadka qiimaha la socda.

Haddii ganacsadaha ay latahay inaysan shirkadiisa waajib ku ahayn bixinta canshuuraha qiimaha la socda, ogeysiiska waxaa lagu calaamadeeya istilaab goobada ay ku qorantahay ”uma arko inay waajib ku tahay bixinta canshuurta qiimaha alaabada la socota” iyo baaritaan sababaha xagga canshuur la'aanta ah.

# Xisaabaadka iyo xisaab xirka ganacsiga

Sida uu qabo sharciga xisaabaadku dhammaan shirkadaha waxaa ku waajiba inay sameeyaan xisaab xir. Waxaa haboon in ganacsaduhu uu banaanka ka iibsado adeega xisaab xirka, si uu asagu awooda u saaro inuu helo dakhli ku haboon.

**Waxaa haboon mar walba in ganacsaduhu uu isticmaalo adeega shrikadaha xisaabaadka sameeya ama xisaabiye, si ganacsaduhu uu waqtigiisa ugu isticmaalo dakhli u raadinta shirkada**

## Xisaabaadka socda

Xisaabaadka socda oo la maareeyo inta aan lagaarin xilliga xisaab xirku, waxay ku salaysanyihiin rasiidyo. Rasiidyadu waa biilka ladalacay, biilka wax lagu soo iibsaday, mushaarka la bixiye iyo lacagaha koontada laga bixiyey. Qofka xirfadiisa ku shaqaysta wuxuu sameyn karaa xisaabaadka fudud, haddii uu sidaas rabo. Xisaabaadka fudud macnahooda guud waa qoritaanka dakhliga iyo kharashka shirkada oo keliya. Kuwa kale ee aan ahayn qofka xirfadiisa ku shaqaysta waa inay sameeyaan xisaabaadka laba jibaaran. Xisaabaadka laba jibaaran macnahoodu waa, in rasiid walba lagu calaamadeeyo laba akoon, ama debet (akoonka wax kabexee iyo kredit (akoonka wax soo galeen).

Sanadihii ugu dambeeyey habka maamulka dhaqaaluhu wuxuu inta badan isku bedelay electronic ahaan, warqadana waxaa la isticmaalaa intii hore in ka yar. Biilasha waxaan ku diri karnaa kuna heli karnaa hab elektronic ah, ama waxaa wax lagu bixiyaa isla markaasna wax koontada ku soogalaan hab elektronic ah.

## Xilliga xisaab xirka

Waqtiga xisaab xirka shirkaduhu sida caadiga ah waa kalandarka sannadka 12 bilood, sannadka ugu horeeya waqtiga xisaab xirku wuu ka dheeraan karaa 12 bilood, si kastaba ha ahaatee kama dheeraan karo 18 bilood. Sidoo kale sannadka ugu horeeya waqtiga xisaab xirka shirkadu wuu ka gaabnaan karaa kalandarka sannadka 12 bilood. Waqtiga xisaab xirka shirkadu sidoo kale wuxuu noqon kaaa mid aan waafaqsanayn kalandarka sannadka (tusaale 1.4.-31.3). Si kastaba ha ahaatee qofka xirfadiisa ku ganacsada mar walba waqtiga xisaab xirkiisu waa kalandaka sannadka (1.1.-31.12.), haddii qofka xirfadiisa ku ganacsada uu sameeyo xisaab xirka fudud. Ku shaqaysiga xirfadu sida badan waa qaab yar oo ganacsi ah, kaas oo ku salaysan ganacsadaha aqoontiisa xirfadeed, bilaabideeduna aysan u baahnayn maalgelin saas u weyn.

## Xafiisyada adeegayada xisaabaadka sameeya

Waxaa haboon mar walba in ganacsaduhu uu isticmaalo adeega shirkadaha xisaabaadka sameeya ama xisaabiye, si ganacsaduhu uu waqtigiisa ugu isticmaalo dakhli u raadinta shirkada. Inta badan xaafiisyada xisaabaadku waxay khuburo ku yihiin habka xisaabaadka ee sharcigu nafarayo, canshuuraha qiimaha la socda iyo canshuuraha shirkadaha. Sidoo kale haddii loo baahdo xafiisyada xisaabaadku wxay samayn karaan mushaar bixinta iyo xisaab xirka mushaaraadka. Waxaa sidoo kale shirkadaha yar yar waxaa muhiim u ah waaya aragnimada qorshaynta dakhliga qansandda shirkada

soo galaya iyo kan ka baxaya. Markii aad dooranaysid xafiiska xisaabaadka sameeya waa inaad ku baraarugtaa dhammaan arimahaas oo dhan. Wixii macluumaad dheeri ah ka fiiri (**www.taloushallintoliitto.fi** > Tilitoimiston asiakas (Macaamiisha xafiisyada xisaabaadka) > Ostajan opas (Hagaha iibsadaha)).

## Xisaab xir

Markii xilliga xisaabaadku uu dhamaado, waxaa la sameeyaa xisaab xir iyo warbixin hawleedka sannadka. Shirkadaha yar yar xisaab xirkoodu wuxuu ka kooban yahay, xisaabinta dakhiga sannadka, raasumaalka iyo macluumaadka ku lifaaqan xisaab xirka. Arimahaan oo dhan waxay dhawrayaan shuruucda xisaabaadka, wareegtooyinka xisaabaadka iyo wax yaabaha ay farayaan qawaaniinta ay degsadeeen shirkaduhu. Warbixinta xisaabxirka uu hanti dhawrku sameeeyo waaxaa ogolaada sixiixana gudiga maamulka ee shirkada saamileyda ah ama iskaashatada, sidoo kale shirkada maalgelinteedu ay dadka ka dhaxayso laakiin masuuliyada qaar leeyahay ama shakhsiga magaciisa ku ganacsada ayaa iyaguna ogolaada xisaabxirka isla markaasna sixiixa warbixinta hawla sanadeedka. Haddii shirkadu leeaday hantidhawr, wuxuu hubinayaa in xisaabaadka iyo shaqada maamulka shirkada, wuxuuna warbixin ka qorayaa xisaabaadka uu baaray waxa uu ku arkay iyo in masuuliyiintu si sharciga waafaqsan ay wax u maamuleen iyo in kale.

Shirkada saamileyda ah, dadka saamileyada ku leh ayaa kulanka guud ee saamileydu yeeshaan ku ogolaada oo sixiisa xisaabxirka iyo warbixinta hawleedka uu qoray hantidhawrku ama waxay ku ogolaadaan dukuminti qoraal ah ayadoo aan shir guud la qaban. Iskaashatada waxaa ogolaada xisaabxirka iyo warbixinta hawlaha iskaashatada xubnaha iskaashada, waxayna ku ogolaadaan shirweynaha iskaashatada ama warqad oraal ah ayagoon shir isugu imaan. Shirkaada shakhsiyaadku leeyihiin uma baahna inay shir qabtaan, sababtoo ah xisaabxirka waxaa sixiixa canacsatada masuuliyadu saaran tahay ee shirkada wax ku leh. Taass waxaa lamida shirkada shakhsiga magaciisa ku shaqaysta.
Hantidhawrid

Waajibaadka hantidhawridu wuxuu taabanayaa shirkada furan, shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyadu ay hal qof saaran tahay, shirkada saamileyda ah iyo iskaashatada. Ganacsatada magacood ku shaqaysta iyo kuwa xirfadooda ku ganacsada uma baahna inay doortaan wax hantidhawr ah.

Sida uu qaabo sharciga hanti dhawrku, doorashada hantidhawrka waa la iska dhaafi karaa, haddii shirkada yar xisaabxirkeeda sannadka dhamaaday iyo sannadkii ka horeeyey laga helo xisaab xirkeeda ugu badnaan midka ka mid ah shuruudaha soo socda:

1) xisaabta habtida iyo deynmaha shirkadu ay dhaafto 100 000 euro
2) badeecadaha ay shirkadu sannadkii ama ama dakhliga la mid ahi uu dhaafo 200 000 euro ama
3) isku celceliska shaqaalahadu ay ka badan yihiin sadex qof.

Taas macnaheedu waa hantidhawrku waa ku qasan shirkadaha iyo iskaashatooyinka dhaafay xadka aan kor ku soo sheegnay.

Xeerarka shirkadaha la aasaasayo iyo qawaaniinta ama heshiiska shirkada waxaa lagu dari karaa qaraar taabanaya hantidhawrka, in kastoo sharcigu uusan sidaas dalbanayn. Haddii aan la dooneyn in la doorto wax hantidhawrka ah, looma baahna in la qaato shuruurdaha hantidhawrka taabanaya.

Haddii hanti dhawrka la doorto ayadoo sharciga la cuskanayo ama loo doorto si mutadawacnimo ah, waa in la doorto hanti dhawr la idmay ama hantidhawr ah KHT- ama HTM- ama shirkad la idmay oo ah KHT- ama HTM.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaad ka helaysaa bogga internetka ee **www.tem.fi/tilintarkastus.**

**Qofka xirfadiisa ku ganacsada:**

**1) Haddii uu samaynayo xisaabaadka fudud (kala jarida dakhliga iyo kharashka): xilliga xiaab xirku waa inuu ahaadaa ama waa faqsanaadaa kalandarka sannadka**

**2) haddii uu samaynayo xisaabaadka laba jibaaran: Waqtiga xisaab xirkiisu noqon karaa mid aan ahayn kalandarka sannadka.**

**Qofka ganacsadaha ah:**

**Waa inuu sameeeyo xisaabaadka laba jibaaran: waqtiga xisaab xirku wuxuu ahaan karaa mid aan ahayn kalandarka sannadka.**

**Tussaale: waqtigu wuxuu bilaabanayaa bisha May bilowgeeda wuxuuna dhamaanayaa bisha Febaraayo dhamaadkeeda.**

# Canshuurta dakhliga iyo canshuurta qiimaha alaabta la socota

Shirkadu waxay bixinaysaa canshuuraha dakhliga ayadoo la cuskanayo lacagta canshuurta mudan ee shirkada soo gashay. Canshuurta dakhliga waxaa loo dhiibaa si qadimaadka ah ama haddii loo baahdo canshuur haraadi ahaaneed iyo buuxinta canshuurtii qadimaada ahayd ee horey loo sii dhiibey. Canshuuraha dakhliga waxaa saamayn ku yeelanaya hadba nooca shirkadu tahay.

Canshuuraha qiimaha la socda waxaa sida badan la bixyaa bil walaba ayadoo la eegayo hadba waxay shirkadu iibisey iyo waxa ay soo iibsatay. Nooca shirkadu waxa saameyn ah kuma yeelanayso canshuurta qiimaha la socoda.

Habka canshuuraha dakhliga ganacsaduhu wuxuu yeelan karaa dakhli xagga shaqada ah iyo dhakhli xagga raasumaalka ah.

Dakhliga raasumaalku waa dakhliyada ka yimaada iibka hantida, kirada ama dakhiga faaiidada ka soo baxa. Dakhliyadaas waxaa tusaale ahaan ka mida dakhliga dulsaarka, dakhliga kirada, faa'iidada alaabta la sii iibiyo iyo qismiga laga helo saamiyada kuugu jira shirkada saamileyda ah ee suuqa kala iibsiga saamiyada ka diiwaangashan. Sidoo kale waxaa dakhli raasumaal ah qayb ka mida dakhliga soo gala ganacsatada magacooda ama xirfadooda ku ganacsata, shirkada furan iyo shirkada maalgelinteedu ay dadka ka dhaxayso laakiin masuuliyada ay leeyihiin shakhsiyaadka gaarka ah qismiga ku soo aada dadka shirkada wax ka leh iyo sidoo kale qismiga saamileyda ay u qaybiso shirkadaha saamileyda ah ee caadiga ah ee aan ka diiwaangashanayn suuqa lagu kala iibsado saamiyada shirkadaha. Hantida shirkadu waxay ku xirantahay inta ay dhantahay hantida la qaybinayo. Canshuurta dakhliga raasumaalku mar walba waa 28 %.

Dakhliyada shaqada lagu kasbaday waxaa ka mid ah, mushaarka, lacagaha hawlgabka, gunada (tusaale gunooyinka caadiga ah, sida guryaha shirkadu dadka siiso) iyo magdhawga (tusaale lacagta shaqo la'aanta). Canshuurta dakhliga la kasbaday waa mid sii kororta hadba markii dakhligu uu kordho. Si kale haddii aan u dhahno dadka daliga badan soo galo canshuurta boqolkiiba laga qaado way ka badan yahay boqlkiiba inta laga qaado dadka dakhliga yar. Cannshuurta laga jaro dakhliga kasbashadu waxay ka koobantahay, canshuurta dowlada, canshuurta degmada iyo haddii ay suurtogal tahay canshuurta kaniisada. Cadada canshuurta degmeda iyo tan kaniisadu waxay ku xiranyihiin hadba degmada ay qofku degentahay iyo kaniisada ay ka tirsan tahay. Sidoo kale waxaa canshuurta dakhliga la kasbaday lala bixiyaa caymiska hawlgabka YEL ee ganacsadaha kaasoo ku xiran hadba dakhliga ganacsadaha, lacagta daryeelka jirada 1,19 %, iyo lacagta gunada maalintiiba 0,92 %. (sannadka 2011)


## Canshuurta dakhliga ee noocyada kala duwan ee shirkadaha

### Qofka magaciisa ku ganacsada (toiminimi)

Shakhsiga gaarka ah ee magaciisa ku ganacsada dalhkiga uu shirkadiisa ka helo waxaa loo canshuurayaa dakhligiisa oo kale. Qayb ka mida dakhliga shirkadu waa dakhli raasumaal qaybyta kalena waa dakli la kasbaday oo mushaar ahaan u soo galay ganacsadaha. Dahliga shirkada waxaa loo qaybiyaa dakhli raasumaal iyo dakhli mushaar ah ayadoo la eegayo hantida saafiga ah ee shirkada (hanti saafi ah= hantida shirkada-deymaha shirkada). Dakhliga raasumaalka waa wuxuu 20 % ka yahay hantida saafiga ah ee ka soo baxda xisaabxirkii sannadkii la soo dhaafay, hantida saafiga ah inteeda kalena waxaa lagu xisaabinayaa dakhli la kasbaday. Ganacsaduhu wuxuu dooran karaa, in dakhliga raasumaalku oo ka noqdo hantida saafiga ah 10% oo keliya ama dhamaan dakhliga shirkada in loo arko dakhli kasbasho ah. Sannadka hawlaha ganacsiga ugu horeeya qaybta dalhliga raasumaalka wxaa laga xisaabiyaa hantida saafiga ah ee ka soo baxda dhamaadka sannad xisaabeedka ugu horeeya.

Haddii lamaaneyaashu ay kawada shaqeeyaan shirkada, dakhliga shirkada waxaa loo qaybiyaa labada lamaane (ninka iyo xaaskiisa) Qaybta dakhliga kasbashada ee shirkada waxaa lamaanayaasha loogu qaybiyaa hadba shaqada ay qabteen sida ay u kala badnayd, qaybta dakhliga raasumaalka ahna waxaa loogu kala qaybinayaa hadba sida ay u kala leeyihiin hantida saafiga ah.

Shirkada qaybteeda dakhiga raasumaalka ah waxaa la canshuurayaa 28 %. Qismiga dakhliga shaqada lagu



kasbaday ama mushaarka waxaa lagu darayaa ganacsadaha dakhliyadiisa kale ee uu shaqaystay, markaasna canshuurta dakhligiisa oo dhan wuxuu ka bixinayaa canshuur progresiiv ah ama boqolkiiba kordheysa markii dakhligu uu sii kordho, taas oo canshuur la kala qaanadeyeey ama la kala darajeeyey.

Shirkada furan iyo shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyad ay leeyihiin dadka gaar ah

Shirkada furan iyo shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyada ay leeyihiin dadka gaarka ah, si gooni ah xil ugama saarna canshuuraha dakhliga. Waxay samaynayaa ogeysiiska canshuurahooda, taas oo laga xisaabinayo dakhliga la canshuurayo ee shirakada (dakhliga ay tahay in canshuur laga bixiyo). Dakhligaan waxaa dakhli ahaan loo qaybinyaa dadka shirkada wax ku leh, taas oo dadka shrkada wax ku leh ay canshuur ka bixinayaan. Dadka shirkada waxa ka leh lagama canshuurayo lacagaha ay sida gaarka ah ugala baxeen koontada ama sida xisaabaadkooda ku qoran loogu xisaabiyey qismi ahaan.

Qayb ka mid ah qismiga dakhliga ah ee dadka shirkada wax ka leh ku soo aadana waa dakhli raasumaal ah qaybna waa dhakhli shaqo lagu kasbaday. Qaybta dakhliga waxaa loo qaybinayaa qayb shaqo lagu kasbaday iyo mid raasumaal ah oo ka timid hantidii saafida ahayd ee sannadkii la soo dhaafay, waxaana la canshuurayaa ayadoo la cuskanayo hadba qaybta milkiileyaasha shirkadu ay ka helaan hantida saafiga ah.

Qismiga dakhliga raasumaalka waxaa la canshuurayaa 28 %. Qismiga dakhliga shaqada lagu kasbaday ama mushaarka waxaa lagu darayaa milkiileyaasha shirkada dakhliyadooda kale ee ay shaqaysteen, markaasna canshuuraha dakhligooda oo dhan ayey ka bixinayaan canshuur progresiiv ah ama boqolkiiba kordheysa markii dakhligu uu sii kordho taaso darajooyin loo kala qaybiyey (tusaale 5000-7000 25, 7500-9000 30 % iwl).


Qofka aan codka lahay oo ka tirsan shirkad maalgelinteedu dad ka dhaxayso laakiin masuuliyada ay leeyihiin dadka gaarka ah, sida badan wuxuu shirkada dulsaar ahaan uga qaataa qismada raasumaalkii uu shirkada ku maalgeliyey. Dakhligaan wuxuu qofka aan codka lahayn u noqonayaa dakhli raasumaal oo la canshuurayo 28 %.

## Shirkad saamiley ah

Shirkada saamileyda ah waxay si madax banaan masuul uga tahay bixinta canshuuraha. Tan macnaheedu waa, in dakhliga shirkada saamileyda ah loo canshuuraayo sida dakhli ay shirkadu iska leedahay, shirkada dakhligeeduna wax saameyn ah kuma yeelanayo canshuuraha laga qaadayo shakhsiyaadka shirkada saamiga ku leh. Waqtigan hadda la joogo shirkadda saamileyda ah waxay dakhligeeda ka dhiibtaa canshuur gaaareysa 26 %.

Dadka saamiyada ku leh shirkada saamileyda ah waxay shirkada ka qaadan karaan lacag ayagoo u qaanadanaya mushaar ahaan ama faa'ido saameyeed ahaan (osinko). Sidoo kale shirkada waxay siin kartaa deyn dadka saamiyada ku leh, laakiin deynta waxaa qofka shirkada saamiga ku leh loogu xisaabiyaa dakhli raasumaal, haddii aan dib la isaga bixin ugu dambayn sannadka dhamaadkiisa. Shirkada saamileyda ah suurtogal maaha in lacaga aan la canshuureyn koontada lagala baxo.

Shirkadu waxay saamileydeeda faaiidada ugu qaybin kartaa faa'iido saamiyeed ahaan. Canshuuraha faa'iidada saamiyadu, waxay ku xirantahay, intee in le'eg oo faa'iido saami ah ay shirkadu qaybinaysaa iyo inta uu legyahay qiimaha maadiga ah ee saamiga shirkadu. Qiimaha maadiga ah saamiga shirkada waxaa laga xisaabaa hantida saafiga ah



ee shirkada. Haddii shirkadu ay faa'iido ahaan u qaybiso wax ka yar 9 % qiimaha maadiga ah ee saamiga, saamiluhu wuxuu faa'iido saami (osinko) oo bilaa canshuur ah u helikaraa ilaa 90 000 oo euro. Waxa dhaafsan 90 00 oo euro 70 % waa dakhli raasumaal ah oo la canshuurayo, inta kale 30 % waa dakhli bilaa canshuur canshuur ah.  Haddii shirkadu ay qaybinayso faa'iido saami oo 9 % ka badan qiimaha maadiga ah ee saamiga, wixii ka badan 9 % oo faa-iiada ah 70 % waa dakhli lagu kasbaday shaqo, inta soo hartay 30 % waa dakhli bilaa canshuur ah..

## Diiwaanka canshuurta qadimaada ah

Shakhsiga ama shirkada, ganacsiga samaynaysa waxaa laga diiwaangeliyaa diiwaanka canshuurta qadimaada ah ee maamulka canshuuraha. Diiwaanka canshuurta qadimaada ah waxaa la geli karaa, haddii shirkada, ama qofka shirkada masuulka ka ah aan lagu lahayn canshuuro uu dayacay bixintooda.

Markii qofka ganacsadaha ah lagu qoro diiwaanka canshuurta qadimaada ah, qofka uu shaqaada u qabanayo uma baahna inuu wax canshuur ah ka gooyo lacagta uu siinaayo qofkaan diiwaanka ku jira canshuurta qadimaada ku jira. Ku qoritaanka diiwaanka canshuuraha qadimaadu wuxuu sidoo kale saamayn ku yeelanayaa canshuuraha dhaqaalaha guriga laga dhimayo, kuwaas oo la siinayo ganacsadaha macaamiishiisa. Dhimista canshuurta dhaqaalaha guriya waxaa xaq loo yeelan karaa haddii oo kaliya, shirkada lacagta shaqada la siinayo ay ku jirto diiwaan canshuuraha qadimaada ah. Ku jiritaanka diiwaanka canshuurta qadimaada ah waxaa laga hubin karaa si lacag la'aanta ah adeegga macluumaadka ee YTJ **(www.ytj.fi)** ama baraha uu ku yaal maamulka canshuuruhu.

Ganacsadaha lagu daray diiwaanka canshuuraha qadimaada ah asaga ayaa ka taxadaraya bixinta canshuurihiisa sida badan asoo bil walba qadimaaya canshuuraha. Diiwaanka canshuuraha qadimaadka waxaa la isku qoraa isla marka la samaynyo ogeysiiska bilaabida ganacsiga, kaas oo sidoo kale lagu calaamadeeyo qiyaasta lacagta ay shirkadu gadi karto iyo dakhliga la canshuuri karo oo soo galaya shirkada sannadka ugu horeeya. Xafiika canshuuraha ayaa shirkada u qoondeynaya canshuurta horumariska ah xafiiskoo raacaya qiyaastii ay samaysay shirkadu markii ay diiwaanka lagu calaamadeynaayey wuxuuna xaafiiska canshuuruhu shirkada u soo diraayaa tigidka canshuurta qadimaada ah iyo foomaka lagu bixiyo canshuuraha qadimaada ah.

Haddii ay kala badnaadaan qiyaastii la sameeyey iyo natiijada ka soo baxday iibka shirkada, ganacsaduhu wuxuu codsankaraa in labadalo qiyaastii hore ama in gebi ahaanba la baabi'iyo horumarinta canshuurta. Haddii natiijada dhamaadka sannadku ay sheegto, in canshuurta qadimaada ah laga bixiyey wax yar, canshuuraha waxaa lagu buuxin karaa ayadoo la bixiyo caanshuur qadimaad ah oo lagu buuxinayo canshuurta dhimman. Canshuuraha qadimaada ah, iyo buuxinta canshuurta qadimaada ah waxaa la sameeyaa oo la xasuustaa dhamaadka sannad xisaabeedka canshuurtiisa marka la samaynayo.

Xafiiska canshuuraha ayaa shirkada ka saari kara diiwaanka canshuuraha qadimaada ah, haddii shirkadu ay ka taxadari weydo bixinta canshuuraha, waajibaadka xisaabaadka ama ay ka soo bixiweydo waajibaadyo kale oo la xiriira canshuuraha.

## Koontada

Sannadka 2010 bilowgiisii waxaa la dhaqan geliyey isticmaalka koonto canshuureed. Dhamaan canshuuraha aad adigu si iskaa ah u bixineysid (ama canshuuraha uu ganacsadu ka daxadarayo bixintooda) marka laga reebo canshuurta wareejinta hantida waxaa lagu ogeysiinayaa canshuurta xilliga ogeysiiskeeda. Canshuuraha aad adigu iska xilsaareysid bixintooda waxaa ka mid ah, canshuurta qiimaha la socota, tan mushaarka laga jaro iyo lacagta badbaadaba bulshada loo jaro.

Waxaa la siyaa ogeysiiska canshuurta xilliga, canshuuraha qofku iskii u bixiyada waxaa la bixiyaaa bishiiba hal mar. Si kastaba ha ahaatee shirkada yar waxay dooran kartaa ogeysiis kala dheer dheer iyo jadwalka canshuur bixinta, haddii ay markii hore si fiican uga taxadari jirtay ogesiinta canshuura iyo bixintoodaba.

Haddii shiradu lacagaha ay gado sannadka kalandarka dhan ay yihiin ugu badnaan 50 000 euro, canshuurta qiimaha la socota, canshuurta mushaarka laga jaro,lacagta badbaada bulshada ee shaqabixiyaha iyo canshuurta ilaha dhaqaalaha waxaa la ogeysiin karaa lana bixin karaan sannadkiiba afar mar ama sadexdii biloodba hal mar.

Haddii shirkadu lacagaha ay gado ay ugu badnaan yihiin 25 000 oo euro, canshuurta qiimaha la socota waxaa ogeysiin kartaa isla markaasna bixin kartaa sannadka kale darkaba hal mat ama sannadkiiba hal mar. Kuwa wax soo saarka hore iyo farshaxamiisteyaasha sawiradu waxay bixin karaan canshuurta qiimaha la socota sannadkiiba ahal mar, taas oo aan ku xirneyn lacagta iibka ee soo gasha shirkada sannadkii.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa **www.vero.fi/verotiliohjeet.**

## Canshuurta qiimaha la socota

Canshuurta qiimaha la socota waa canshuur sida badeecadihii oo isticmaalo, taas ganacsaduhu ku daro qiimaha alaabta ama adeegga uu iibinayo. Ujeedadu waa, in qofka alaabada isticmaalaya uu bixiyo canshuurta maadaama ay la socoto qiimaha alaabadii uu iibsanayey. Ganacsiga ka dhexeeya ganacsatada, ganacsadaha iibsada alaabta ama adeegga wuxuu iska jari karaa canshuurta qiimaha la socota ee ganacsadaha kale oo waajibaadka canshuuraha leh uu asaga ku soo dalacay, sidaas ayaa la samayn karaa haddii, sheyga loo adeegsanayo ganacsi leh canshuurta qiimaha la socota.

Waajibka canshuurta qiimaha la socota waxay saaran tahay dhamaan dadka ganacsi ahaan u iibiya badeecooyinka ama adeegyada. Iibinta adeegyada tusaale ahaan waxaa ka mid ah adeega maqaayadaha,talo siinta iyo adeega alaab qaadida.

Alaabooyinka iyo adeegyada intooda badan acanshuurtooda qiimaha la socota sannadka 2010 waa 23 %, raashinka, cuntooyinka xoolaha la siiyo canshuurta

qiimah la socota waxaa laga bixiyaa 13 %. Makhaayadaha iyo adeegayada cuntada lacagtooda canshuurta qiimaha la socota sidoo kale waqtigaan xaadirka ah awaa 13 %, laakiin cabitaanada khamriga ah iyo waxyaabaha tubaakada laga sameeyey iibkooda ama u adeegidoodu sida caadiga ah waa 23 %, buugaagta, daawooyinka, adeegyada isboortiga, shimooyinka iyo qaaditaanka dadka, adeegyada jiifka hteelada, xafladaha dhaqanka iyo madadaalada iyo ogolaanshaha ruqsada telefishinka canshuurta qiimahooda la socota waa 9 %. Adeegyada timojarka, dayactirka yar yar iyo shaqooyinka wax kabadelida waxaa loo sameeyey canshuur dhimis, canshuurta qiimaha la socota oo ay bixinayaana waa 9 %, canshuur dhimistaan waxaa la sii wadayaa ilaa dhamaadka sannadka 2011. Dayactirada yar yar waxaa ka mid ah adeegyada dayactirka baaskiilada, kabaha iyo alaabooyinka maqaarka ka samaysan iyo sidoo kale harqaamida dharka caadiga ah iyo adeegga tolmada go,yaasha sariiraha iyo daahyada.

Ganacsadaha ayaa dowlada u shubaya canshuurta qiimaha la socota, canshuurtaas oo ka aruuryey alaabada uu iibinayey. Sida badan iibinta alaabada iyo adeegyaduba wxay leeyihiin canshuurta qiimaha alaabda la socota. Qaybaha ganacsi ee aysan khuseyn canshuurta qiimaha alaabada iyo adeegga la socota sharciga ayaa si gaar ah loogu xusaa. Kuwaas waxaa tusaale ahaan ka mida iibinta dhimeyaasha iyo guryaha saamileyda ah, adeegyada caafimaadka iyo daryeelka dadka jiran iyo adeegyada daryeelka bulshada. Haddii shirkadu iibiso alaabooyin ama adeegyo aan laga bixineyn wax canshuurta qiimaha la socota ah, markaas shirkada xil kama saarna bixinta canshuurta qiimaha la socda.

Haddii shirkada iibkedu uu ka yaraado 8 500 dhamaadka sannadka, looma baahna in shirkadu ay isku diiwaangeliso masuuliyada bixinta ama canshuurta qiimaha la socota. Ganacsaduhu waa inuu ahaado mid xaqiiqada u dhaw markii uu qiyaasayo cadadka lacagta ay shirkadu gadi karo sannadkii. Haddii la dhaafo xadka 8 500 ah, si kasta uu ganacsaduhu u qiyaasay in lacagta la gadi karo sannadkii ay intaas ka yar tahay, waa in dib

| Bil | Canshuurtu ku jirto | Canshuur la'aan ah | Alv 23 % |
|---|---|---|---|
| Alaabta la gaday | 6 150 | 5 000 | 1 150 |
| Alaabta la soo iibsaday | 1 845 | 1 500 | 345 |
| Canshuurta dawlada loo shubayo | | | **805 e** |

loo bixiyo canshuurta la socota qiimaha laga soo bilaabo sannad xisaabeedka bilowgiisa. Intaas waxaa dheer bixinta kharashaadka la soo daahida bixinta canshuurta. Ganacsaduhu wuxuu isku diiwaangelin karaa masuulida bixinta canshuurta qiimaha lasocota, lacagta uu iibiyo sannadka xisaabeedku si kastaba ha uga yaraatee 8 500 oo euro.

Bixinta canshuurta qiimaha la socota waxaa laga heli karaa dabcinta xadka ugu hooseeya, haddii saanad xisaabeedka shirkadu uu ka hooseeyo 22 500 euro. Markii shirkadu lacagta ay iibisey sannad xisaabeedku uu noqdo ugu badnaan 8 500 oo euro, shirkadu waxay canshuur dabcin/celin ka helaysaa dhamaan canshuurihii ay bixisay sannad xisaabeedkii oo dhan. Haddii lacagta shirkadu gaday sannad xisaabeedka ay tahay ugu yaraan 8 500 oo euro, laakiin ay ka yartahay 22 500 oo euro, dabcinta waxaa loo xisaabinyaa sidaan soo socota:

$$\text{canshuur} - \frac{(\text{lacagaha la gaday} - 8\,500) \times \text{canshuur}}{14\,000}$$

**Tusaale:** lacagta la gaday waa EUR 19 000 iyo canshuurta qiimaha la socota, oo ay tahay in la bixiyo, EUR 3 426.

Dabcinta waxaa loo xisaabinayaa (19 000 - 8 500) x 3 426) : 14 000 = 2 569,50 euro, tan waxaa laga jarajaa canshuurta. Cadada canshuurta la dhaafay waa EUR 856,50.

Haddii ganacsade uu saaran yahay waajibka bixinta canshuurta qiimaha la socota uu alaab ama adeeg ka soo iibsado ganacsade kale oo isna waajibka canshuuruhu saaran yahay, alaabta iyo adeegana ay qiimahada la socoto canshuurta qiimaha la socota, canshuurta la socota alaabada iyo adeega uu soo iibsaday wuxuu ka jari karaa canshuurta uu dawlada u shubayo. Sidaas waxaa la samayn karaa, haddii alaabada iyo adeega loo isticmaalayo hawlaha ganacsiga.

Markaas alaabta la soo iibsaday waa inay lahaataa biil ama rasiid, uu ka muuqanayo cadada canshuurta la socota qiimaha alaabta.



# Caymis

Ka hor inta aadan bilaabin aasaasida gancsiga waxaa muhiim ah inaad si taxadar leh u ogaatid, caymisyo noocee ah ayey ganacsadaha iyo shirkadu u baahan yihiin. Waxaa haboon in ganacsadaha iyo shirkada caymisku ay si wadajir ah u wada qiimeeyaan khataraha la xiriira ganacsiga bilowga ah iyo sida loo yarayn karo khatarahaas ayadoo la isticmaalayo caymiska.

Caymiska keliya ee ganacsaha qasabka ku ahi waa caymiskiisa hawlgabka, caymiska-YEL, haddii dakhliga shaqada ee ganacsaduhu ay dhaafo 6 896,69 oo euro sannadkii (sannadka 2011) hawlaha ganacsiguna ay socdeen mudo afar bilood ah.




## Caymisyada mutadawacnimada ah ama aan qasabka ahayn waxaa ka mid ah

### Caymiska shilalka shaqada ee ganacsadu iskiis u galo

- wuxuu daboolayaa xitaa shilalka waqtiyada firaaqada ah
- shirkadana waa u kharash ay ka jari karto lacagaha la canshuurayo

### Caymiska ganacsi istaajinta

- u jeedadiisuna waa in la xaqiijiyo in lahelo dakhligii lagu weyn lahaa haddii ganagsigu uu mudo istaago arin dhacady awgeed

### Caymiska masuuliyada

- wuxuu shuudo cayiman magdhaw uga bixinayaa qasaarooyinka dadka kale loo geysto iyo weliba baaritaanka waxyeelooyinka iyo kharashaadka maxkamada haddii maxkamadi timaado

- inta badan kan shaqada dalbanaya tusaale ahaan dhismaha iyo nadaafadu waxay dalbadaan caymiska masuuliyad qaadka.

### Caymiska badbaada sharciga

- wuxuu daboolayaa kharashaadka abuukaataha iyo maxkamada, kuwaas oo ka imaan kara tusaale ahaan
- diritaanka alabooyinka, heshiiska iibka ama heshiis qandaraas
- dacwo maxkamadeed oo la xiriirta deyn ama lacag kaa maqan
- shaqaale cayrin ama is maandhaaf xagga mushaarka ah
- arimo la xiriira hewshiiska kirada


Waxaa kaloo wanaagsan in caymiska la geliyo hantida iyo goobta ganacsiga, si looga gaashaanto, tuugada, jabsiga, dabka iyo waxyeelada biyaha. Ka dalbo qiimo gaarid shirkadaha kala duwan ee caymiska, si fiican u fiir qiimeyaasha shirkadaha caymiska markaas kadibna go'aan kama dambays ah ka samee caymisyada aad qaadaneysid.

# Caymiska hawlgabka ganacsadaha (YEL) – caymiska hawlgabka iskiis-u-shaqeystaha (self)

Caymiska keliya ee ganacsadaha qasabka ku ah, waa caymiska hawlgabka ganacsadaha ama caymiska-YEL, kaasoo laga qaato shirkadaha caymiska hawlgabka. Ayadoo la tixraacayo caymiska YRL ayaa ganacsadaha waxaa la siiyaa lacagta hawlgabka gabowga, lacagta jirada iyo hooyonimada, hooyonimada khaaska ah, lacagta aabenimada-iyo hooyonimda ama lacagta baxnaaninta. Cadada lacagta la bixinayo ee YEL wxay ku xiran tahay dakhliga shaqada ee ganacsadaha. Dakhliga shaqada ee YEL waa inuu dhigmo mushaarka la siin lahaa qof kale oo xirfadle ah oo qabanaya shaqadaan shaqo u dhiganta. Sidoo kale lacagta xubinimada ganacsadaha ee qasnada shaqo la'aantu ay bixiso iyo lacagta suurtogalka ah ee nolomaalmeedka ee mushaarkii shaqada ku xiran waxaa lagu bixinayaa oo ay ku salaysanyihiin caymiska -YELka Caymiska YELku wuxuu saameyn ku yeelanayaa sidoo kale badbaadada hawlgabka qoyska, kaas oo qoyska lasiiya markii ganacsaduhu uu geeriyoodo kadib. Caymiska YELka waa in laga qaato shirkadaha caymiska hawlgabka markii bilaabida ganacsiga ay ka so wareegto afar bilood.

Lahaanshada shirkad ganacsi oo keliya kuma filna sababta gelitaanka caymiska hawlgabka, balse shirkadaha caymiska hawlgabku waxay wax ku xirayaan shaqo ganacsade ahaan shaqo qabasho. Sidoo kale xiriirka lahaanshada iyo noocyada kala duwan ee shirkaduhu saamayn ayey ku yeelanayaan, inuu ganacsaduhu qaadanayo caymiska YEL mise caymiska hawlgabka shaqaalaha.

- **Xayndaabka caymiska YEL:ka waxaa ku jira dadka jira da'ada u dhaxaysa 18–67-sano, kuwaas oo dalka Finland uga shaqeeya ganacsato ahaan.**
- **Hawshaganacsiga oo aan kala go lahayna ay socotey ugu yaraan afar bilood**
- **dakhliga shaqada ee la qiyaasayna uu yahay ugu yaraan 6 896,69 oo euro sannadkii (sannadka 2011)**
- **lacagta la bixinayo waxay dakhliga shaqada ka tahay 21,6 %, kuwa da'doodu ka sareyso 53-sano 22,9 %**
- **Ganacsadaha cusub wuxuu qiimo dhimis ah 25 % ka helayaa lacagta caymiska ilaa mudo ah 48 da bilood oo ugu horeysa ganacsiga.**
- **Waxaa la bixiyaa 1–2, 6 ama 12 jeer sannadkii.**



# Lacagta badbaadada shaqo la'aanta ganacsadaha

Ganacsaduhu wuxuu si iskiis ah ugu biiri karaa qasnada shaqo la'aanta ganacsatada haddii uu rabo inuu helo lacagta badbaada shaqo la'aanta ee ku xiran shaqada. Markas ganacsadaha waxaa suurtogal u ah inuu codsado guno maalmeedka shaqada ku xiran, haddii hawsha ganacsigu ay dhamaato oo ganacsaduhu noqdo shaqo la'aan. Ganacsaduhu wuxuu ku biiri karaa oo xubin ka noqon karaa qasnada shaqo la'aanta, haddii uu leeyahay dakhli shaqo ugu yaraan 8 520 oo Euro sannadkii (sannadka 2011). Si kastaba ha ahaatee heerka caymisku kama sarayn karo dakhliga shaqada ee YEL (hawlgabka ganacsadaha).

Haddii ganacsaduhu uu ka tirsan yahay qasnadashaqaalaha mushaarka qaata, markaas waxaa haboon in haddiiba markii uu ganacsiga bilaabo inuu ku biiro qasnada shaqo la'aanta ganacsatada. Gunada maalinta ganacsaduhu wuxuu qasnada shaqo la'aanta ka dalban karaa, haddii uu ganacsade ahaan ku shaqaynayey 18 bilood afartii sano ee ugu dambeysey isla markaasna uu ahaa xubin bixiya lacagta xubin nimada ee qasnada shaqo la'aanta ganacsatada. Haddii uu ganacsaduhu ka wareego qasnada shaqaalaha mushaarka qaata una wareego qasnada shaqo la'aanta ee ganacsatada, wuxuu heli karaa lacagta gunada maalinta, haddii uu ahaa ganacsade 12 bilood.

Waxaa loo arkaa inay hawlaha ganacsigu dhamaadeen markii shirkada ganacsi la geliyo xaalad musalafid ama la sii iibiyo. Sidoo kale ganacsaduhu wuxuu xaq u leeyahay lacagta gunada maalinta, haddii hawlaha ganacsigu si dhab ah oo xiriir ah u istaagnaayeen ugu yaraan mudo afar bilood ah. Ganacsiga waxaa loo arkaa in la joojiyey, markii ganacsaduhu joojiyo bixinta caymiskiisa hawlgabka, uu ogeysiiska joojinta ganacsiga u gudbiyo maamulka canshuuraha ito xafiiska diiwaangelinta, uu ka baxo goobta ganaci ee uu ku shaqaynayey, iibiyo hantidiisa gnacsiga ama uu qiimaha hantidiisa qoraal cayn ah ka siiyo qasnada shaqo la'aanta.

Go' aanka laga gaarayo, in ganacsada loo arkayo shaqo la'aan ama in hawlaha ganacsigu istaageen waxaa lagu gaaraa mar walba xafiisaka shaqada iyo xoogasashada ee magaalada uu ganacsaduhu dagan yahay, xafiiskaas oo ganacsadaha shaqo la'aanta noqday uu isaga diiwaan garaynayo shaqo la'aan shaqo doon ah.

Ka mid ahWixii macluumaad dheeraad ah ee la xiriira lacagta badbaadada shaqo la'anta kala xiriir:

**www.mol.fi**
**www.ayt.fi**
**www.syt.fi**



# Shaqaalaynta shaqaalaha

Markii ay shirkadu bilowdo inay si joogto ah mushaar u bixiso. Waa inay ogeysiis geysaa xafiiska canshuuraha si ay u gasho diiwaanka shaqobixiyaha, ogeysiiska waxaa lagu sameeyaa foomka lagu ogeysiiyo aasaasida ganacsiga ama foomka lagu ogeysiiyo waxyaabaha is badala, haddii shirkadu leedahay lambarada aqoonsiga ganacsiga (Y-tunnus). Markii shirkada lagu calaamadeeyo diiwaanka shaqo-bixiyaha, xafiiska canshuuruhu wuxuu u soo dirayaa hagitaanada koontada canshuurta, si loo bixiyo canshuurta mushaarka laga jaro iyo lacagta badbaada bulshada iyo isdiiwaangelinta darteed.

Shaqo bixiya si joogto dad u shaqaaleeya (shaqobixiye heshiis wax ku shaqaaleysiiya), wuxuu shaqaalihiisa u samaynayaa badbaadada hawlgabka, asagoo isticmaalaya caymisyo kala duwan. Waa in la qaato caymiska hawlgabka mushaar bixinta bisha ku sii xigta inta lagu jiro, Shirkadu waa shaqobixiye ku meel gaar ah, haddii ay mushaar ahaan u bixiso mudo lix bilood ahwax ka yar 7 518 e (sannadka 2011) , shirkada aanay ka shaqayn shaqaale joogto ah. Shaqobixiyaha ku meel gaarka ahi uma baahna inuu sameeyo sheshiis caymis oo gooni ah. Markaas wuxuu bixinayaa lacagta caymiska bisha mushaarka la bixyey bisha ku xigta 20 keeda ugu dambayn, asgoo u shubaya shirkada caymiska hawlgabka ee uu doortahay. Sidoo kale shaqobixiyaha aan joogtada ahayn wuxuu iskiis u bixinayaa canshuurta iyo lacagta badbaadada bulshada ee uu ka jaray mushaarka shaqaalihiisa, wuxuuna canshuurta u shubayaa maamulka canshuuuraha asagoo u marsiinaaya habka koontada canshuuraha.

Habka ka fudud inaad shirkada shaqaale u qaadatid, waa adigoo xooga shaqaale oo loo baahan yahay ka soo iibsada shirkad kale. Shirkada shaqaalaha kireysay ayaan bixinaysa mushaarka shaqaalaha isla markaasna shirkadaas ayaa qabanaysa dhamaan waajibaadka shaqobixiyaha saaarnaan lahaa, laakiin shirkada isticmaalaysa xooga shaqaalaha shaqadeedu waxay ku ekaanaysaa hagida iyo hogaaminta shaqaalaha. Shirkada shaqaalaha kireysa waa inay ilaaliso, shuruudata heshiisyada shaqada ee dhexeeya shaqaalaha iyo shirkada ay u shaqaynayaan. Sidoo kale shirkada shaqaaluhu u shaqaynayaan ayaa koontaleysa shaqada ay qabanayaan shaqaaluhu.

## Kharashaadka barbar socda shaqaalaha mushaaraadkooda (sannadka 2011)

- Shaqaalaha shaqada loo qaatay waa in la gelitaa caymiska hawlgabka shaqaalaha oo qasabka ah (TyEL-vakuutus), haddii mushaar ahaan loo siiyo bishii 52,49 oo Euro ama wax ka badan. Shirkada caymiska hawlgabka ayaa loo shubayaa caymiska hawlgabka shaqaalaha (TyEL-maksu), kaas oo mushaarka shaqaalaha ka ah 22,5 %. Shaqobixiyaha aan joogtada ahayn caymiska hawlgabka shaqlaalaha wuxuu ka dhiibayaa 23,0 % mushaarka. Qaybta shaqaaluhu mushaarka uga dhiibayaan caymiska hawlgabka (TyEL-maksu), kaas oo shaqabixiyuhu mashaarka ka jarayo isu geyn waa 4,7 % shaqaalaha da'doodu ka yar tahay 53-sano, kuwa buuxiyey 53-sano caymiskooda hawlgabka waxaa shaqabixiyuhu uga jarayaa 6,0 %.
- Lacagta badbaada bulshada (sotumaksu) waxay mushaarka ka tahay 2,12 %.
- Caymiska shaqala'aantu wuxuu mushaarka ka yahay 0,80 % , haddii shaqa bixiyuhu uu mushaar ahaan u bixiyo sannadkii ugu badnaan 1 879 500 oo Euro. Wixii dheeraad ka ah intaa caymiskeedu wuxuu mushaarka ka noqonayaa 3,20 %. Caymiska shaqala'aanta shaqaaluhu waa 0,60 %.
- Caymiska shilalka shaqadu wuxuu mushaarka ka yahay 0,3–8,0 % , taas oo ku xiran cadada mushaarka iyo qaybta ganacsi ee shadu tahay, isku celcelis waa 1 %.
- Caymiska wadareed ee naftu wuxuu mushaarka ka yahay isku celcelis 0,071 %.

Samaynta xisaabaadka mushaarka iyo ogeysiiska shaqobixiyaha waxaa haboon in lo xil saaro inay sameeyaan xafiiska adeega xisaabaadka qaabilsan.

Haddii ogeysiiska canshuurta xilliga cayiman la dhiibo waraaq ahaan lagu ogeysiiyo, waa inuu ogeysiisku gaaro xafiiska canshuuraha haddiiba 7 da bisha. Qofka uu saaran yahay waajibaadka bixinta canshuurta qiimaha la socota ee xusan habkan jadwalka sannadka waa inuu dhiibo ogeysiiska canshuur xiliyeedka uuna bixiyo canshuurta ugu dambeyn bisha febaraayo ee ku xigta 28 keeda.

Wixii macluumaad dheeraadka ah ee la xiriira shaqaalaynta shaqaalaha kala soco:

Ganacsatada Finland
**(www.yrittajat.fi)**

**www.tyosuojelu.fi**

Xafiisyada shaqada iyo xoogsashada, **www.mol.fi** > Työsuhdeasiat
(Arimaha xiriirka heshiiska shaqada)
Ururada shaqobixiyeyaasha
**(www.ek.fi, www.yrittajat.fi)**
Shirkadaha caymiska
**(www.tyoelake.fi)**

## Maalmaha ganacsadaha muhiimka u ah

| 12ka bisha | 20ka bisha | 23ka bisha |
|---|---|---|
| maamulka canshuuraha - ogeysii oo bixi canshuurta qiimaha la socota canshuurta mushaarka laga jaro iyo lacagta badbaadada bulshada | Shirkada caymiska - bixi lacagaha TyEL iyo YEL (lacagaha laga jabo mushaarooyinka caymisyada kale) | maamulka canshuuraha - sii canshuurta qadimaada ee ganacsiga |

# Dhaqanaka ganacsiga ee dalka Finland

Si hawlaha ganacsigu ay u guuleysataan, waxaa muhiim aah inaad taqaanid dhaqanka ganacsiga ee Finland, fikradahooda iyo habka caadooyinkooda. Markaas waxaa suurto gal kuu noqonaysa inaad macaamiisha si wanaagsan ugu adeegto sidoo kalena aad u fahamto waxa ay macaamiishu kaa sugayaan inay kaa helaan.

Finnishku waxay doonayaan inay waqtigooda si xoogle u isticmaalaan, waxay jecelyihiin inay qorsheeyaan jadwalka shaqada waxayna dhawraan ama ku dhagaan waqtiga lagu heshiiyey. Luuqada Finnishka ee qoran saacada waxaa loo isticmaalaa habka saacad sheegida ah 24 ka saac. Saacada lagu heshiiyey waxaa wanaagsan inaad weli ku hubiso tusaale ahaan e-mail.

Shaqada maalintu waxay sida caadiga ah bilaabataa qiyaastii 8 da subaxnimo waxayna dhamaataa galabtii saacadu markay tahay qiyaastii 16. Waqtiga qadadu qiyaastii waa inta u dhaaysa 11-13.

Dhammaan shaqaaluhu waa simanyihiin, ayadoon loo fiirineyn da'ada, lab ama dhedig, xirfad iyo diin toona. Dumarku waxay si sinnaan ah uga qayb qaataan nolosha shaqada iyo tan madaxtinimada. Qofka in magaciisa loogu yeero waa wax aad caadi u ah. Waxaa wanaagsan aan ilaaliso dhaqanaka hadalka ee asluubeysan xiliyada shirarka, wada sheekaysiga telefoonka iyo xaaladaha fariimaha la isku dhaafsanayo e-mailka.

Waxaa wanaagsan inaad kulanka isugu diyaarisid si taxader leh, goobta kulankana aad waqti fiican ka kahor sii joogto. Markii aad timaadid goobta wada xaajoodka, si xayi ah dadka gacanta uga salaan adigoo si toos ah wajigooda u fiirinaya, daymada indhuhu waxay xoojinaysaa sawirka kalsoonida ee ugu horeyn lagaa qaadanayo. Finnishku waxay cabaan kaffee faro badan, kafeega ayaana sida caadiga ah dadka la siiyaa marka kulamada ganacsiga ah la qabanayo. Kulanka waxaa lagu dhameeyaa salaan gacan.

Dalka Finland shirkaduhu waxay la kulmaan maamul tiro badan aad u yar (go'aamo dowladeed jiitama). Go'aamada shirkadaha haddiiba ayaa la sameeyaa, hawluhu aad ay u xoogan yihiin qorshayn tabar leh iyo diyaarinta dabadeed.

**Finnishku waxay doonayaan inay waqtigooda si xoogle u isticmaalaan,waxay jecelyihiin inay qorsheeyaan jadwalka shaqada waxayna dhawraan ama kudhagaan waqtiga lagu heshiiyey.**

Finland waxay ka mid tahay wadamada ugu musuqmaasuqa yar dunida, sidaas awgeed lama ogola in madaxda iyo dadka aad ganacsiga la wadaagto midkoona la siiyo wax hadiyado alaabeed iyo kuwo lacageed toona ah.

Si kastaba ha ahaatee waa la ogol yahay in macrifada wanaagsan la siiyo xasuus yar oo hadiyad ah tulaale ahaan kaar ama hadiyad aan qiimo lacageed oo badan lahayn tusaale ahaan xiliyada krismaska.



# Mas'uulida shirkadda ka saaran xagga bey'ada

Shirkadu marka ay dooranayso qaybta ganacsi ee ay ka shaqayneyso ayna bilaabayso hawlaheeda ganacsi waxaa wanaagsan inay horay u sii tixgeliso arrimaha bey'ada. Dhamaan qaybaha ganacsigu waxay saameyn ku yeelanayaan xaalada bey'ada, laakiin haddii la dhawrto sharciga, qawaaniinta iyo hagitaanada, markaas waxaad yareynaysaa waxyeelada soo gaareysa bey'ada. Intaas waxaa dheer tusaale ahaan la socodka isticmaalka korontada iyo kala soocida qashinka waxay badbaadinyaan kharashaadka shirkada.

Sidoo kale hawlaha ganacsiga ee masuuliyad qaadida bey'ada ku salaysan waa hab xayeesiin iyo suuqgeyn u ah shirkada waxayna saameyn ku yeelanayaan awooda tartanka ganacsiga ee shirkadaha yar yar. Waqtigaan xaadirka ah dadka alaaboyinka isticmaala aad ayey ula socdaan una qiimeeyaan shirkadaha ganacsi ee tixgeliya arimaha bey'ada ku saabasan. Go'aamada wax iibsiga ee maalin walba la gaaro waxay ahaan karaan kuwo ku salaysan qiimeyntaan bey'ada.

## Ka taxadar bey'ada

**Baar qawaaniinka bey'ada ee tabanaysa ganacsigaaga.**

Wadan ka mid ah Ururka midowga Yurub ahaan Finalad waxay leedahay qawaaniin iyo shuruuc faro badan oo taabanaya shirkadaha ganacsi iyo qaybaha kala duwan ganacsiga. Hawlaha shirkadaadu saameyn ma kuleeyihiin tusaale ahaan, in shirkada alaabta samaysa iyo shirkada wadanka keenta ay waajib ku tahay inay abaabulaan bixiyaana kharashka daryeel haraadiga alaabta, markii alaabta isticmaalka laga saaro? Wixii macluumaad dheeraad ah weydii mas'uuliyiinta arimaha bey'ada ee degmadaada iyo **www.ymparisto.fi** > Yritykset ja yhteisöt (shirkadaha iyo ururada) iyo **www.yrityssuomi.fi/ymparisto** (bey'ada).

**2) Aqoonso waxyaabaha waxyeelada u keena bey'ada.**

Baar, si loo yarayn karo waxyeelooyinkaas. Lagama maarmaan ma ahan in shirkadu ay maalgelin weyn ku sameyso arrimaha bey'ada, laakiin waxaa keliya oo lagu saameyn karaa oo ayadoo la badelo sidii hore ee aan wax u isticmaali jirney. Tusaale ahaan qalabka korontadu wuxuu isticmaalaa tamar faro badan haddii uu dabka ku jiro oo uu diyaar yahay, isticmaalka korontada ee komputerka waxaa la yareyn karaa 60% haddii la qaato isticmaalka habka beeqaaminta tamarta (Motiva). Si joogto ah u la soco isticmaalka tamarta ee shirkadaada, markaas waxaad dareemeysaa waxyaabaha ay suurtogalka tahay inay si macno daro ah u isticmaalaan korontada.

**3)Ogow wareegtooyinka la xiriira daryeelka qashinka ee magaalada aad ganacsiga ku leedahay.**

Kala soocida haraaga ka dhasha hawlaha ganacsiga iyo yareyntooduba aad ayey muhiim u yihiin. Kala soocida qashinka ee saxda ah iyo geynta haraaga la geeyo goobta qashinka mar kale ayaan isticmaalkooda ka faa'iideysan doonaa. Shirkada ka hawlgasha guryaha la degan yahay waxaa taabayana qawaaniinta kala soocida qashinka ee la mid ah kuwa taabanaya dadka sarta degan. Haddii ay shirkadu ka hawl gasho xarun ganacsi oo ayada u gooni ah ama dhisme gooni ah, waxay si madax banaani ah u sameynayaa heshiiska daryeelka qashinka.

Xalka ugu wanaagsan ee bey'adu waa iyadoo qashinka la yareeyo; Qashinka isku dhafka ah ee aan la kala soocin, waa lacag si macno daro ah qashinka loo geeyey. Wixii dib u isticmaalida haraaga ku saabsan kala xiriir bogga internetka ee **www.kierratys.info.**

**4) Sharaf bey'adda, haddii aad ka shaqeyneysid maadooyinka khatarta ah.**

Kiimikooyinka iyo maadooyinka kale ee khatarta ah waa in loo isticmaalo loona kaydiyo sida sharcigu uu dhigayo. Haraaga dhibaatada leh waa in mar walba la geeyaa meel gooni loogu aruuriyo **(www.ongelmajate.fi)**. Macluumaadka dheeraadka ah ee la xiriira kiimikada waxaad ka akhrisan kartaa bogga internetka ee cinwaankiisu yahay **www.tukes.fi.**

**5) Ka fakar bey'ada haddiiba marka aad alaabta soo iibsaneysid.**

Isticmaal calaamadaha bey'ada, kuwa meelaha dhaw lagu sameeyey, alaabooyinka ganacsiga cadaalada ah ama cuntooyinka aan maadooyinka bacriminta loo isticmaalin oo sida caadiga ah u baxay (reilun kaupan tuotteet tai luomutuotteet). Alaabta soo gado ayadoo baakad weyn ku jirta ama alaab mar labaad la isticmaalayo. Waxaad kaloo soo iibsan kartaa korontada cagaaran (bey'ada saaxibka u ah) Alaabooyinka cusub ee wax qaboojiya iyo makiinadaha dharka dhaqa way ka beeqaamin ogyihiin tamarta kuwii hore ee gaboobay. Beeqaamintu waxay dhalan kartaa haddii aad sidoo kale isticmaashid koronto yar, biyo amase saapuun ayar. Wax ka ogow calaamadaha bey'ada sida, sida calaamada shimbirta Joutsenka-, Ubaxa-, Calaamada korontada iyo calaamada Bacrin la'aanta- iyo calaamada EUda ee bacrin la'aanta-, Demeter-, Norppaenergia- iyo calaamadaha ganacsiga cadaalada ah.

# Liiska xasuus-qorka ee ganacsadaha ganacsi bilowga ah

## Dabeecadaha khaaska kuu ah adiga iyo aqoonta xirfadeed

Aqoontaada xirafadeed iyo waayo aragnimadaadu ma ku filan yihiin inaad ganacsade ahaan ku shaqaysid? Ma diirantahay, isla markaasna cadaadiska ma xamili kartaa, sidee qoyskaagu u arkaa ganacsiga?

## Fikarada ganacsi

Si taxadar leh u qorshee fikrada ganacsiga una kaasho aqoonyahano ku xeel dheer arimaha ganacsiga. Sidoo kale sii ogow inta qaybta ganacsi ee aad doonaysid inaad aasaasto ay u baahan tahay ruqso khaas ah.

## Qorshaynta hawlaha ganacsiga

Fikradaada ganacsi ka dhig qorshe ganacsi oo qoraal ah. Qorshaha ganacsi waxaad u baahanaysaa markii aad xagga deynta kala xaajooneysid maalgeliyeyaasha ganacsiga, sida deymaha bangiga iyo lacagta bilowga ganacsiga ee aad dalbanaysid ama kaalmooyinka kale ee babliga ah.

## Suuqgeyn

Alaabadaadu suuq ku filan ma leeday, sagee se suuqaas ku yaalaat? Waa sidee xaalada tartanka ganacsiga ee qaybtaan ganacsi, waase kuwama kuwa kula tartamayaa? Fikradaada ganacsi wax cusub ma soo kordhineysaa, oo matahay fikrada keliya oo hadda jirta, fikradaas oo aad kaga guuleysan kartid dhamaan ganacsatada tartanka ganacsi kugula jirta?

## Maalgelin

Lacag intee le'eg ayaad u baahan tahay si aad hawlaha ganacsiga u bilowdo? Maalgelinta helitaankeed waxaa jira dhawr wadiiqo oo loo maro, sida bangiyada, shirkada maalgelinta gaarka ah ee Finnvera iyo maalgeliyeyaal dibada ah. Xasuuso in, maalgeliyeyaaasha dibadu ay ku qancaan in fikradaadu tahay mid shaqaynaysa kahor intaysan maalgelin ku sameyn hawlaha ganacsiga.  Wadiiqooyinka maalgelinta kala sheekeyso khuburada ku xeeldheer arimahaan.

## Faa'iido lahaansho

Imisa lacag ah ayaa loo bahan yahay inay soo xarooto waqti cayiman gudihiis, sidoo kale suurtogal ma kuutahay inaad gaarto inaad iibiso cadad kugu filan oo alaabo ah? Waa maxay dakhliga ka soo xarooda alaabta la iibiyeymarka kharashka laga saaro? Waa kuwama macaamiishaadu imisa ayey le'eg yihiin? Qeex barta ugu dambeysa ee aan laga hoos mari karin haddii ganacsi miro dhal ah la samaynayo, bartaas oo dakhligu ku filan yahay haddii la bar bar dhigo kharashka.

## Nooc shirkad ganacsi oo ku haboon

Ganacsiga waxaa mar walba la xiriira khatar ganacsi. Diyaar ma u tahay inaad hantidaada u nugleysid khatarta? Ujeedada shirkadu ma inay ganacsigeeda sii balaarisaa? Shirkadu ma waxay yeelanaysaa milkiileyaal kale, maxayse yihiin waxyaabaha xiriirkiina udub dhexaadka u ah? Baar, maxay yihiin waajibaadkaagu marka loo eego noocyada ganacsiga ee kala duwan. Canshuurtu waa mida keliya iyo inta badan waxa ugu yar ee saameyn ku yeelan kara doorashada nooca shirkada ganacsi.

## Xisaabadadka

Dhamaan shirkadaha oo dhan waxaa ku waajiba inay xisaabaadka sameeyaan. Sharciga ayaa faraya in shirkaduhu xisaabaadka sameeyaan, xisaabaadka sameyntooduna waxay u baahan yihiin aqoon iyo waayo aragnimo. Adeegyada xafiisyada xisaabaadku waa lacag, laakiin haddii aad adeegga xisaabaadka xaafiisyadaas ka iibsatid, waxaad helaysaa waqti dheeraad ah oo aad hawlo kale ku qabsatid, isla markaasna waxaad heleysaa waqti aad si fiican xooga ugu saartid arimaha muhiimka ah ee la xiriira ganacsiga.

## Ku dhaganaanshada heshiisyada la galo

Heshiisyo noocee ah ayaa loo baahan yahay, heshiisyadaas kuwee ka ah lagama maarmaan? Ka hor inta aadan sixiixin heshiiska, si taxader leh uga baaraan deg oo u baar, waajibaadka aad qaadeysid iyo waxa ka imaan kara. Arimaha oo dhan mar walba ka samee heshiis qoraal ah dhammaan arimaha khuseeya ganacsigaaga!

## Caymiska iyo kaarteynta khataraha

Waa maxay khataraha ay leeyihiin hawlahaada ganacsi? Waa maxay caymisyada jira? Macaamiishaadu ma may kugu xirayaan caymis la xiriira hawlahaaga? Caymisyada qasabka ah ee sharcigu qabo marka laga reebo, waxaa haboon inaad baartid khataraha soo foodsaari kara qaybtaada ganacsi isla markaasna aad si fiican uga fakartid, maxay yihiin caymisyada iskaa ah ee ganacsigaagu ama adigu aad u baahantihiin. Tusaale ahaan caymiska shilalka shaqada sharcigu ma farayo ama ganacsadaha qasab kuma aha, laakiin waa mid aad loogu boorinayo inuu galo. Baar wadiiqooyinka kala duwan, kana codso qiimo gaarid shirkado caymis oo kala duwan.

## Shabakada caawinta ganacsadaha

Ma wanaagsana inuu ganacsaduhu keli ahaado. Saaxiimbadaa ma ku jiraan qaar ganacsato ah, kuwaas oo yaqaana dhibaatooyinka la xiriira ganacsiga? Ma taqaanaa dad aqoon durugsan u leh oo wax ka yaqaan qaybtaadaan ganacs? Qaybta ganacsi maleedahay ururo dalad guud u ah oo danaha qaybatan ganacsi difaaca?

**www.yrittajat.fi**

# 10 Tilaabo oo xagga guusha loo qaaday

**10.** Ka taxadar caafimaad qabkaaga. Ganacsade ahaan waxaad naftaada u sameysan kartaa daryeel caafimaad. Hey'adda hawlgabka qaranka (Kela) ayaa ganacsadaha magdhaw ka siinaysa kharashaadka uga baxa daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah isla markaasna macquulka ah.

**9.** Mar kasta horumari hawlaha ganacsigaaga.
Iska dhaaf alaaboyinka aan iibkoodu faaiidada kuu lahayn.
Iskuday inaad yareyso kharashaadka, isla markaasna badiso muuqaalkaaga ganacsi.

**8.** Had iyo jeer hormari hawlaha ganacsigaaga. Iska dhaaf iibka alaabooyinka aan iibkooda faa'iidadu kuugu jirin.

**7.** Muhiimad gaar ah sii macaamiishaada kuugu wanaagsan.

**6.** Ka taxadar fulinta waajibaadka ku saaran oo sharcigu dhigayo. Bixi canshuuraha iyo kharashaadka kale ee dawlada inta lagu guda jiro waqtigii laguu qabtey, sidoo kale ogeysiiyada sii xafiisyada dawlada waqti ku haboon.

**5.** Mar walba shaqadaada u qabo sidii aad macaamiisha ku heshiiseen, ama samee si ka wanaagsan haddii aad ku heshiiseen.

**4.** Suuqgeynta oo keliya kuma filna ganacsiga, balse waxaa sidoo kale lagaa doonayaa inaad taqaanid sida aad alaabtaada u iibineysid. Adigu bilow iyo raadi inaad xal u hesho baahida macaamiisha oo had iyo jeer is bed bedeleysa.

**3.** Sumcada wanaagsan muhiim ayey shirkada u tahay. Ka taxadar sumcada shirkada iyo muuqaalka ay macaamiishu ka haystaan.

**2.** Shirkaddu waxay shaqayn kartaa oo keliya haddii ay ku tiirsan tahay iibka alaab haysta suuq ku filan.

**1.** Ganacsinimada waa in la barto. Koorsada ganacsiga waxaa abaabula tusaale ahaan xafiiska shaqada iyo xogsashada iyo Xarumo Goboleedyada Horumarinta Dhaqaalaha, Gaadiidka iyo Bey'ada. Sidoo kale wixii cawinaad iyo talo siin ah weydiiso khuburada la talisa ganacsiyada.

# Erayo ganacsi

**BARTA UGU HOOSEYSA** macnaheedu waa hab xisaabeedka cadada alaabadii la iibiyey oo dhan, taas oo shirkada dakhligeeda iyo kharashkeedu ay is le'egyihiin ama faaiidadu ay tahay eber. Markaas faa'iido iyo khaasaaro midkoodna dhalamanaayo.

**BALANSI** waa hab xisaabeed ka mid ah xisaab xirka, kaas oo waqti cayiman cabira hantida iyo deymaha shirkada. Habka balansiga hantida shirkadu leedahay waxaa lagu liisgareeyaa dhanka bidix cinwaanka kharashgareynta hoostiisa, sidaas si la mid ahna raasumaalka shirkada iyo deymaha waxaa lagu qoraa dhanka midig cinwaanka amaahda hoostiisa.

**BUUGA DEYNTA** waa dukuminti, lagu calaamadeeyo dhinacyada deyntu ay khuseyso, cadada deynta, jadwalka bixin deynta iyo dulsaarka deynta ayaa lagu magacaabaa buuga deynta.

**TARTAN** Shirkadu waxay suuqgeynta u isticmaali kartaa hab ay kaga soocmeyso shirkadaha kale oo la midka ah. Waxyaabaha tartanka loo isticmaali karo waxay noqon karaan tusaale ahaan meesha shirkadu ku taalo, alaabada, tayada alaabada, qiimaha alaabta iyo helitaanka alaabada. Tartanka waxaa lid ku ah monopoliga, kaasoo ay hal shirkad oo kaliyuhu ay qabato hawlo ganacsi oo kaligeed gaar u ah oo aan cidna kula tartameynin, sidaas darteena shirkadu waxay awoodaa inay alaabadeeda ku iibiso iibiso hadba qiimaha ay dooneyso, sababtoo ah wax la tartamaya ma jiraan. Tartanka dhaqaalaha waxaa maareeya sharciga u dhigan tartanka ganacsi. Sidoo kale fiiri tartanka tooska ah iyo kan aan tooska ahayn.

**TUSMADA/KOOBIGA HAWLAHA GANACSIGA** waxuu sheegayaa, maxaa shirkada gudeheeda ka dhacaya, si aan u awoodno inaad soo saarno alaabta ama adeegga shirkada. Waa sawir ka bixinta hawlaha kala duwan shirkada iyo sida ay isku saameeyaan dhexdooda.

**TIXRAAC** waa wax kasheegida natiijada shaqadii hore, macaamiishii hore ama kuwa hada si loo cadeeyo inay hawsha u qalmaan.

**TARTANKA TOOSKA AH IYO KAN AAN TOOSKA AHAYN** Tartanka tooska ah waxaa si furan shirkadaada u la tartamaya shirkad kale oo iibineysa badeecado iyo adeegyo la mid ah kuwa ay shirkadaadu iibineyso. Tartanka aan tooska ahayn waxaa kugula tartamaya shirkad kale oo iibineysa badeecado iyo adeegyo ka duwan kuwa aad iibineyso, laakiin laga yaabo inay macaamiishaada ka ka kaafiyaan baahidii ay u qabilahaayeen badeecadahaaga iyo adeegaaga. Tuaale ahaan pizzeriyadu waxay si aan toos ahayn ula tartameysaa maqaayadaha hamburgerka, laakiin waxay hadana si toos ah ula tartameysaa pizzeriyooyinka kale.

**TyEL** waa caymiska hawlgabka shaqaalaha, kaas oo laga qaato shirkada caymiska hawlgabka. Ganasaduhu waa inuu caymis qaato, markii shaqaalaha mushaarkiisu uu dhaafo 52,49 oo Euro bishii (sannadka 2011).

**XIRFAD KU SHAQAYSTE** waa ganacsade, ku shaqaysta xirfadiisa, kaasoo aan lahayn saldhig go'an oo loogu soo hagaago ganacsigiisa, sidoo kalena aan lahayn shaqaale kale uu u shaqeeya. Farqiga ugu weyn ee u dhexeeya ganacsiga xirfad ku shaqaysiga iyo ganacsiyada kale waa in, xirfad ku shaqaystahu uu xaq u leeyahay in habka xisaabaadkiisu ay noqdaan habka fudud ee dakhliga iyo khrashka laga jarayo. Xirfad ku shaqayste ahaan waxaa ku shaqaysan kara masaajoolaha, dawaaraha ama farsamo yaqaanka alwaaxda. (feejigaan fiiri sidoo kale meesha ay ku taal qofka magaciisa ku ganacsada).

**XUQUUQDA AAN MAADIGA AHAYN** waxay dhawraysaa xuquuqaha aan maadiga ahayn, sida farsamada, qaabeynta, calaamadaha alaabooyinka iyo calaamadaha kale ee wax lagu aqoonsado. Xuquuqda aan maadiga ahayn waa xuquuq gaar ahaaneed, taas macnaheedu waa qofka iska leh oo keliya ayaa isticmaali kara ama waxaa isticmaali kara qof haysta ruqsadiisa tusaale ahaan alifaadaha shatiga loo sameeyey ama model alaabeed oo hawlo ganacsi laga leeyahay. Xuquuqaha aan maadiga ahayn waxaa sida badanloo qaybiyaa xuquuqda daabacaada ee sameeyaha (shay qoraal ama artis ah) xuquuqda wadsadeynta (tusaale ahaan shatiga, koobiga alaabooyinka, qaabeynta sheyga, calaamada alaabooyinka iyo xuquuqda isticmaalka magaca ganacsiga).

**XISAABAADKA**

**XILLI XISAABEED** waa waqti xisaabeed cayiman (sida badan 12 bilood), kaas oo lagu baaro natiijada ganacsiga (faa'iido ama khasaaro). Xaalad aan caadi ahayn shirkada xisaab xirkeedu wuxuu ahaan karaa imd ka gaaban ama ka dheer 12 bilood (ugu badnaan 18 bilood), markii la bilaabayo hawlaha ganacsiga ama la xirayo ama la badelayo waqti xisaab xirka (Sharciga xisaabaadka).

**XISAAB XIR** waa xisaab laga sameeyo xilli xisaabeedka. Waxaa lagu baaraa natiijada lacageed ee shirkada iyo heerka hantideedu ay gaarsiisan tahay. Sida caadiga ah waxaa la

sameyaa sannadkiiba hal mar. Sax ahaanshada xisaab xirka waxaa hubiya hantidhawre, haddii shirkada ay saarantahay masuuliyada sameynta hanti dhawrku ama shirkadu ay dooneyso inay si iskeed ah u sameyso hantidhawrid.

**XISAABINTA NATIIJADA** waa qayb ka mid ah xisaab xirka. Qaybaha kale waa balansiga, faalada hawlaha shirkada iyo macluumaadka lifaaqa ah. Xisaabinta natiijadu waxay soo ban dhigeysaa dakhiga sannad xisaabeedka iyo kharashka la xiriirka sannad xisaabeedka, xisaabaadkan oo ah qaab xisaab kala jarid ah. Xisaabinta natiijada waxaa laga arkayaa natiijada xilli xisaabeed ku saleysan waqti cayiman (faa'iido ama khasaaro).

**KAASH** Kaashka waxaa looga jeedaa lacagta kaydka ah ee la isticmaal ahaan koontada ugu jirta. Kaashka iibka waxaa loola jeedaa waxa ka soo baxa kala jarka qiimaha alaabta lagu iibiyey iyo kharashkii ku baxay soo iibintiisa ama sameyntiisa.

**KHARASHAADKA MA GUURAANKA AH** waa kharashaadka la xiriira hawlaha ganacsiga, kuwaas oo aan ku xirnayn tirada wax soo saarka ee waqtiga gaaban ah, base waa kharashaad mar walba sidooda joogto u ahaada. Kharashaadka noocaas oo kale ah waxaa ka mid ah, kirada goobta ganacsiga, mushaaraadka, kharashka xisaabaadka iyo kharashaadka ay sababaan isticmaalka makiinadaha wax soo saarku.

**KHARASH** waqtixisaabeed cayiman kharash ama qayb kharash ah oo lagu jaan gooyey.

**KHARASHAADKA IS BEDELA** waa kharashaadka alaabta iyo adeega wax iibsiga, kuwaas is bedela ayagoo ku xiran alaabta la iibinayo ama cadada adeega. Tan macnaheedu waa cadada lacageed, oo loo baahan yahay markii aan tusaale ahaan soo iibsaneyno alaabada qeeriin ee laga samayn lahaa alaabada aan iibineyno.

**KHARASHAADKA MUSHAARKA LA SOCDA** waa lacago sharci ah, kuwaas oo ay shirkadu ku qasnabtahay inay u shubto maamulka canshuuraha iyo shirkadaha caymiska marka laga reebo mushaarka burutada ah ee shaqaalaha la siinayo. Kharashaadka mushaarka la scoda waxaa ka mida, lacagta badbaadada bulshada, caymiska hawlgabka shaqada, caymiska shilaka- iyo caymis wadareedka nafta (ryhmähenkivakuutusmaksu).

**KHARASHGAREYN** Xisaabaadka shirkadaha dhacdooyinka iibka (dakhliga iyo kharashka) waxaa lagu calaamadeeyaa akoomo kala duwan. Dhanka bixi waxaa lagu qoraa kharashgareyn dhanka midigna amaah (deymaha iyo kharashaadka baxa).

**DULSAAR** waxaa laga bixiyaa isticmaalka deymaha la siiyo, taasoo ah boqolkii boqolkiiba qadar cayiman. Adigoo ah deyn qaate iyo deyn bixiyeba waxaa kula gudboon inaad doorato dulsaarka ugu yar iyo hadana haddii aad lacagta adigu dhigeysid inaad doorato dulsaarka ugu sareeya ee lacagta aad bangiga dhigtay aad ka heli karto. Dulsaarka aan is bedelin wuxuu ahaanayaa sidiisa waqtiga deynta oo dhan oo ma kordhayo mana naaqisayo, laakiin dulsaarka is bedela waxaa lala xiriiyey dulsaar raad raac leh, kaas oo hadba waqti cayiman dib la hubiyo. Dulsaarka tixraac ahaanta loo qqadanayo wuxuu tusaale ahaan noqon karaa dulsaarka-Euriborka. Euribor waa tixraaca dulsaarka oo maalin walba la soo bandhigo, kaas oo bangiyadu ay ugu yaboohaan inay lacagta damiin la la'aanta ah ku siinayaan bangiyada kale ee ku yaal suuqa lacagaha eurada. Euribor waa dulsaarka, ay bangiyadu lacaha uga soo deyntaan bangiyada kale, bangiyadu ay horay u sii deymiyaan ayagoo dulsaaraya dulsaar ka sareeya kan Euriborka. (Euribor+ qadar kale oo dulsaar ah).

**DIB U HABEYN** waa boor kajafid iyo wax kabadelida hawlaha ganacsiga. Marka dib u habeynta la sameynayo waxaa la yareeyaa kharashaadka tusaale ahaan ayadoo la yareynayo shaqaalaha, isla markaasna waxaa diirada la saaraa sidii kor loogu qaadi lahaa wax soo saarka shirkada waxaa kaloo la xoojiyaa wareega raasumaalka. Dib u ahayntu waa tilaabo ay ogolaato maxkamad, taas oo lagu daweeynayo waxqabadka shirkada aad u qaamowda. Habka dib u habeynta waxaa loo isticmaali karaa shirkadaha ku shaqeeya magaca shakhsiyaadka, shirkadaha furan iyo kuwa ay masuulka ka yihiin milkiilayaasha qaarkood, shirkadaha saamileyda ah ama iskaashatada.

**DAMIIN** macneheedu waa, in qof kale oo damiin ah (takaaja) uu deyn bixiyaha u balan qaado inuu bixinaayo deynta, haddii qofka deynta la siinayo uu awoodi waayo inuu bixiyo deynta. Damiintu waxay noqon kartaa tusaale ahaan damiin shakhsiyadeed, damiin wada jir ah, damiin guud ama damiin shuruud ku xiran.

**DAMAANAD QAAD** dukaanka alaabooyinka lagu iibiyo qofka iibinya ayaa masuul ka ah ciladaha ama waxyaaba ka maqan sheyga uu iibinayo. Sida badan iibiyuhu wuxuu macaamiisha sii yaa shey hagaagsan sheyga ciladeysan badelkiisa ama wuxuu macaamiisha u soo celiyaa lacagtii ay sheyga ka bixiyeen. Waqtiga damaanad qaadku wuxuu

qeexayaa intee in le'eg ayaa bibihu masuul kayahay ciladaha ku yimaada alaabada uu macaamiisha ka iibiyey.

**DIBAAJI** Dibaajiga wuxuu deyn bixiyuhu ku doonayaa inuu ku hubiyo helitaanka lacagtiisa. Tusaale ahaan qadimaada kirada oo ah laba ama sadex bilood, taas oo la bixinayo marka la kireysanayo gaabta ganacsigu ku shaqaynayo. Dibaajiga waxaa loo qaybiyaa dibaaji shey iyo dibaaji shakhsiyadeed. Dibaajiga sheyga waxaa loola jeedaa shey deynta rahmad ahaan loogu qaato. Deynta qaadashadeeda waxaa rahamad ahaan dhigayaa shanti cayiman. Dibaajiga shakhsiga macnihiisu waa ka qaadashada masuuliyad shakhsiyadeed deynta uu qaatay qof kale. Dibaajiga shakhsiyadeed tusaale ahaan waa damiinasho.

**DUKAANKA SHABAKADA** waa dukaan ku shaqeeya wax kala iibsiga xagga internerka ah.

**DULSAARKA LACAG LA SOO DAAHIDA** Waa dulsaar laga bixiyo biilasha waqtiga bixintooda lagala daahay, kharash dheeraad ah, haddii lacagtii asalka ahayd aan lagu bixin karin waqtigii ugu dambeyn in la bixiyo ay ahayd. Sharciga dulsaarku siduu qabo macaamiisha lagama qaadi karo wax ka badan dulsaarka daahitaanka guud wax ka sareeya. Dulsaarka daahidu dulsaar tixraac ah oo uu bangiga dhexe ee Yurub uu lixdii biloodba mar jaan gooyo + 7 %. Tan dulsaarka daahida ee ka sareeya ee ganacsaduhu ku dalici karo macaamiisha sannadka 2011 waxay noqon kartaa 8 %.

**RAASUMAALKA ISTICMAALKA** Hawlaha ganacsigu waxay u baahanyihiin raasumaal isticmaal, oo adeegsado daboolida kharashaadka joogtada ah, sida bixinta kirada iyo mushaaraadka.

**RAADIYAHA DUURKA** waa magac loo yaqaan war faafinta aan rasmiga ahayn, ee dadku isku sheeg-sheegaan. Raadiyaha duurku wuxuu noqon karaa sheekooyin dadka goobta shaqada ku dhex mara ama lagu qoro bogagga wadasheekaysiga ee internetka. Macluumaadka ku faafa raadiyaha duurka, macluumaadkaas mar walba sax ma ahan, mar marka qaarkoodna dadka qaar ayaa wararkaas si ogaal ah u faafiya.

**RAASUMAAL** waa lacag ama hanti (apportti), taas oo ganacsaduhu ama maalgeliye kale uu shirkada ku maalgeliyo. Raasumaalka waxaa u qaybin karnaa raasumaalkaaga iyo raasumaal qalaad (deyn) Raasumaalkaaga waxaa ku jira hantidaada shirkada ku jirta iyo sidoo kale hantidaada ka soo uruurtay dakhiga maalgelinta. Hantida qalaad waa hantida uu qof shirkada dibada ka ah uu ku maalgeliyey shirkada oo ay tahay in la bixiyo.

**SII IIBIYE** waa shirkada/qofka alaabooyinka wadanka keena ama sii iibiya badeecooyinka ay soo saaraan warshadaha shirkadaha kale.

**SAAMI** waa qayb ka mid ah raasumaalka saamiyada ee shirkada saamileyda ah. Milkiileyaashu waxay leeyihiin cadad cayiman oo saamiyada ka mid ah ama cad ka mid ah shirakada. Waxay leeyihiin awood codeed oo ay ku heleen saamiga ay shirkada ku leeyihiin, waxayna faaiida ka helayaan qayb u dhiganta saamiga ay shirkada ku leeyihiin. Heshiiska shirkada saamileyda ah waan ku qeexi karnaa waxay tahay awooda codeed ee saamiyadu ama xuquuqda qaadashada qaybata faaiidada (osinko-oikeus).

**SAMEYSIGA SHABAKAD WADA SHAQAYNEED** Shabakada waxaa loola jeedaa dadka ay wada shaqayntu idinka dhaxayso, kuwaas oo qiimo dheeraad ah u keena shirkada. Waxaa kaloo xiriir shabakadeed lala sameysan karaa shirkadaha tartanka kugula jira, tusaale ahaan xagga xayeesiinta inkoo joornaalka ku wada qoraya ogeysiis.

**SHEY** Rooti, caano, iyo badeecooyin kale, kuwaas oo haddiiba la isticmaalo, waa alaabooyin hal mar la isticmaalo. Alaabooyinka waqtiga dheer la isticmaalo waxaa ka mida tusaale ahaan makiinada dharka dhaqda iyo telefishinka, kuwaas oo waqtiga isticmaalkoodu uu dheer yahay. Ayadoo la adeegsanayo alaabooyinka wax soo saarka, waxaa la soo saaraa alaabooyinkaas la isticmaalo oo aan horay u soo sheegnay ama ama alaabooyin cusub oo wax soo saara. Kuwaas waxaa ka mid ah tusaale ahaan, alaabooyinka qeeriin/ceeriin, makiinadaha iyo shidaalka.

**SHARCI KU QOTOMA** Waa sharci ama sharciyo jira, kuwaas oo taabanaya arin gaar ah sheegayana sida wax loo qabanayo. Tusaale ahaan waxaa jira caymisyo iskaa ah, kuwaas oo qofku uu goaan ka gaarayo inuu qaadanayo iyo in kale, laakiin caymisyada sharciga ku qotoma waxay qasab ku yihiin qof walba.

**SHURUUDAHA BIXINTA BIILKA** waxay heshiiska kucadaynayaan goorma iyo sidee ayaa lacagta loo siinayaa ganacsadaha alaabta laga soo iibsadey.

**SHURUUDAHA IIBKA** waxay taabanayaan arimaha loo baahan yahay in laga heshiiyo marka wax la kala iibsanayo, tusaale ahaan qiimaha, tayada iyo waqtiga alaabada qofka iibsadey uu helayo.

**SHIRKAD PK AH** macnaheedu waa shirkad yar ama shirkad meel dhexaad ah.

**DHIGTA NOLOSHA** Alaabada ay shirkadu iibineyso waxay leedahay dhig nololeed, taas oo ka bilaabata marka alaabta la alifaayo ama la horu marinaayo si suuqa loo geeyo kuna dhamaata, markii alaabtaas iibkeedu uu hoos u dhaco ayna noqoto mid uusan iibkeedu faa'iido u lahayn shirkada.

**DHAQANGAL SHARCI** macanaheedu, go'aan maxakamadeed ama go'aan dawladeed, oo ka hadalkiisu dhamaaday oo aan mar dambe sida caadiga ah laga dacwoon karin.

**CANSHUURTA QIIMAHA LA SOCOTA** (alv) waan canshuur isticmaal, oo uu bixiyo qofka alaabta ama adeega isticmaalaya oo ku jirta qiimaha uu alaabta uga iibsanayo shirkada, taas oo ay shirkaduna u sii shubto maamulka canshuuraha. Canshuurta qiimaha la socota ganacsadaha ayaa ku dara qiimaha alaabta ama adeegga lagu iibinayo. Cadadeeda guudna wxay qiimaha alaabta ka tahay 23 % (laga bilaabo1.7.2010 ). Shirkadu waxay canshuurtaan ka jari karaan canshuurtii kale ee la socotay qiimaha alaabta ay horay u soo iibsadeen, dabadeeda farqiga ayey canshuur ahaan u bixinayaan. Canshuur jarida waxaa samayn kara oo keliya ganacsadaha ku kira diiwaanka masuul ka noqoshada bixinta canshuuraha qiimaha la socda.

**CANSHUURTA QADIMAADA AH EE MUSHAARKA** waa mid mushaarka laga jaro ama lacagta loo bixiyo magdhawga shaqo qabashda.

**CAQDI** waa balan qaad fulintiisa waajib kaa saaranyahay, taas macnaheedu waa in qofku sameeyo, waxa uu heshiiska ku galay inuu sameeyo ama waa uu balan qaaday inuu sameeyo.

**CAYMISKA GABOWGA EE GANACSADAHA (YEL-VAKUUTUS)** waa caymiska gabowga koo qasab ku ah ganacsadaha, oo asagoo la cuskanayo caymiskaan ganacsadaha lagu siiyo lacagta caymiska gabowga, lacagta jirada ee hayadda caymska gabowga qaranka (Kela) iyo lacagta hooyanimada, tan hooyonimada gaarka ah, aabenimada, lacagta waalidnimada iyo tan soo bogsashada. Lacagta caymiska gabowga ganacsadaha ee YEL waxay ku qotontaa dakhliga shaqada ee ganacsadaha. Lacagta hawlgabka ganacsaduhu (YEL )waa inay ugu yaraan u dhuganto mushaarka la siin lahaa qof xirfadle ah, haddii shaqada aad haysid la siin lahaa. Dakhliga shaqada ee YEL ma ahan dakhliga la canshuurayo ee ganacsadaha ama faa'iido ka soo baxday hawlaha ganacsiga ee shirkada. Xadka ugu hooseeya ee dakhliga shaqo ee caymiska gabowga ee ganacsaduhu (YEL) waa 6,896,69 oo Euro sannadkii (sannadka 2011). Hagitaano la xiriira qeexitaanka dakhliga shaqo ee ganacsaduha waxaa ka heleysaa Bogga internetka ee Xarunta badbaadada caymiska ee www.etk.fi, Vakuuttaminen (caymin), Yrittäjän vakuuttaminen (cayminta ganacsadaha), Yrittäjän työtulo (dakhliga shaqada ee ganacsadaha).

**GANACSI ILAA GANACSI** waa ganacsiga dhexmara laba shirkadood. Tusaale ahaan olole suuqgeyn ah oo ahaan kara mid loogu talo galay ama ku wajahan shirkadaha ganacsiga oo keliya kaas oo lugu yeero ganacsi ilaa ganacsi.

**GANACSATADA MAGACOODA KU GANACSADA** waxaa loo qaybiyaa xirfad ku ganacsade iyo ganacsade magaciisa ku furta ganacsi oo leh goob ganacsi oo loogu soo hagaago.

**GUNO** sida badan waa lacag uu qofku xaq u leeyahay inuu qaato sharci ahaan, waxaana tusaale ahaan ka mid ah lacagta hawlgabka.

**GANACSADE** waa sida ay shirkadu diyaarka ugu tahay inay iska bixiso biilasha inta aan la dhaafin taariikhda biilka lagu cayimay.

**GANACSADAHA MAGACIISA KU GANACSADA** waa ganacsade leh goob ganacsi oo joogto ah ama shaqaaleysiiya dad kale kale. Ganacsadaha goobta ganacsi leh waa inuu sameeyo xisaabaadka laba jibaaran (la soco. Is barbar dhig ganacsadaha goobta ganacsi leh).

**GANACSI QOYS** ganacsigu wuxuu ganacsi qoys noqonayaa haddii shaqaalaha shirkada intooda badan ay yihiin xubno hal qoys ka wada tirsan ama qaraabo dhaw ah, ha ahaadeen saamiley, milkiileyaasha masuuliyadu saaran tahay ama shakhsiyaad caawinaaya ganacsadaha.

**GUNADA SHAQA LA'AANTA** Qofka shaqa la'aanta ah oo shaqada raadinaya waxaa guno shaqo la'aaneed loo siin karaa lacagta Kelada ee kaalamada suuqa shaqada, lacagta shaqa la'aanta caadiga ah ama lagaha laga qaato qanada shaqa la'aanta oo ku xiran dakhligii hore ee shaqada.

**GANACSADE** waa qof, asaga kaligiis ama asaga iyo dad kale ay ka dhexeyaan hawlo ganacsi ayagoo hawlahaas ganacsi u isticmaalaya shirkad. Ujeedada hawsha ganacsiguna ay tahay in asagoo qaadanaya khatarta ganacsi uu fursadaha ganacsi u badelo miro dhal ama faa'iido.

**FAA'IIDO LAHAANSHO** Hawlaha ganacsigu waa kuwo faa'iido leh, haddii kala jarka dakhliga iyo kharashka hawlaha ganacsigu ay noqdaan ku aan qasaaro keenin ana naaqis ahayn, taas macnaheedu waa in shirkada ay u soo harto lacag (faa'iido).

**FAA'IIDADA GANACSIGA** waa xisaabta natiijada ka soo baxda marka la kala jaro dakhliga iyo kharashaka, taas oo xisaabta laga jaro kharashaadka oo dhan iyo qiimo dhaca hantida. Vaaiidada ganacsiga faa'iido ka horeysa qaybsiga faaiidada.

**FIKRADA WAXQABADKA** waa muujinta, waxa ay tahay ujeedada hawlaha shirkadu, ama wxaa maxay sababta ay shirkadu u jirto. Fikrada ganacsiga ee shirkadu waa qorsheynta hawlaha waxqabadka, taas oo sheegeysa sida loo meel marinayo fikrada waxqabadka.

**FAA'IIDO** Faa'iidada ganacsigu waa qayb ka mid ah xisaabaadka natiijada ganacsiga, taas oo aan ku soo saari karno markii aan dakhliga guud ee ay shirkadu iibisey ka jarno kharashka is bedela, kharashka aan isbedelin iyo qiimo dhaca qalabka ku dhacay oo gabowgu keeno. Faa'iidada ganacsigu waa natiijada hawlaha ganacsiga ka hor inta aan la qaybsan faaiidada.

**FAA'IIDO QAYBSI** waa faa'iidada la qaybin karo ee shirkadu ay sameyso. Faa'iidada ka soo baxda hawlaha ganacsiga waxaan faa'iido ahaan ugu qaybin karnaa milkiileyaasha ganacsiga, kadib marka laga jaro canshuurta.

**FIKRADA GANACSI** Hawlaha ganacsigu waxay ka aasaasmaan fikrada ganacsiga, taas oo lagu sifeeyo faadiidada ay macaamiisha u leedahay alaabadu ama adeeguba, fikrada ganacsigu waxay wax ka sheegeysaa oo kale suuqa iyo qaybta ganacsi iyi weliba sidii fikrada ganacsi ahaan loo meel marin lahaa.

**QIIMAHA ISWATA** waa qiimaha oo dhan oo aan lahayn wax qiimo dhimis ah, waxaa xitaa ku jira canshuurata.

**QADIMAADA CANSHUURTA** waxay dhacdaa markii qofka mushaarka qaata laga jaro canshuurta shakhsiyadeed oo aah hadba boqolkiiba inta kuna xusan kaarkiisa canshuuraha ama mid ku salaysan tigidka canshuurta qadimaada, taas oo ku salaysan qiyaastii dakhliga shirkada ee la sii sameeyey.

**QORSHAYNTA HAWLAHA GANACSIGA** waa qorshe qoraal ah oo la xiriira meelmarinta ficil ahaaneed ee fikrada ganacsiga. Waxaa ka mid ah qiyaasta waxyaabaha mirodhalka ganacsiga saameynta ku yeesha iyo xisaabaadka iibka, baahida lacageed iyo ilaha maalgelinta.

**QIIMO SAAFI AH** Qiimaha sheyga oo laga jaray dhamaan qiimo dhimista, ama aan mar dambe wax laga dhimeyn.

**QIIMO RIDID** Hantiga gaboobeysa oo la isticmaalo, sida mashiinada iyo qalabka kale, qiimihii lagu soo gaday ayaa laga ridaa qayb ka mid ah qiimihii lagu soo gaday marka xisaabaadka la sameynayo, inta alaabadaasi ay weli isticmaalka ku jirto oo ay leedahay qiimo dhaqaale (inta sheyga la isticmaalayo).

**QIIMO TUBEY TAANO AH** macnuhu waa in marka loo eego kharashka lagu sameeyey sheyga iyo qiimaha guud ee shuuqa ee shaygu uu yahay qiimo aad u jaban,

**QIIMO GAARID** waa qiimo gaarid ama heshiis loo soo bandhigo daraf ka mid ah kuwa wax kala iibsanaya (iibiyaha ama iibsadaha) oo loga heshiinayo shuruudaha wax kala iibsiga (tusaale ahaan qiimaha iyo waqtiga alaabta la keenayo).

**QAYBTA GANACSI** waxay wax ka sheegeysaa shaqooyinka ganacsi ee shirkadu qabanayso nooca ay yihiin, tusaale ahaan hawlaha maqaayadaha cunta ama tafaariiq gadida maryaha.

**QASNADA SHAQA LA'AANTA** waxay xubnaheeda shaqa la'aanta ah siinaysaa lacag maalmeed ku xiran mushaarkoodii hore. Taas macnaheedu waa in cadadka lacag maalmeedku ay ku xiran tahay mushaarkii hore. Ku biirida qasnada shaqa la'aantu waa iskaa wax u qabso. Dalka Finland qasnado kala duwan oo shaqo la'aaneed oo ay kala leeyihiin shaqaalaha iyo ganacsatadu.

**QAYBTA GANACSIGA GUUD** macnaheedu, in sharkadu ay qabato ama ay suurtogal u tahay inay qabato hawlo ganacsi oo dhan walba leh. Qaabkaan ganacsiga guud ah waxaan ku darsan karnaa dukumintiyada aasaasida ganacsiga kadibna waxaan ogeysiin karnaa xafiiska diiwaangelinta ganacsiga (lama ogeysiinayo qayb ganacsi oo cayiman, sida qaybta dhismaha ama qaybta nadaafada.)

**QIIMO** waa magdhaw lacageed oo laga dhiibayo isticmaadka alaabta ama adeega.

**QANDARAAS** waa hawl qabasho laga iibsado shirkada banaankeeda, oo hawshu uu qabanayo qofka ama shirkad kale, dabadeedna la siinayo hawsha la qabtay lacag u dhiganta.

**QAYBAHA DAWLADA** Degmooyinka iyo laamaha kale ee dowlada, kuwaas oo gacanta ku haya maamulka wadanka iyo waxyaabaha ay ka midyihiin waxbarashada, difaaca dalka iyo hawlaha la xiriira daryeelka caafimaadka.

**QULQULKA QASNADA** waa lacagta qasnada ka soo gasha alaabooyinka ama adeegyada la iibiyeyo, sidoo kale waa lacagta qasanada ka sii baxda.

**KALA QAYBIN** waa qaybo u kala qaybinta macaamiisha, tusaale ahaan macaamiisha waxaan u kala qaybin karnaa ama u kala qaanadeyn karnaa anagoo eegeyna waxyaabo ku saleysan da'da, waxbarashada iyo dakhligooda. Markii aan kala qaybino qolo walba waxaa ku wajihi karnaa adeega ama alaabta u gaarka ah isla markaasna suuqgeynta waxaa lagu wajahayaa kooxo la ogyahay oo macaamiisha ka mid ah sidaasna waxaan ku heleynaa faa'iido dhanka tartanka ah.

**LACAGTA LA IIBIYEY WAQTI CAYIMAN** waa lacag aysan la socon canshuurta qiimaha la socota, taas oo shirkadu ka hesho hawlaheeda ganacsi, sida iibinta alaabta iyo adeega waqti cayiman gudihiisa ah, tusaale ahaan iibka bisha ama sannadka. Lacagta la iibiyey lagama jarin kharashaadka isbedela iyo kuwa joogtada ah oo la xirrira iibka alaabta ama adeega.

**LACAGTA BILOWGA** waa kaalmo lacageed oo lasiiyo ganacsadaha cusub, laguna bixiyo hadba sida loo arko markaas xaalada ganacsadaha, taas oo macnaheedu yahay in bixinta kaalmadu aysan ahayn wax automatik ah. Kaalmada waxaa laga dalban karaa Xafiiska shaqada iyo xoogsashada. Codsiga kaalmada bilowga waa in la sameeyo kahor inta aan la bilaabin hawlaha ganacsiga.

**LACAGTA IIBKA KA SOO BAXDA** waa cadadka lacageed, oo iibiyaha u soo harta, marka qiimaha macamiishu dhiibtay laga jaro kharashaadka (isbedela) oo sida tooska ah ula xiriira samaynta sheyga ama adeega. Lacagta iibka ka soo baxday ma tixgelineyso kharashaadka joogtada ah ee hawlaha ganacsiga. Hadbassida ay u hooseeyso boqolkiiba lacagta iibka ka soo xaroota marka kharashka tooska ah laga jaro, ayey shirkaduna ugu baahanaysaa inay sameyso iib faro badan, si ganacsigu uu u noqdo mid faa'iido leh.

**MALAGA GANACSIGU** waa shakhsi gaar ah, oo lacagtiisa ku maalgeliya shirkadaha soo kobcaaya. Malaga ganacsigu marka laga reebo maalgelinta, wuxuu noqon karaa xubin ka mid ah gudiga shirkada, saaxiib ama wuxuu shirkada ka caawin karaa samaynta xiriirada ganacsiga iyo abuurida xiriirada wada shaqaynta ganacsi ee shirkada kala dhexeeya shirkadaha kale.

**MAALINTA UGU DAMBEYSA BIXINTA BIILKA** tusaale ahaan waa maalinta ugu dambeysa oo ay tahay in biilka la bixiyo.

**MAALGELIN** waa maalgelin ganacsi. Waa kharash saameyn waqti dheer ah leh, kaas oo laga sugayo inuu keeno dakhli soconaya waqti ka badan hal xisaab sanadeed. Maalgelinta aan maadiga ahayn waxay noqon kartaa waxbarashada, cilmi baarista ama ilaalinta bey'ada. Maalgelinta maadiga ah waxay tusaale ahaan noqon kartaa maalgelinta makiinadaha iyo qalabka wax soo saarka.

**MAALGELINTA-LEASINGIGA AH** waa kiro waqti dheer ah oo loo isticmaalo hantida isticmaalkeeda oo kelya xaqa loo leeyahay, sida makiinadaha ama qalab kale oo la soo kireysto, qalabkaasi marna ma noqonaayo hanti uu leeyahay qofka isticmaalaya, balse isticmaalka alaabtaan waxaa laga bixinayaa lacag, kadibna waxaa loo celinayaa milkiilihii iska lahaa. Maalgelinta-Leasingka waxaa lagu helayaa isticmaalka mashiinada ama qalabka akale ayadoon waxa lacag badan kaaga xirmeyn marka aad soo qaadanayso, taas macnaheeduu waa in kirda Leasingku ay kaaga jabantahay soo iibsashada qalab aad adigu milki ahaan u leedahay.

**MAALGELIN** Bilaabida hawsha ganacsigu waxay mar walba u baahan tahay lacagta. Maalgelintu waxay ahaan kartaa ganacsadaha lacagtiisa, lacagta iibka ka soobaxday, deyn ama kaalmo dawladeed.

**MAALGELINTA DAKHLIGA SHIRKADA** Maalgelinta dakhliga waxaa loo la jeedaa farqiga kala jarida dakhliga iyo kharashka ka soo baxda hawl maalmeedka shirkada.

**MIISAANIYAD** waa qorshaha hawlaha ganacsiga, kaas oo ujeedadiisu ay tahay in la meelmariyo waqti cayiman gudihiis. Qorshaha waxqabadka waxaa ku jira dakhliga iyo kharashka la doonayo in hawsha ganacsiga lagu fuliyo kaas oo qoraal xisaab ahaaneed lagu soo bandhigay tusaale ahaan Euro (qiyaasta dhaqaalaha).

**MUSALIFID** macnaheedu waa in shirkadu dhaqaalo beesho, taas oo keyneysa dhamaadka hawlaha ganacsiga, markaas kadibna waxaa la xaraashaa dhamaan hantida la lacagayn karo si loogu bixiyo deymihii ka dhashay hawlihii ganacsiga ee shirkada. Musalifidu waxay ka bilaabataa markii uu codsado kan deynta lagu leeyahay ama kan deynta shirkada ku leh.

**MUG** waa awooda shaqo iyo wax soo saar oo la qabankaro. Intee in le'eg oo alaab ah ayey shirkadu awoodaa tusaale ahaan iney soo saarto waqti cayiman gudihiis.

**NATIIJADA LACAGEED EE SAAFIGA AH** waxay sheegeysaa natiijada lacageed ee ka soo baxday hawlaha ganacsiga canshuurta kadib. Natiijada lacageed ee saafiga ah waxay soo baxaysaa markii lacagta ay shirkadu gaday waqti cayiman gudihiis laga jaro kharashka isbedela, kharashka joogtada ah iyo canshuurta. Natiijadu waxay ahaan kartaa faa'iido ama khasaaro.

**NATIIJO (SALDO)** waa xisaabta ka soo baxda kala jarka labada dhinac ee xisaabaadka shirkada kharashgareyntaamaahda. Saldada koontadu waxay sheegeysaa cadada biilka ama deynta.

**NOOCYADA GANACSIGA** Noocyada ganacsiga ee dalka Finland laga diiwaangeliyo waxay kala yihiin magac ku shaqaysasho (toiminimi), shirkad furan (avoin yhtiö), shirkaad maalgelinteeda ay leeyihiin milkiileyaal badan laakiin masuuliyadu ay saaran tahay milkiileyaal gaar ah (kommandiittiyhtiö), shirkad ay saamiyo lagu leeyahay (osakeyhtiö) iyo iskaashato (osuuskunta) iyo noocyo shirkado dhif ah shirkad saamiley dadweyne iyo shirkada Yurub. Nooca shirkadu wuxuu saameyn ku yeelanayaa xadeynta masuuliyada ganacsadaha, cadada ugu yar ee asaaseyaasha, canshuuraha, qaybinta faa'iidada iyo lacagta marka hore shirkada lagu diiwaangelinayo iyo weliba saamiga ugu yar ee looga baahan yahay aasaasida shirkada.

**WADAMADA XUBNAHA KA HA URURKA MIDOWGA YURUB** (sannadka 2011): Holand, Belgium, Bulgaria, Espain, Irlanti, Ingiriiska (boqortooyada isku tagtay ee Ingiriiska iyo Waqooyiga Irland iyo Gibralta), Talyaaniga, Austeria, Giriiga, Qubrus, Latvia, Lethuania, Luxemburg, Malta, Portuqiiska, Poland, Fanansiiska, Romania, Swiden, Jarmalka, Slovakia, Slovenia, Finaland, Denmark, JamhuuridaTsek, Hungary iyo Stonia.

**WAX CUSUB KEENID** waa keenida shay ama adeeg aan horay loo arag oo cub, ama casriyeyn wax horay u jirey.

**HAWSHA LACAG KASBASHADA**, waa shaqo lagu doonayo in dakhli lacageed ama wax u dhigma dakhli lacageed lagu helo.

**HANTI AAN LACAG AHAYN** macnaheedu waa hanti shirkad lagu maalgeliyey oo aan lacag ahayn laakiin u dhiganta. Hantida aan lacgta ahayn waxay ahaan kartaa oo kelya hanti, shirkada lagu maalgeliyey u leh qiimo dhaqaale. Balanqaadka shaqo qabashadu ma ahaan karo hanti aan lacag ahayn oo wax lagu maalgeliyo. Marka shrikada saamileyda ah la aasaasayo saamiyada shirkada saamileyda ah waxaa lagu bixin karaa hanti aan lacag ahayn. Hanti aan lacag ahayn waxaan tusaale ahaan loo dhiibi karaa qalab shaqo ama gaari ay shirkadu hawlaheeda ganacsi u isticmaasho.

**HAWSHA NOLOL LA SOO BIXIDU** waa hab lacag lagu kasbado, si loo noolaado. Nolol la soo bixida waxaa tusaale ahaan ka mid ah hawlaha ganacsi ee ay ka mid yihiin, qaadida iyo rarida alaabooyinka, hoteelada, sameynta adeegyada xisaabaadka iyo hawlaha ganacsiga maqaayadaha.

**HABKA XISAABAADKA LABA JIBAARAN** Fiiri Samaynta xisaabaadka.

**HABKA XISAABAADKA EE FUDUD** Xisaabaadka fudud waxaa qoritaanka lagu calaamadeeyaa hadba aydoo la fiirinayo dhaqdhaqaaqa lacagta kharashka, dakhliga, dulsaarka, canshuurta iyo isticmaalkaaga alaabada iyo adeega. Habkaan wuxuu wax ka sheegayaa oo kelya shirkada dakhligeeda iyo kharashkeeda. Xisaab xirka habka xisaabaadka fufud waxaa la sameyaa oo keliya xisaabta natiijada ganacsiga oo ah kala jarida dakhliga iyo kharashka ee balansiga lama xisaabiyo. Xirfad ku shaqaystuhu wuxuu isticmaali karaa habka xisaabaadka fudud, haddii uu sidaas doonayo.

**HABKA XISAABAADKA LABA JIBAARAN** macnihiisu waa in, dhaqdhaqaaq kasta oo lacageed lagu calaamadeeyo laba koonto, ama kharashgareyn – (lacagaha soo xarooda) iyo amaah (kharashaadka baxa iyo deymaha). Qoritaanka laba jibaaran ee xisaabaadku waxay noo sheegaayaan sababaha ay lagaguhu u dhaqdhaqaaqayaan iyo teeda kale koontada lacagta ee la isticmaalayo. Ayadoo la tixraacayo habka xisaabaadka laba-jibaaran waxaa la sameeyaa xisaab xir ku saleysan taariikhaha biilasha iyo isticmaalka adeega. Xisaab xirku waxuu ka koobantahay natiijada ka soo baday kala jarka dakhligii iyo kharashaadkii sannad xisaabeedka iyo xisaabta hantida raasumaalka ah, deymaha iyo macluumaadk la xiriira labadaas qaybood. Dhammaan ganacsatada intaan ka ahayn xirfad ku shaqaystayaasha waa inay sameeyaan habka xisaabaadka ee laba jibaaran.

**HOWSHA XIRIIRKA SHIRKADA** Waa hawl iska socota, taas oo shirkadu ku dooneyso inay ku gaarto heer xayndaabka xiriir muhiim ah sida kuwa wada shaqayntu kala dhaxayso, isfahamka shirkada iyo macaamiisha, taageero iyo bari taarid. Waxaa la mid ah soo gaabinta ah hawsha PR:ta ama xiriirka dadweynaha.

**HABKA CANSHUURAHA KASTAMKA** markii wadanka alaab la keenayo ama laga dhoofinayo waxaa la xiriira hawlo canshuurid iyo maamul ah. Canshuuraha kastamaka waxaa laga macaamilaa shaqaalaha kastamka shirkadaha (www.tulli.fi > Yrityksille). Marka canshuuraha kastamka la sameynayo waxaa la buuxiyaa foom ogeysiin ah, kaas oo shaqaalaha kastamka lagu siinayo macluumaad la xirira alaabada, tusaale ahaan qiimeheeda iyo cadadeeda.

**HABKA XISAABAADKA SAHALAN, FIIRI XISAAB CELINTA (→ XISAABAADKA)**

**AAGA-ETA** wadamada  Aaga dhaqaalaha reer Yurub waxaa ka mid ah wadamada Ururka midowga Yurub iyo wadamada Island, Liechtenstein iyo Norway.

**AMAAHDA** Xisaabaadka shirkada oo ah dhacdooyinka lacageed waxaa lagu calaamadeeyaa koontooyinka, kuwaas oo akoonka midig loo isticmaalo amaahda koontada bixna loo isticmaalo magaca kharashgareyn.

**ASTAANTA GANACSIGA** ama logadu waa aqoonsi loo diiwaangeliyey shirkada oo ay kaga soocan tahay shirkadaha kale, taas oo ay macaamiishu shirkada uga aqoonsanayaan shirkadaha kale ee tartanka kula jira.

**ALAABOOYINKA MAALIN WALBA LA ISTICMAALO** waa alaabooyinka maalin walba la isticmaalo, sida dhamaan cuntooyinka, saabuunta, waraaqaha suuliga.

**AGAASIME** wuxuu maareeyaa hawl maalmeedka shirkada asagoo ku shaqaynaya hagitaanada iyo wareegtooyinka ay maamulka shirkadu sameeyeen. Wuxuu masuul ka yahay in xisaabaadka shirkadu ay sharciga waafaqsan yihiin iyo in maamulka hantida shirkada loo maareeyey si lagu kalsoonaan karo. Agaasimu waa inuu siiyo maamulka shirkada iyo xubnaha shirkadaba macluumaadka muhiimka u ah inay hawlahooda gutaan gudiga maamulka shirkadu.

**ADDEEGA GACAN QABASHADA SHIRKADAHA CUSUB** wuxuu shirkadaha cusub ka caawiyaa, xagga koritaanka iyo horumarka. Adeegani wuxuu shirkadaha siiyaa, tusaale ahaan goob ay ku shaqeyaan, waxbarasho iyo suurtogelinta inay shabakad la sameystaan shirkadaha kale. Ganacsaduhu wuxuu adeegga gacan qabashada la sameynayaa heshiis waqti cayiman ku leh, sida badan heshiis ah laba sano.

**ISKU FILNAANSHO** Shirkadu way isku filan tahay haddii raasumaalkeedu uu aad ugu badan yahay deymaha uu leeyahay.

# Xarumaha shirakadaha cusub waxay u adeegayaan

| | |
|---|---|
| **Espoo** | Espoon Seudun Uusyrityskeskus ry |
| **Helsinki** | YritysHelsinki, Naisyrittäjyyskeskus ry |
| **Hyvinkää** | Hyvinkää-Riihimäen Seudun Uusyrityskeskus Yrityspaja ry |
| **Hämeenlinna** | Hämeen Uusyrityskeskus ry |
| **Iisalmi** | Ylä-Savon Kehitys Oy |
| **Imatra** | Imatran Seudun Kehitysyhtiö Oy |
| **Joensuu** | Pohjois-Karjalan Uusyrityskeskus ry |
| **Jyväskylä** | Tuhansien Järvien Uusyrityskeskus ry |
| **Kemi-Tornio** | Meri-Lapin Startti Oy |
| **Kokkola** | Keski-Pohjanmaan Uusyrityskeskus ry Firmaxi |
| **Kotkan-Haminan seutu** | Cursor Oy |
| **Kuopio** | Kuopionseudun Uusyrityskeskus ry |
| **Lahti** | Lahden alueen Uusyrityskeskus ry |
| **Lohja** | Länsi-Uudenmaan Uusyrityskeskus ry |
| **Loimaa** | Loimaan seutukunnan kehittämiskeskus ry |
| **Loviisa** | Loviisanseudun Uusyrityskeskus ry |
| **Mikkeli** | Mikkelin Seudun Uusyrityskeskus ry Dynamo |
| **Oulu** | Oulun Seudun Uusyrityskeskus ry |
| **Pietarsaari** | Pietarsaaren Seudun Uusyrityskeskus Concordia |
| **Pori** | Yrityspalvelu Enter, Porin Seudun Yrityspalveluyhdistys ry |
| **Porvoo** | Porvoon Seudun Uusyrityskeskus ry |
| **Savonlinna** | Itä-Savon Uusyrityskeskus ry |
| **Seinäjoki** | Etelä-Pohjanmaan Uusyrityskeskus Neuvoa-Antava |
| **Tammisaari** | Eteläkärjen Uusyrityskeskus ry |
| **Tampere** | Tampereen Seudun Uusyrityskeskus ry Ensimetri |
| **Turku** | Turun seudun yrityspalvelukeskus Potkuri |
| **Tuusula** | Keski-Uudenmaan Uusyrityskeskus ry |
| **Uusikaupunki** | Vakka-Suomi/ Ukipolis Oy |
| **Vaasa** | Vaasanseudun Uusyrityskeskus Startia |
| **Vantaa** | Vantaan Uusyrityskeskus ry |
| **Varkaus** | Wäläkky Keski-Savon Uusyrityskeskus ry |



Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto

**www.uusyrityskeskus.fi**

Vipuvoimaa EU:lta 2007–2013